








# Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada Soomaaliyeed





**Halkan kala soodeg dhammaan daraasaadka Machadka Heritage:**

[www.heritageinstitute.org](http://www.heritageinstitute.org)

**Ama barta internetka ee loo dhisay Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada Soomaaliyeed:**

[www.humancapital.so](http://www.humancapital.so)

**Nagala Soco:**

 <https://www.facebook.com/HIPSINSTITUTE/>

 <https://twitter.com/HIPSINSTITUTE>

**Nagala soo Xiriir:**

 [contact@heritageinstitute.org](mailto:contact@heritageinstitute.org)

Xuquuqda qoraalkani waxa ay u dhawran tahay © 2020 | Machadka Heritage ee Daraasaadka iyo Jaamacadda City ee Muqdisho.

Akhristaha waxaa loo ogol yahay inuu rogto, sawirto ama daabacdo qoraalkan haddii aannu ka ganacsanayn. Xuquuqlayaashu, Machadka Heritage ee Daraasaadka iyo Jaamacadda City ee Muqdisho, waxa ay codsanayaan mahadnaq iyo nuqul wixii aad daabacdo ah. Isticmaal nuqulka asalka ah ee ku jira barta Internetka ee HIPS <http://www.heritageinstitute.org/> ama [www.humancapital.so](http://www.humancapital.so) haddii aad Internetka soo galinayso.

© Heritage Institute for Policy Studies and City University of Mogadishu, 2020.

# Contents

<b>Hordhac</b>	5
<b>Mahadnaq</b>	6
<b>Dulucda Cilmi-Baarista</b>	9
Ujeeddooyinka Muhiimka ah Waxaa ka Mid ah	9
Mabaa'diida Hagaya Cilmi-Baarista	10
Aaminaadaha (Qiyamka) Aasaasiga ah ee Horumarinta Karaanka Bulshada	10
Habraaca Cilmi-Baarista	11
Qeexidda Karaanka Bulshada	11
<b>Natiijooyinka Muhiimka ah ee Shanta Daraasadood ee Gundhigga ah</b>	13
Tacliinta	13
Caafimaadka	13
Shaqada iyo Shaqaalaha	15
Beeraha iyo Xoolaha	15
Kalluumaysiga	17
<b>Qodobada Muhiimka ah ee Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada</b>	18
Tabaha/Istiraatiijiyoyinka Meelaha Badan Khuseeya	18
<b>Aqoon-Yahanka Cilmi-Baarista ka Qayb Qaatay</b>	21
<b>Waa Maxay Karaanka Bulshadu?</b>	26
Barnaamijka Horumarinta Karaanka Bulshada	28
Mabaa'diida Hagaya Mashruucan Waxaa ka Mid ah	29
<b>Habraaca Cilmi-Baarista</b>	30
Ilaha Xogta, Qaabka la Raacay iyo Hagayaasha	30
Uruurinta Xogaha Tiroraaca ah (Quantitative) iyo Falanqayntooda	31
Agaasinka Xogta Tiraabraaca ah (Qualitative) iyo Lafo-Guridda Waraysiyada	31
Gaabiska Daraasadda	32
<b>Dib u Eegidda Xaaladda Horumarinta Karaanka Bulshada</b>	32
Casharradii Joordan ay ka Baratay Cilmi-Baaristeedii Lixda Waddan	34
Qaybaha Tabta / Istiraatiijiyadda Horumarinta Karaanka Bulshada	35
Is Waafajinta Horumarinta Karaanka Bulshada iyo Xaaladda Dalka	36
<b>Xaaladda Soomaaliya</b>	38
Nabadgalyada	38
Siyaasadda	40
Xiriirka Arrimaha Dibadda	42
Dhaqaalaha	45
Xaaladda Bani'aadnimada iyo Horumarineed	46
<b>Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ee Qaran</b>	48
Tabaha Horumarinta Karaanka Bulshada ee Dhinacyo Badan Taabta	50
<b>Tabaha Horumarinta Karaanka Bulshada ee Waax Kasta</b>	52
Caqabadaha Curyaamiyey Waxbarashada	53
Xalka, Tabaha iyo Tallaabooyinka Istiraatiijiga ah ee Lugu Horumarin Karo Caafimaadka	64
Caqabadaha Curyaamiyey Shaqada iyo Shaqaalaha	70
Caqabadaha Curyaamiyey Ila-Dakhliyeedka Beeraha iyo Xoolaha	75
Caqabadaha Curyaamiyey Kalluumaysiga	83



---

## Hordhac

Hindise cusub oo ay iska kaashadeen Machadka Heritage ee Daraasaadka iyo Jaamacadda City ee Muqdisho oo ay taageerayeen in ka badan labaatameeyo aqoonyahanno iyo la taliyayaal caan ah ayaa sameeyey cilmi-baaris balaaran oo ku saabsan horumarinta karaanka bulshada Soomaaliyeed. Cilmi-baaristaasi waxa ay diiradda saartay caafimaadka, shaqada iyo shaqaalaha, waxbarashada, kalluumaysiga, xoolaha iyo beeraha.

Ujeeddada ugu weyn ee hawshani waxa ay ahayd soo saaridda tabtii ugu horraysey ee horumarinta karaanka bulshada Soomaaliyeed. Waxa annu il gaar ah ku eegnay sida bulsho bedqabta oo xirfad leh ay u isticmaali karto kheyraadkeeda dabiiciga ah si loo helo horumar waara. Waxaa kale oo annu baarnay sida ugu wanaagsan ee loo dhiirri gelin karo loona midayn karo saamileyda horumarinta karaanka bulshada gaar ahaan dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, bahda tacliinta iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay.



*In ka badan 1,000 qof oo danaysa horumarinta karaanka bulshada oo ka kale socda dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, iyo bahda waxbarashada ayaa ka qayb qaatay cilmi-baarista gunta dheer ee aan iyada oo kale wali Soomaaliya laga samayn*

In ka badan 1,000 qof oo danaysa horumarinta karaanka bulshada oo ka kala socda dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, iyo bahda waxbarashada ayaa ka qayb qaatay cilmi-baarista gunta dheer ee aan iyada oo kale wali Soomaaliya laga samayn. Wasaaradda Qorshaynta Soomaaliya kolkii ay dib u eegtay natiijooyinkii hordhaca ahaa ee daraasaddan, waxa ay u aqoonsatay horumarinta karaanka bulshadu in ay tahay *ahmiyad qaran*.

Daraasaddani ma hirgasheen haddii aannaan kaalmo balaaran ka helin dowladda federaalka ee Soomaaliya iyo dowlad goboleedyada. Waxaa qayb libaax ka qaatay dhaqaajinta iyo dhammaystirka daraasaddan Wasiirka Qorshaynta Qaranka, Xildhibaan Jamaal Maxamed Xasan iyo wasiirkii hore ee Shaqada iyo Adeegga Bulshada, Xildhibaan Saalax Axmed Jaamac. Waxaa kale oo door muhiim ah ka qaatay ebyidda daraasaddan xubno badan oo dowladda dhexe ka tirsan. Kuwaa waxaa ka mid ah Wasiirka Waxbarashada Cabdullaahi Goodax Barre, wasiirkii hore ee waxbarashada Cabdiraxmaan Daahir Cismaan, wasiirkii hore ee Shaqada iyo Shaqaalaha, Sadiiq Warfaa, Wasiir ku-xigeenka Caafimaadka, Maxamed Siciid, Wasiirka Maaliyadda Dr. Cabdiraxmaan Bayle iyo Wasiir ku-xigeenkiisa Dr. Cabdullaahi Sheekh Cali. Sidaa oo kale waxaa door weyn ka ciyaaray dhammaystirka daraasaddan madaxda haatan iyo kuwii hore ee dowlad goboleedyada dalka.

Maxsuulka xuddunta u ah daraasaddani waa tabta ama istiraatiijiyadda qaran ee horumarinta karaanka bulshada iyo tallaabooyinka gaarka u ah laamaha kala duwan sida bahda waxbarashada, shaqo abuurayaalka ama dowladaha sida madda federaalka ama kuwa gobolada. Tabta ama istiraatiijiyadda daraasaddan waxaa weheliya talooyin muhiim ah sida midaynta dadaalka saamileyda horumarinta karaanka bulshada, abuuridda nidaam qaran oo shahaadooyinka la xiriira, abuuridda qiyam ama dareen qaran iyo maskax u diyaarsan tababarrada farsamada gacanta iyo xirfadaha (TVET) iyo kobcinta ilaha wax soo saarka (beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga).

Cilmi-baaristani ma ahayn mid annu wax ka barannay oo kaliya, waxa ay sidaas oo kale ahayd mid na tustay gaabiskayaga. Waxa ay qeexday caqabadaha horyaalla horumarka Soomaaliya. Maaddaama annu qayb ka nahay hoggaanka sare ee nidaamka waxbarashada ee dalka, waxa annu u haysanay in annu si wacan u fahamsan-nahay qotodheerida iyo baaxadda caqabadaha ku teedsan horumarka karaanka bulshada. Laakiin daraasaddani waxa ay nagu qancisay in wax badan ay naga dahsoonaayeen. Sidaa awgeed, waxa annu ku kalsoonahay saamileyda akhriin doonta daraasaddan iyo tabaha ama istiraatiijiyoyinka la socota in ay nagu raaci doonaan in ay lama huraan tahay in fulinta tabtan la siiyo mudnaan qaran.

**Bare Sare, Cabdullaahi Axmed Bariise**  
Madaxweyne, Jaamacadda City, Muqdisho

**Cabdirashiid Khaliif Xaashi**  
Agaasimaha Machadka Heritage

---

## Mahadnaq

Waxaan mahad balaaran u celinaynaa Soomaalidii 1,000 qof ka badnayd ee aannu la tashannay si aannu usoo saarno lix (6) daraasadood oo gundhig ah iyo tabta qaran ee horumarinta karaanka bulshada ee la socota, aadna hadda akhrinayso. Haddii aannan helin dadkaas taageeradooda iyo ka qayb-qaadashadooda, daraasaddani ma soo baxdeen.

Cilmi-baaristani waxa ay cuskatay kaalmada, ka qayb-qaadashada iyo hagidda madaxda lix wasaaradood oo muhiim ah. Wasiirka Qorshaynta, Maalgalinta iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Danjire Jamaal Maxamed Xasan iyo shaqaalaha wasaaraddiisa; wasiirkii hore ee Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Saalax Axmed Jamac oo hadda ah wasiirka dastuurka iyo wasiirka haatan ee Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Sadiiq Warfaa iyo shaqaalaha wasaaraddaas; wasiirkii hore ee waxbarashada Cabdiraxmaan Daahir Cismaan iyo intii la shaqayneysey; wasiirka caafimaadka Dr. Fowziya Abiikar iyo wasiir ku-xigeenka Maxamed Siciid iyo shaqaalaha wasaaraddaas.

Waxa aan sidaa oo kale u mahad celinaynaa hoggaanka wasaaradda waxbarashada: wasiir Cabdullaahi Goodax Barre, wasiiru dowlaha Cabdiraxmaan Maxamuud Cabdulle (Jaabir), wasiir ku xigeenka Faysal Cumar Guuleed, Agaasimaha Guud Axmed Yuusuf, Agaasimaha Qorshaynta iyo Dakhliga Khadiija Cabdullaahi Jimcaale, Agaasimaha TVET, Cabdicasiis Nuur Maxamed iyo la taliyayaasha sare Dr. Ibraahim Axmed Maxamed iyo Dr. Cabdullaahi C. Cumar. Waxa aan sidaa oo kale mahadcelin gaar ah u diraynaa wasiir ku-xigeenka wasaaradda maaliyadda, Dr. Cabdullaahi Sheekh Cali (Qaloocow.) Dr. Cabdullaahi waxa uu taageeray kana qaybqaatay kulan-hawleedkii daraasaddan ee lagu qabtay Muqdisho 29 Abriil 2019, kaa oo ay ku kulmeen saamileyda horumarinta karaanka bulshada.

Waxa aan iyana u mahadcelinaynaa dhammaan madaxweynayaashii hore iyo kuwa haatan ee dowlad goboleedyada kuwaa oo taageeray fududeeyeyna cilmi baaristii la xiriirtay horumarinta karaanka bulshada ee aannu ka samaynay goboladooda. Kuwaa waxaa ka mid ah Madaxweynaha Koonfur Galbeed Cabdicasiis Xasan Maxamed (Laftagareen) iyo Madaxweynihii hore Shariif Xasan Sheekh Aadan; Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni iyo Madaxweynihii hore Dr. Cabdiweli Cali Gaas; Madaxweynaha Jubbaland Axmed Maxamed Islaan; Madaxweynaha Hirshabeelle Maxamed Cabdi Waare iyo ku-xigeenkiisa Cali Cabdullaahi Guudlaawe; iyo madaxii goleha wasiirada ee Galmudug Sheekh Shaakir Cali Xassan. Madaxweyne Cabdiweli Gaas waxa uu si garasho leh u martiqaaday cilmi baarayaashii waxa uuna codsaday in ay golihiisa wasiirada kala hadlaan muhiimadda horumarinta karaanka bulshada.

Waxa aan mahad balaaran u haynaa wasiiradii ka qayb galay kulankii sanadlaha ahaa ee Aragti Wadaagga ee Machadka Heritage (AFI2019) kaas oo lagu qabtay Jamhuuriyadda Jabbuuti bishii Diseember 2019 laguna falanqeyey horumarinta karaanka bulshada. Wasiirada Arrimaha Dibadda, Danjire Axmed Ciise Cawad iyo Wasiirka Maaliyadda, Cabdiraxmaan Ducaale Bayle ayaa khudbado muhiim ah ka jeediyey.

Waxa aan sidaa oo kale u mahadnaqaynaa Wasiirrada Dastuurka iyo Waxbarashada Saalax Axmed Jaamac iyo Cabdullaahi Goodax Barre oo taageeray mashruuca horumarinta karaanka bulshada. Waxaa mahad gaar ah mudan saraakiisha sare ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgalinta iyo Horumarinta Dhaqaalaha kuwaa oo uu hormuud ka yahay Xoghayaha Joogtada ah Cabdulqaadir Aadan.

---

Waxaa mahad gaar ah mudan wasiirrada qorshaynta ee dowlad goboleedyada, gaar ahaan wasiirkii hore ee Qorshaynta Jubbaland Aadan Ibraahim Aw-Hirsi, Wasiirka Qorshaynta ee Koonfur Galbeed Axmed Madoobe Nuunow, Wasiirka Qorshaynta ee Puntland Shire Xaaji Faarax, Wasiir ku-xigeenka Qorshaynta ee Hirshabeelle Cabdixamiid Maxamed Cali iyo Wasiirka Qorshaynta ee Galmudug Cabdikaafi Maxamuud.

Waxaa cilmi-baarista taageeray kana qayb qaatay kulankii saamileyda kala duwan ee aannu Muqdisho ku qabannay, wasiirada dowlad goboleedyada ee waxbarashada, shaqada iyo shaqaalaha, caafimaadka iyo arrimaha dumarka. Waxa aan si gaar ah ugu mahadcelinaynaa wasiirada kala ah wasiirka Caafimaadka ee dowlad goboleedka Jubbaland Mursal Mohamed Khaliif, Wasiirka Waxbarashada ee Galmudug Axmed Deeq Falko; Wasiirkii hore ee Waxbarashada Jubbaland marxuum Maxamed Ibraahim Maxamuud (Alle ha u naxariistee); Wasiirka Waxbarashada ee Koonfur Galbeed Cabdiraxmaan Cismaan; Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Waxbarashada Hirshabeelle Muumin Tuure Cabdullaahi; Wasiirkii hore ee Waxbarashada ee Koonfur Galbeed ahna wasiirka haatan ee Arrimaha Gudaha Maxamed Abuukar; iyo Wasiirkii hore ee Arrimaha Gudaha ee Koonfur Galbeed Maxamed Nuur Madoobe Nuunow.

Mahad gaar ah waxa aan u diraynaa wasiirradii ka kala socday dowlad goboleedyada ee ka qaybqaatay kulankii u horreeyey ee Muqdisho oo ay isugu yimaadeen saamileyda kala duwan ee arrimahan danaysa. Wasiirka Waxbarashada ee Jubbaland marxuum Sheekh Maxamed Ibraahim; Wasiir ku xigeenka Arrimaha Dumarka iyo Xuquuqul Insaanka ee Hirshabeelle Xaliima Cali Siciid; Wasiirka Shaqada iyo Shaqaalaha ee Koonfur Galbeed Faysal Cabdullaahi Ibraahim; Wasiiru-dowlaha Madaxtooyada ee Hirshabeelle Cabdullaahi Maxamed Caddow; Wasiir ku-xigeenka Shaqada iyo Shaqaalaha ee Hirshabeelle Cabdikariim Maxamed Diiriye; Wasiir ku-xigeenka Arrimaha Dumarka ee Koonfur Galbeed Shamsi Maxamed Yarow; iyo Wasiir ku-xigeenka Caafimaadka ee Puntland Cabdinaasir Xaaji Yuusuf.

Waxaa sidaa oo kale aad u mahadsan Wasiirka Arrimaha Dumarka ee Jubbaland Qamar Deeq Xaaji Khaliif oo aan ku waraysanay magaalada Kismaayo iyo Wasiir ku xigeenkii hore ee Arrimaha Dumarka ee Puntland Maryam Axmed Cali.

Wakiilo ka kala socda bulshada rayadka ah, shirkadaha gaarka ah iyo bahda tacliinta ayaa qayb libaax ka qaatay xog uruurintan. Waxa aan si gaar ah u xusaynaa Madaxa Hormuud, Axmed Maxamuud Yuusuf (Axmed Sacuudi) oo aannu la yeelanay wadahadal dheer oo ku saabsan shaqo abuurka iyo caqabadaha horyaala ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Rugta ganacsiga ee dalka iyo rugaha maamul goboleedyada ayaa sidaa oo kale door muhiim ah ka cayaaray hawshan. Waxa aan u mahad-celinaynaa Madaxweyne ku-xigeenka Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed Cabdirashiid Caynaanshe; Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga ee Puntland Maxamed Caydiid; Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga ee Koonfur Galbeed Xaaji Axmed Isaaq; Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga ee Hirshabeelle Xaliima Fiidow; iyo Gudoomiye ku xigeenka Rugta Ganacsiga ee Jubbaland Maxamed Shariif.

Waxaa mahadsan bah-wadaagtayada waxbarashada oo aannu taageero ka helnay. Gaar ahaan kuwii ka kala socday jaamacadaha Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo iyo Garowe. Waxaa ka mid ahaa Madaxweynihii hore ee Jaamacadda Kismaayo, Cabdulqaadir Sheekh Maxamed Xikam; Madaxweynaha Jaamacadda Koonfur Galbeed, Maxamed Xaaji Xuseen; iyo asxaabtayada Jaamacad Goboleedka Puntland (JGP), Jaamacadda Bariga Afrika, Jaamacadda Muqdisho, Jaamacadda Magaalada Muqdisho, iyo Jaamacadda Banaadir. Waxa aan sidaa oo kale jecelnahay in aan xusno hoggaanka ururada dalladda waxbarashada Muqdisho gaar ahaan Cabdulqaadir Xasan Axmed (Kadle) oo na siiyey xogo muhiim ah kana qayb qaatay doodihiis aqoon is-weydaarsiga, uruurinta xogta iyo hubinta sax ahaantooda.

---

Wakiilo iyo afhayeenoo matalaya dadka naafada ah ayaa qayb muhiim ah ka qaatay cilmi-baaristan. Si gaar ah waxa aan ugu mahadcelinaynaa Maxamed Haaruun Maxamuud oo la taliye noo ahaa aadna wax uga qoray arrimaha naafada; Cabdiraxmaan Maxamed Faarax (Luunge) oo ah xubin si muuqata ugu dhaqdhaqaaqa arrimaha naafada; iyo Agaasimaha Waaxda Dadka Baahida Gaarka ah leh ee Wasaaradda Waxbarashada ee Galmudug, Axmed Maxamed oo daraasaddan ku daray aragtiyo iyo tabarucaadyo muhiim ah.

Mashruucan waxaa hindisay oo maalgaliyey Sanduuqa Xasillinta Soomaaliya (SSF). Mashruucani ma hirgaleen haddii aannan heli lahayn tageerada iyo hoggaaminta dhammaan SSF, gaar ahaan maamulayaasha maalgalinta Ibraahim Cabdi, Faadumo Cabdullaahi iyo Vishalini Lawrence. Waxa aan sidaa oo kale u mahadcelinaynaa la talilaya SSF isla markaana ah xeeldheere horumarinta karaanka bulshada, Lee Sorensen, oo mar walba taageero buuxda la garab taagnaa cilmi-baaristan. Lee waxa uu qoray qaybta sababaynta qoraalka Horumarinta Karaanka Bulshada (HKB) taa oo xoogga saartay is barbardhigga caalamiga ah iyo casharada laga baran karo meelaha kale.

Waxa aan mahad balaaran u celinaynaa maalgaliyayaasha muhiimka ah ee Machadka Heritage sida, SIDA (Sweden) and SDC (Switzerland.) La'aantood machadku ma awoodi lahayn inuu ka qayb-qaato ama saamayn muuqata uu ku yeesho cilmi-baarista Soomaaliya.

Mahad gaar ah ayaannu u haynaa dowladda Djibouti, gaar ahaan Mudane Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle oo isagu maalgaliyey shirkii sanadlaha ahaa ee talo wadaagga ee 2019. Shirkaa waxaa dhextaal u ahaa horumarinta karaanka bulshada, waxaana lagu soo bandhigay natiijooyin hordhac u ah ee daraasadda.

Ugu dambayntii waxaan mahad kal iyo laab ah u diraynaa cilmi-baarayaasha, aqoonyahannada iyo shaqaalaha Machadka Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho kuwaas oo dadaal iyo wakhti badan u huray dhammaystirka iyo soo saaridda cilmi-baaristan.

**Cabdulkareem Xasan Jamaac**  
M/K iyo Hormuudka Jaamacadda  
City, Muqdisho ahna Agaasimaha  
Mashruuca Horumarinta Karaanka  
Bulshada

**Bare Sare, Cabdi Maxamed Kuusow**  
Jaamacadda Gobolka Iowa  
Cilmi-baare Sare, Heritage Institute



---

## Dulucda cilmi-baarista

Cilmi-baaristani waxa ay ka dhalatay mashruuc iskaashi oo labo (2) sano qaatay, kaas oo ay ujeeddadiisu ahayd qiimeynta karaanka bulshada Soomaaliyeed iyo abuuridda tab ama istiraatajiyo asal ah oo dhammaystiran, taas oo ku aaddan abuuridda karaan bulsho oo waara.



*Wasaarado muhiim ah oo dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada ka mid ah ayaannu ka helnay xogo wax ku ool ah, gaar ahaan Wasaaradaha Qorshaynta, Shaqada iyo Shaqaalaha, Waxbarashada iyo Caafimaadka*

Iskaashi ay sameeyeen Machadka Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho ayaa soo bandhigay shan (5) daraasadood oo gundhig ah, kuwaa oo soo qaddimay tabta lagu horumarin-karo karaanka bulshada Soomaaliyeed. Wasaarado muhiim ah oo dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ka mid ah ayaannu ka helnay xogo wax ku ool ah, gaar ahaan Wasaaradaha Qorshaynta, Shaqada iyo Shaqaalaha, Waxbarashada iyo Caafimaadka. Hay'ado qaran iyo kuwo raacsan qaar ka mid ah dowladaha gobolada, saamiley waxbarashada ka socda, goobo shaqo, rugo ganacsi oo dalkoo dhan ah ayaa sidaa oo kale gacan na siiyey. Kuwaa waxaan ka helnay xogo muhiim ah iyo waraysiyo, waxayna ka qayb qaateen doodo aannu yoolka ku saaray hadafka cilmi-baaristan.

### Ujeeddooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- b) Samaynta baaris dhammaystiran oo ay gundhig u yihiin waxbarashada, caafimaadka iyo ilaha wax-soosaarka (beeraha, kalluumaysiga iyo xoolaha);
- t) Diyaarinta tabo qaran oo ay Soomaalidu hoggaanka u hayso oo ku saabsan horumarinta karaanka bulshada;
- j) Talo bixin ku aaddan sidii loo midayn lahaa dadaalka saamileyda horumarinta karaanka bulshada si sare loogu qaado fursadda meel-marinta tabtan; iyo
- x) In lagu qanciyo dhammaan saamileyda taageersan tabtan in lagu daro Qorshaha Horumarka Dalka (NDP-9) iyo in loo aqoonsado in ay tahay ahmiyad qaran.



*Ujeeddada tabta  
Horumarinta  
Karaanka  
Bulshada waa in la  
helo qorshe ama  
istaraatiijiyad kor  
loogu qaadayo  
aqoonta iyo  
xirfadaha dadka  
Soomaaliyeed  
si loo abuurto  
loona tabareeyo  
bulsho caafimaad  
qabta taas oo  
leh rabitaankii  
iyo kartidii loo  
baahnaa si looga  
faa'iidaysto ilaha  
wax-soosaarka  
dalka, loona helo  
horumar dhaqaale  
oo waara*

## Mabaa'diida Hagaya Cilmi-baarista

Labaatankii sano ( 2000 – 2020) ee u dambeeyey Soomaaliya waxa ay ku hawlanayd soo kabasho gaabis ah laakiin isa soo taraysay iyo dib-u-dhiska hay'adaha dalka. Waxa ay qaadatay nidaam faderaal ah oo dood badan dhaliyey walina aan saldhigan. In kasta oo ay jirto xasilooni darro dabadheeraatay, haddana rajo badan ayey leedahay dib usoo noolaynta Soomaaliya. Daraasadda Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada waxa ay u dabran tahay deganaansho la'aanta Soomaaliya ka jirta, taabbagelinteeduna waxa ay ku xiran tahay abuuridda jewi u habboon oo munaasab ah.

Ujeeddada tabta Horumarinta Karaanka Bulshada waa in la helo qorshe ama istaraatiijiyad kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha dadka Soomaaliyeed si loo abuurto loona tabareeyo bulsho caafimaad qabta taas oo leh rabitaankii iyo kartidii loo baahnaa si looga faa'iidaysto ilaha wax-soosaarka dalka, loona helo horumar dhaqaale oo waara.

## Aaminaadaha (Qiyamka) Aasaasiga ah ee Horumarinta Karaanka Bulshada

**Sinnaan iyo u dhammi:** Tabta horumarinta karaanka bulshadu waxa ay aaminsan tahay kuna raad joogtaa xaqiijinta in Soomaalidu u siman tahay dhammaan fursadaha waxbarasho iyo shaqo iyada oo aan loo eegin degaan ama juquraafi (maagalo ama miyi), lab ama dheddig ama xaalad dhaqan-dhaqaale.

**Tayo iyo sarrayn:** Ujeeddada tabtu waa in la helo waxbarasho iyo tababar tayo leh oo dhammaystiran kuwaa oo lagu qiimeyn karo halbeegga qaran ee shahaadooyinka si loo ilaaliyo tayada iyo u-qalmidda.

**Khusayn:** Tabtu waxa ay ku boorinaysaa saamileyda ay khushayso in ay mudnaanta siiyaan waxbarashada iyo tababarada kuwaa oo dabooli kara baahiyaha suuqa shaqada, ilaha wax-soosaarka iyo horumarinta guud ee dhaqaalaha dalka.

**“Soomaalinimo:”** tabtan ama istiraatiijiyaddan waa in lagu dul-dhiso Soomaalinimo loo dhan yahay, cid walbana ay iska dhex arki karto, iyo qiyam, akhlaaq suuban iyo sinnaan si loo xaqiijiyo yoolka horumarka dalka.



*Cilmi-baaristani waxa ay isticmaashay laba nooc oo xog uruurineed kuwaa oo kala ah adeegisga xog tiroraac ah (quantitative) iyo xog tiraabraac ah (qualitative) oo ay ka mid tahay waraysiyo aannu ka qabanay dad xogogaal ah, doodo aragti-wadaag oo dad saamiley ah loo qabtay, kulamo dad xeeldheerayaal ah iyo indha-indhayn toos ah*

## Habraaca Cilmi-baarista

Cilmi-baaristani waxa ay isticmaashay laba nooc oo xog uruurineed kuwaa oo kala ah adeegisga xog tiroraac ah (quantitative) iyo xog tiraabraac ah (qualitative) oo ay ka mid tahay waraysiyo aannu ka qabanay dad xogogaal ah, doodo aragti-wadaag oo dad saamiley ah loo qabtay, kulamo dad xeeldheerayaal ah iyo indha-indhayn toos ah. Waxa aan cilmi-baarista u qaybinay saddex waji: 1) uruurinta xog ugub ama gacan-koowaad ah; 2) uruurin xogo oollin ama gacan-labaad ah oo aannu dad kale kasoo xigannay; iyo 3) aqoon is weydaarsiyo aannu saamiley kala duwan isugu keenay.

Intii aannu ku jirray wajiga koowaad ee darsidda xogaha gacanta labaad ama oolinka ah, koox cilmi-baarayaal ah ayaa dib u eegay dukumeenti iyo macluumaad ku saabsan is diiwaangalinta waxbarashada, guurguurka shaqada iyo shaqaalaha, tilmaamayaasha caafimaadka, beeraha, xoolaha, kalluumaysiga, xajmiga dhaqaalaha iyo tababarrada xirfadaha la xiriira ee la tebayo.

Dhanka uruurinta xogaha gacanta koowaad iyo aqoon-isweydaarsiyada heerarka kala duwan ayaa bilowday intii u dhaxaysay Luulyo 2018 iyo Noofember 2019 ayaannu dalka in badan oo ka mid ah cagta marinay si aannu u dhammayno wajiyada labaad iyo saddexaad ee cilmi-baaristan. Waxa aannu qabanay 190 waraysi oo aannu la yeelanay dad xog ogaal ah, 80 doodood oo aannu koox xul ah isugu keenay iyo lix (6) aqoon is waydaarsi oo ay isugu yimaadeen dad xeeldheerayaal ah. Wadar ahaan waxaa cilmi-baaristan ka qaybqaatay dad gaaraya 1,000 qof.

## Qeexidda Karaanka Bulshada

Karaanka bulshadu waa fikrad ballaaran oo ay hoos yimaadaan waxbarashada iyo tababarku. Waxaa sidaa oo kale qayb ka ah caafimaadka, xirfadaha, caadooyinka, garashada ama habdhaqanka bulshada ee la xiriira shaqada.

Sida ku xusan warbixinta karaanka bulshada ee Golaha Dhaqaalaha Adduunka 2016, wax ay ummadi hibo u yeelato waxaa ugu muhiimsan cilmiga iyo xirfadaha dadkeeda kuwaa oo u sahla in ay hiigsato mustaqbal fog, horumar, dhaqaalena ay abuurto.

Karaanka bulshadu waxa uu ka mid yahay shanta (5) raasamaal ee muhiimka ah ee lagu qeexay Jaantuska qaab-nololeedka waara ee aan ka soo xiganney Waaxda Horumarinta Caalmamiga ah ee Boqortooyada Ingiriiska.

---


1. **Karaanka bulshadu** - waa xaddiga iyo tayada aqoonta ee laga heli karo qoys dhexdiisa.

2. **Hantida dabiiciga ah** - waa tayada iyo tirada kheyraadka dabiiciga ah sida kalluumaysiga iyo shidaalka.

3. **Hanti lacageed** – waa kaydka ama dhakhli lacagteed oo socda.

4. **Hantida negi** - waa xajmiga dhaqaalaha, qalabka iyo agabka loo isticmaalo kor u qaadidda wax soorsaarka sida warshadaha.

5. **Hantida bulshada** - hanti bulsheedka ay ka midka yihiin isku xirnaanta, iskaashiga, is-taageeridda iyo is-aaminaadda.





---

## Natiijooyinka muhiimka ah ee shanta daraasadood ee gundhigga ah

### Tacliinta

Tacliintu waxa ay ka mid tahay waxyaalaha ugu muhiimsan ee saameeya wax soo saarka iyo guusha mustaqbalka ee qofka. Sidaa oo kale waa furaha horumarka dhaqaalaha. Akhris iyo qoris la'aan baahsan, ubadka oo aan sidii la rabay tacliinta loogu darin iyo tayo xumada tacliintu, waxa ay saameyn weyn ku leeyihiin horumarka tacliinta.



*Wax qorista iyo akhrisku waxa ay muhiim u yihiin horumarka bulshada iyo dhaqaalahooda, waana albaabka horumarinta karaanka bulshada*

### Waxyaalaha ay cilmi-baaristani ogaatay waxaa ka mid ah:

In wax ku dhow kala bar dadka Soomaaliyeed aanay waxna qorin waxna akhrin. Taasi waxa ay Soomaaliya ka dhigaysaa mid ka mid ah waddamada caalamka ugu tacliinta liita. Wax qorista iyo akhrisku waxa ay muhiim u yihiin horumarka bulshada iyo dhaqaalahooda, waana albaabka horumarinta karaanka bulshada.

Sanadkii 2019, heerka is-qorista guud ee waxbarashada aasaasiga ah waxa ay ahayd ku dhawaad 32.7%. Taa macnaheedu waa qiyaastii 67% ubadka da'da iskuulka gaaray ee waddanku ma aanay helin waxbarasho. Tirada guud ee dugsiga sare isu diiwaangelisay waxa ay ka yarayd 18.4%. Tiro aad u yar marka la barbardhigo kuwa dugsiyada aada (13,071) ayaa dhigta dugsiyada tababarka farsamada gacanta.

Guud ahaan nidaamka waxbarashada dalku waa mid tayadiisu ay aad u hoosayso. Waxaa curyaamiyey tayo xumada haysata macallimiinta, qalab iyo agab xumo iyo la'aanta manhaj ku dhisan baahida dalka ka jirta.

### Caafimaadka

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay dalalka caalamka ugu caafimaad liita. Saamaynta ugu weyn ee arrintani waxa ay ku dhacdaa dumarka iyo carruurta. Natiijooyinka daraasaddani waxa ay muujinayaan in daryeelka iyo adeegga caafimaadku ay yihiin kuwo laga murugoodo. Shaqaalaha caafimaadku ma laha xirfadihii, cilmigii, sharciyaddii caafimaadka ee loo baahnaa, mana haystaan agabkii lagama maarmaanka u ahaa fulinta hawlahooda.



*Si loo daboolo baahida guud ee caafimaadka, dalku waxa uu u baahan yahay in uu shaqaaleeyo 97, 700 oo isagu jira dhakhaatiir, kalkaaliyayaal caafimaad, umulisooyin ilaa iyo sanadka 2030.*

Natiijooyinka kale waxaa ka mid ah yaraanta shaqaalaha caafimaadka gaar ahaan xirfadleyda heerka dhexe iyo dhakhaatiirta. Tirada guud ee xirfadleyda daryeelka caafimaadka ee ka howlgalayey Soomaaliya (oo aanay ku jirin Soomaaliland) waxa ay ahayd qiyaastii 9,566. Tiradaasi waa ay dhaantaa tii ay soo warisay Laanta Caafimaadka Adduunku 2016 oo ahayd 4,122. Si loo daboolo baahida guud ee caafimaadka, dalku waxa uu u baahan yahay in uu shaqaaleeyo 97, 700 oo isagu jira dhakhaatiir, kalkaaliyayaal caafimaad, umulisooyin ilaa iyo sanadka 2030.

Goobaha tababarku waa kuwo hooseeya oo aan lahayn sharci xaddida. Waxa aan jirin kormeer dowladeed oo munaasab ah oo isha ku haya goobaha caafimaadka. Isma laha tirada dadka ee sida xawliga ah u kordhaysa iyo goobaha tababarka (jaamacadaha iyo kuleejooyinka) ee xirfadlayda caafimaadka ee dalka ka jira.

Goobaha adeegga daryeelka caafimaadka dowliga ah iyo kan gaarka ahba, uma qaabaysna sidii ay u buuxin lahaayeen baahida caafimaad ee aasaasiga ah ee bulshada Soomaaliyeed. Sanadkii 2019, waxaa dalka ka jiray 661 rugo caafimaad oo shaqeeya kuwaas oo u qaybsanaa shanta (5) dowlad goboleed iyo Banaadir: 305 Puntland; 29 Koonfur Galbeed; 92 Galmudug; 93 Jubbland; 81 Hirshabeelle; iyo 61 Banaadir. Masaafu dheer ayey bukaanku u socdaan si ay u helaan daryeel caafimaad waxa ayna beegsadaan magaalooyinka waaweyn iyaga oo tagaya isbitaalo, rugo caafimaad iyo farmishiyayaal gaar loo leeyahay.

In kasta oo ay dowladdu dhawaan dadaal ku bixisay sidii loo hirgalin lahaa nidaam aqoonsi oo ku wajahan tayada adeegga caafimaadka, haddana waxa aan wali jirin qawaaniin iyo habraac aqoonsi oo lagu xaqiijinayo tayada tababarka shaqaalaha caafimaadka iyo in shaqaaluhu ay leeyihiin heer aqooneedkii shaqadooda looga baahnaa. Soomaaliya ma laha Gole Qaran ee Xirfadlayaasha Caafimaadka iyo siyaasad caafimaad oo midaysan ama sharci xaddida oo qaabeeya caafimaadka guud. La tacaalidda xaaladaha caafimaadka ee dalka soo foodsaara waxaa sii adkeeya wada shaqayn iyo isku xirnaan la'aanta jirta (dowlad federaal iyo mid gobolba).

---

## Shaqada iyo Shaqaalaha

Warbixintu waxa ay soo bandhigtay jiritaanka xirfado iyo baahi aan isu dheelitirnayn, tababar xumo, shaqo la'aan iyo maqnaanshaha nidaam shaqo qoris oo ku dhisan karti iyo aqoon. Dumarku waxa ay gaar ahaan wajahaan caqabado xagga shaqada ah maxaa yeelay waxaa hoosaysa tacliintooda, mana helaan fursado ay ku horumariyaan kartida iyo karaankooda sababo dhaqanka la xiriira awgeed. Nabadgalyo xumada ayaa sidaa oo kale caqabad ku ah shaqo abuurka iyo maalgashiga.

Dhallinyarada Soomaaliyeed 75% waa shaqo la'aan waxaana qayrkood ka reebay saboolnimo joogta ah. Saboolnimada iyo shaqo la'aantu waxa ay ka mid yihiin waxayaalaha dhallinyarada ku kallifa hijrada qar-is-ka-tuurka ah iyo qaadashada fikaradaha xagjirka ah.



*Caqabadaha horyaala naafada waxaa ka mid ah kuwo la xiriira fahamka bulshadu ay ka qabo dadka naafada ah, kuwa la xiriira jawiga guud ee uu dalku ku jiro iyo kuwo la xiriira nidaamka dowliga ah*

Sababaha kale ee waa weyn ee keena shaqo la'aanta dhallinyarada waxaa ka mid ah dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay oo aan sidii la rabay u maalgalin shaqo abuurka, tayo xumo iyo maqnaansho xirfadihii loo baahnaa iyo fikrado khaldan oo ay dadka qaar ka qabaan shaqooyinka qaarkood.

Helidda fursado waxbarasho iyo kuwo shaqo ee dadka naafada ah ayaan jirin taas oo ay sababtay fahamka khaldan ee bulshadu ay ka qabo naafada iyo jowiga guud ee dalka iyo hannaanka dowliga ah oo aan u diyaarsanayn caawinta naafada. Caqabadahaas oo is biirsaday ayaana ka dhigaya dadka naafada ah kuwa ugu hooseeya bulshada dhaqaale ahaan.

## Beeraha iyo Xoolaha

Soomaaliya waxa ay leedahay dhul beereed hodan ah, webiyo, iyo xoolo saddex jeer ka badan tirada dadka ku nool dalka. Sidaa oo ay tahay haddana 80% bulshada Soomaaliyeed waxa ay ku nooshahay meel ka hoosaysa xarriiqda fakhriga lagu cabbiro. Kala bar dadka Soomaaliyeed waxa ay ku tiirsan yihiin kaalmo dhaqaale si ay u maareeyaan nolol maalmeedkooda. Caqabadaha aafeeyey ilaha xoolaha iyo beeraha waxaa ka mid ah xirfad la'aan, qalab casri oo aan dalka oolin iyo suuq-gayn xumo.

---

## Waxyaalaha kale ee ay daraasaddani soo bandhigtay waxaa ka mid ah:

Waxaa jirta wax-ka-qabad la'aan baahsan oo khasab ka dhigaya in il gaar ah lagu eego xannaanada xoolaha, kaabayaasha dhaqaalaha ee muhiimka u ah ka ganacsiga xoolaha, horumarinta iyo balaarinta suuqyada.



*In ka badan 80% ardada jaamacadda beeraha dhigata, shaqaalaha wasaaradda beeraha iyo macallimiinta jaamacadda beeruhu waa rag. Kaliya waxaa dumar ah 3.8%*

Dumarku door muhiim ayey ka ciyaaraan ilaha beeraha sida beeridda, xaabaqaadka, jaridda dhirta, fallidda, la dagaalanka cayayaanka iyo suuqgeynta dallaga soo go'a. Laakiin in ka badan 80% ardada jaamacadda beeraha dhigata, shaqaalaha wasaaradda beeraha iyo macallimiinta jaamacadda beeruhu waa rag. Kaliya waxaa dumar ah 3.8% isugeynta dhammaan shaqaalaha jaamacadaha, beeraha iyo culuunta xoolaha oo wadar ahaan ah 185 qof. Gabdhaha gala tacliinta beeraha iyo xannaanada xoolaha aad ayey u yar yihiin (14%.) Wadar ahaan wasaaradaha beeraha iyo xannaanada xoolaha ee dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada waxaa ka shaqeyaa shaqaale tiradoodu dhan tahay 176. Waxaa dumar ah 11% oo kali ah.

Wasaaradaha dowlad goboleedyada ayaa soo wariyey in 87% ardada ka qallinjabisa jaamacaduhu aanay lahayn xirfadihii ay ku shaqayn lahaayeen. Daraasaddu waxa ay sidaa oo kale hoosta ka xariiqday karti iyo aqoon xumo badan oo ku habsatay tacliinta sare siiiba beeraha iyo xoolaha.

Maarayn xumo la xiriirta bii'ada ayaa keentay hoos u dhaca iyo xaalufinta deegaanka ee meelo badan. Waxaa kale oo beeraha iyo xoolaha si weyn u saameeya khayraadka dalka oo aan cidina ilaalinin, sharciga oo lagu tunto, doorkii hay'adaha dowliga ah oo maqan, ciidda iyo biyaha oo aan cidna ilaalinin, isticmaal aan habboonayn oo la isticmaalo kiimikada iyo sunta cayayaanka disha, masiibooyinka dabiiciga ah sida is-baddalka ku dhaca bii'ada, abaaraha iyo fatahaadda webiyada.



---

## Kalluumaysiga

Kalluumaysigu sidii la rabay uma horumarsana, qiimeynta ay mudan tahayna ma helin. Waxa ay wali ku dhisan tahay farsamo kooban oo aan agab casri ah adeegsan kaas oo dakhliga guud ee dalka kusoo biiriya 2%. Waxaana ku tiirsan qiyaasta 400,000 oo qof.

Soomaaliya waxa ay leedahay Aag Dhaqaale-Badeed oo Gooni ah (1,200,000 km<sup>2</sup>), deegaan dabiici ah iyo xeebo ku habboon kalluumaysiga kuwaa oo soosaari kara kalluun ka badan 800,000 oo tan sanadkiiba, yeelanna kara mid ka mid ah waxsoo saarka badda ee caalamka ugu hodansan. Sidaa iyada oo ay tahay ayaa haddana qiyaas cilmiyeedkii u dambeeyey ee la sameeyey waxa ay tusaysaa in Soomaaliya ay soo saarto oo kaliya 125,000 oo tan oo kalluun ah sanadkiiba.

Waxaa kale oo ay daraasaddu soo bandhigtay in aanay dalka joogin xirfadlayaal ku filan, aanay jirin maalgalin iyo in khayraadka dabiiciga ah si aan qorshays-nayn, u turid-na aan lahayn loo isticmaalo. Waxaa sidaa oo kale jira kalluumaysi suuq-madow ah oo isugu jira, mid tuugeysi ah, mid qarsoodi ah iyo mid aan sharci ku socon, kuwaas oo dalka dhaafiya dakhli dhan maalaayiin doolar sanadkiiba.

### Caqabadaha kale waxaa ka mid ah:

Kaabayaasha ka-ganacsiga kalluumaysiga oo liita, qaboojiyayaalka iyo addeegga xeebaha oo aan fiicnayn, xog la'aan iyo uruurinta xogta oo aan dalka oo dhan ka jirin, awood kormeer iyo mid xakamayn oo aan jirin, kalluumaysiga oo aan lahayn siyaasado iyo tabo ama istiraatajiyado saldhigtay, iyo hannaanka iyo qaab dhismeedka hay'adaha sharciga ah oo liita.

Inta u dhaxaysa 1990-aadkii iyo 2000 waxaa si aan xaddidnayn, sharcidarro ah oo aan cidna la wargalin uga kalluumaysanayey xeebaha Soomaaliya 800 ilaa 1,000 markab ama doomood. Kalluunka sida xatooyada ah loo qabtay waxaa Soomaaliya kaga lumay in ka badan \$300 oo malyuun sanadkiiba. Sanadahan dambe, kalluun lagu qiyaasay 132,000 oo tan oo u dhigma 56% kalluunka Soomaaliya laga qabtay ayaa laga gurtay aagga dhaqaale-badeedka ee Soomaaliya.

Toddoba kuliyaadood oo tacliinta sare ah oo isugu jira lix jaamacadood iyo hal machad oo shahaadada dibloomada bixiya ayaa dhiga culuumta badda iyo kalluumaysiga. 352 arday ayaa dhigta 10 barnaamij tacliimeed. Ardadaasi waxa ay kala yihiin 333 lab ah iyo 19 dhaddig ah. 119kii arday ee ka qalinjabisay machadyada dalka, sideed (8) kali ah ayaa gabdho ahayd. Shan iyo soddanka (35) macallin ee dhiga kuliyaadahan iyo machadkan, afar iyo soddan (34) ayaa lab ah.

“  
Kalluunka sida  
xatooyada ah loo  
qabtay waxaa  
Soomaaliya kaga  
lumay in ka badan  
\$300 oo malyuun  
sanadkiiba

---

## Qodobada muhiimka ah ee Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada

Cilmi-baaristan waxa aannu ku ogaanney diyaarinta jewi munaasab ah ama sahlaya horumarka bulshada in uu fure u yahay horumarinta iyo joogtaynta karaanka bulshada Soomaaliyeed. Deganaansho siyaasadeed, nabadgelyo, xoogga korontada oo joogta ah (si wax-soosaarka loo taabbo geliyo) iyo awood sharci oo wax xakamayn karta, ayaa iyana sidaa oo kale lagama maarmaan u ah kobcinta iyo joogtaynta karaanka bulshada.

Waxaa jira laba istiraatijiyadood ama tabood oo aan soo badhigi doonno: midda hore waa mid guud oo lagu dabakhi karo dhammaan ilaha wax soo saarka, oo waa tab meelo badan taabanaysa sida waxbarashada, caafimaadka, shaqada iwm. Istiraatijiyadda labaad, waa mid ka hadlaysa meelo ama ilo gaar ah sida horumarinta iyo ka faa'iideysiga beeraha, kalluumaysiga iwm, culaysyada ay tabtani ka muujisay ilahaas wax soosaar ama sida loo xallin karo, waxa aannu kusoo gudbinaynaa jaantusyo shax- ahaan u qoran oo leh ciwaanno gaar ah sida (caafimaad, beero, iwm).

### **Tabaha/istiraatijiyoyinka meelaha badan khuseeya:**

**Samaynta nidaam shahoodooyinka iyo aqoonta lagu kala aqoonsado:** Nidaamka waxbarasho iyo tababar ee hadda dalka ka jira ma laha qaab habaysan oo lagu cabbiro ama lagu qiimeeyo shahaadooyinka oo kala qeexa shahaadada qofku uu haysto, waxa ay u qalanto iyo kartidiisa xirfadeed. Dowladda federaalka waa in ay abuurtaa hay'ad masuul ka ah qiimeynta shahoodooyinka oo u xilsaaran horumarinta kartida iyo xirfadaha.

**Dhisidda xirfado daboola baahida jirta:** waxaa loo baahan yahay in xal loo helo aqoonta iyo xirfadaha kooban ee shaqaalaha Soomaaliyeed ee ku aaddan qaybaha kala duwan ee ilaha dhaqaalaha; si loo kobciyo aqoonta iyo xirfadda bulshada, waa in xarumaha waxbarashada, tababarradda iyo jaamacadaha ay dadka baraan xirfadda iyo aqoonta loo baahan yahay ama shaqo lagu heli karo. Waana in waxa la baranayo ama lagu tababaranayo lagu dhisaa xaqiiqda jirta iyo baahida dhabta ah.

---

Maaddaama laamaha wax soosaarku (beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga) iyo kuwa adeeggu ay lafdhabar u yihiin dhaqaalaha, abuuraana shaqooyin badan, machadyada farsamada gacanta iyo kuwa waxbarashada sare waa in ay xoogga saaraan muhiimad gaar ahna siiyaan xirfadaha wax soosaarka iyo kuwa adeegga, si loo helo xoog shaqaale oo xirfadahii iyo tababaraddii loo baahnaa leh. Waa in la siiyaa mudnaan qaran xirfadaha maqnaanshahooda aad loo tabayo sida kuwa beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga, tamarta laga dhaliyo dabaysha iyo qorraxda, caafimaadka, waxbarashada, dalxiiska, isgaarsiinta, dhismaha, socdaalka, bangiyada iyo maamulka lacagta.

**Horumarinta karaanka bulshada oo xog ku dhisan:** Hawlaha Soomaaliya ka socda waxa ay ku suntan yihiin siyaasado aan aad looga fiirsan kuwaas oo inta badan la sameeyo iyada oo aan xog buuxda laga hayn baahida dhabta ah ee suuqa shaqada ka jirta. Xog la'aantaasi waxa ay sababtay in ardaydu aanay helin gacan qabashadii ay u baahnaayeen ee xagga waxbarashada iyo tababarka, iyo in shaqaale aan tababar fiican lahayn ay la hareen meelo badan oo dhaqaalaha dalka muhiim u ah. Si looga gudbo hannaanka go'aanqaadashada ee ku tijaabida ah, waa in la helaa dadaal qaran oo midaysan kaas oo ay ka qayb-qaataan dowladaha iyo bulshada inteeda kalaba si habaysanna loo uruuriyo xogaha loo baahan yahay, loona dhiso hab-raac xog aruurin iyo baahinba leh oo fududayn kara hab go'aan qaadasho oo xog dhab ah ku dhisan.

**Abuuridda Qorshe Qaran ee Shaqo-u-tababaridda Ardayda:** Si ardada soo qalin jabinaysa ay u hantaan xirfadaha suuqu u baahan yahay ee muhiimka ah, waa in la sameeyo qorshe qaran oo ardada shaqada loogu diyaarinayo, kaas oo ardayga qalinjabiya xilli kooban (ilaa 3 bilood) lagu qorayo goob shaqo oo dowladeed ama gaar loo leeyahay wakhti ku filan si uu u yeesho xirfadaha lagama maarmaanka ah, uuna ardaygu u xagsado shaqadiisa.

**Tayeynta waxbarashada iyo shaqo-helidda ardayda iyada oo luqadda waxbarashada si rasmi ah loo barayo siiba haddii ay Ingiriisi tahay:** In la soo rogo, lana taageero baridda luqadda Ingiriiska oo ku xiran, qaybna ka ah waxbarashada haddiiba luqadda wax lugu baranayo ay iyada tahay. In waajib looga dhigo dhammaan jaamacadaha in ay sameeyaan xarunta barashada luqadda Ingiriiska oo ardaygu uu dhiganayo sannadka koowaad ee jaamacadda ilaa ardaygu uu ka gaaro heer qiimeyn caalami ah leh oo uu keeni karo dhibco sare imtixaannada IELTS, TOEFL ama kuwa la midka ah.

---

**Dib-u-habaynta Hay'adaha Dowladda:** Waxaa lama huraan ah in dib loo habeeyo hay'adaha dowladda federaalka, kuwa dowlad goboleedyada iyo kuwa kale ee dowliga ah si ay u noqdaan kuwo karti iyo hufnaan leh, si habsami leh u jihaysan, lana jaanqaadi kara dastuurka qaranka, daboolina kara baahiyaha qaran ee la xiriira horumarinta karaanka bulshada. Tusaale ahaan dhaqanka haatan jira ee ah in ra'iisul wasaare kastaa uu si qorshe iyo ka fiirsasho la'aan ah uu u abuurto wasaaraddii uu doono, waa in lagu baddelaa qaab sharci ku salaysan iyo baahi bulsho, oo waa in la abuurto oo kaliya hay'adaha adeegga ee loo baahan yahay.

**In laga guuro dhaqamada horumarka caqabadda ku ah:** Qaybo muhiim ah oo bulshada ka mid ah ayaa dhaqan ahaan ka faana shaqooyin badan una arka inay qabashada shaqooyinkaasi sharaf dhac tahay. Fahamka noocaas ah ee ka faanaya shaqooyinka qaarkood waxa uu caqabad ku yahay horumarka dalka. Waxaa lama huraan ah in dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, laamaha waxbarashada iyo ganacsataduba ay si wadajir ah u diyaariyaan istiraatajiyad qaran oo dhiirri-gelinaysa in sharafta iyo karaamadu ay ku jiraan xoogsiga iyo isku-fillaanshaha.

**Dhisidda Qiyamta Aasaasiga ah ee Dalka:** Soddon sano oo dowlad la'aan ah ayaa afka ciidda u daray masuuliyaddii iyo xuquuqdii muwaadiniinta. Daraasaddani waxa ay tusaysaa in ay jirto baahi loo qabo olole wacyigalined oo bulshada lagu dareensiinayo waajibaadka saaran, waddaniyadda iyo kor u qaadid aragtida (qiyamka), akhlaaqiyaadka iyo isku-kalsoonida bulshada.

**Mideynta Saamileyda Horumarinta Karaanka Bulshada:** Waa in la sameeyo madal qaran oo ay ku kulmaan saamileyda (dowlado, bahda waxbarashada, ganacsatada, iwm) si ay u fuliyaan tabta horumarinta karaanka bulshada una xaqiijiyaan sii jiritaankeeda. Madashaasi waa in ay noqotaa mid iskaashi oo ay xubno ka yihiin wakiillo ka kala socda dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, bulshada rayadka ah, ganacsatada iyo laamaha waxbarashada.

---

## Aqoon-yahanka cilmi-baarista ka qayb qaatay

Aqoonyahannada, cilmi-baarayaasha iyo maamulayaasha magacyadooda iyo mansabkoodu hoos ku xusan yihiin ayaa masuul ka ah dhammaystirka cilmi-baaristan. Qaarkood waxa ay qoreen cutubyo gaar ah oo kamid ah daraasadda gundhigga ah, qaarkoodna waxa ay wax ku kordhiyeen cutub ama qaybo cutubyada ka mid ah halka qaar kalana ay cilmi-baarista ugu deeqeen khibraddooda sida tarjumaadda, qaabeynta iyo tifaftirka. Machadka Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho aad ayey ugu mahad celinayaan dhammaantood.

### **Bare Sare, Cabdullaahi A. Bariise, MSW, PhD**

*Madaxweyne, Jaamacadda City ee Magaalada Muqdisho*

Cabdullaahi door hoggaamineed ayuu ka ciyaaray jaangoynta iyo kobcinta mashruuca horumarinta karaanka bulshada guud ahaan. Waxa uu wax badan kusoo kordhiyey cutubka waxabarashada iyo soo-bandhigiddii uu ka geystey aqoon is- weydaarsigii saamileyda loo qabtay.

### **Cabdirashiid Khaliif Xaashi**

*Agaasimaha Machadka Heritage ee Daraasaadka (HIPS)*

Maaddaama uu yahay Agaasimaha Machadka Heritage oo ah hay'adda howshan hoggaanka u ahayd, Cabdirashiid qeyb libaax ayuu ka qaatay jaangoynta guud ee daraasadda iyo isku xirka barnaamijkan. Waxa uu sidaa oo kale gacan ka gaystay iskaashiga heerarka kala duwan ee dowliga ah, tayo-dhawrka iyo xiriirka maalgaliyayaasha. Cabdirashiid waxa uu si mug leh uga qaybqaatay curinta tabta horumarinta karaanka bulshada.

### **Cabdikariim X. Jaamac**

*Madaxweyne ku-xigeenka iyo Hormuudka Jaamacadda City ee Magaalada Muqdisho*

Cabdikariim waxa uu hoggaamiyey kooxda mashruuca horumarinta karaanka bulshada, waxa uuna door muhiim ah ka qaatay isku xirka guud, gaar ahaan xiriirka dowladaha sida dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Waxa uu sidaa oo kale door muhiim ah ka ciyaaray tayo-dhawrka, dhammaystirka iyo xiriirka deeq bixiyayaasha. Cabdikariim door lixaad leh ayuu ku leeyahay ebyidda tabta horumarinta karaanka bulshada.

### **Bare Sare, Cabdi Maxamed Kuusow, MUP, PhD**

*Cilmiga Bulshada, Jaamacadda Gobolka Iowa / Cilmi-baare Heritage*

Dr. Kuusow, oo caan ku ah cilmiga bulshada, wuxuu hoggaaminayey habraaca cilmi-baarista wuxuuna si guud hooggaanka ugu hayey qaabeynta mashruuca cilmi-baarista ee HKB. Waxa uu wax ka qoray cutubka waxabarashada, waxa uuna si lixaad leh uga qaybqaatay curinta tabta horumarinta karaanka bulshada.

---

**Dr. Cali Cabdullaahi Warsame, PhD , Lataliye madax-bannaan**

*Dr. Cali waa wasiirkii hore ee Caafimaadka iyo Bii'ada ee Puntland*

Waxa uu qoray cutubka caafimaadka ka hadlaya, waxa uuna gacan ka gaystay qaabaynta tabta waxbarashada.

**Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Kulmiye, Lataliye madax-bannaan**

*Dr. Cabdiraxmaan waa wasiiru-dowlahii hore ee Kalluumaysiga ee Puntland.*

Waxa uu qoray cutubka kalluumaysiga.

**Dr. Xuseen Xaaji Macow, La taliye madax-bannaan**

*Dr. Xuseen waa saynis-yahan cilmiga beeraha ku xeeldheer, waana Agaasimaha SATG.*

Waxa uu qoray cutubka beeraha iyo xoolaha.

**Dr. Maxamed Faarax Shirdoon, (PhD, Jaamacadda Cornell), Lataliye madaxbannaan**

*Dr. Maxamed waxa uu ka qayb qaatay qorridda cutubka beeraha iyo xoolaha.*

**Mursal Maxamuud Saneey**

*Ku-xigeenka Maareeyaha Machadka Heritage ee Daraasaadka (HIPS)*

Mursal door muhiim ah ayuu ku lahaa isku duwidda cilmi-baarista, abaabulka dhaqaalaha, agaasinka iyo maamulidda shirkii sanadlaha ahaa ee Aragti Wadaagga (AFI2019) iyo xiriirka dhammaan heerarka kala duwan ee dowladaha.

**Aweys Cabdullaahi Cali**

*Cilmi-baare Sare ahna Isku-duwaha Mashruuca*

Aweys waa musharax shahaadada PhD da, isaga oo ku takhasusay horumarinta karaanka bulshada. Waxa uu masuul ka ahaa isku-duwidda guud ee mashruuca. Waxa uu hormuud ka ahaa qorridda cutubka shaqada iyo shaqaalaha, waxa uuna si mug leh uga qayb qaatay qorridda cutubka waxbarashada iyo curinta tabta horumarinta karaanka bulshada.

**Lee C. Sorensen**

*Lataliye madax-bannaan xagga Horumarka , ahaana Agaasimihii Hore ee Shuraako*

Lee waxa uu u diyaariyey Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya, Wajigiisa 2aad, daraasooyin horumarinta karaanka bulshada iyo horumarinta ganacsiga gaarka ah kuwaas oo ay ka dhasheen fikradda ah in cilmi-baaris laga sameeyo horumarinta karaanka bulshada Soomaaliyeed. Lee waxaa lagala tashaday dhamman qaybaha mashruuca HKB. Waxa uu fikrad-celin balaaran ka bixiyey dhammaan cutubyada. Lee waxa uu qoray qaybta sababaynta ee HKB, taa oo xoogga saartay is barbardhigga caalamiga ah iyo duruusta laga baran karo meelaha kale. Sidaa oo kale si lixaad leh ayuu Lee uga qaybqaatay curinta istiraatiijiyadda ama tabta horumarinta karaanka bulshada.



---

**Cabdirisaaq Aadan Muxumed**

*Cilmi-baare, Machadka Heritage*

Cabdirisaaq waxa uu wax ka qoray cutubka waxbarashada, midka shaqada iyo shaqaalahana gacan ayuu ka gaystay.

**Ayaan Maxamed Cabdullaahi**

*Maareeye Machadka Heritage*

Ayaan waxa ay iskuduwe ka ahayd maamulka barnaamijkan, xiriirka maalgaliyayaasha, waxayna gacan ka gaysatay cutubka shaqada iyo shaqaalaha.

**Cabdullaahi Maxamed Saciid**

*Cilmi-baare iyo Xog-falanqeeye, Machadka Heritage*

Cabdullaahi door weyn ayuu ka qaatay qaabaynta iyo habraaca mashruuca, waxa uu hoggaaminayey uruurinta iyo maamulka xogta, waxa uuna ka qayb qaatay lafaguridda xogta.

**Peter W. Mackenzie**

*Cilmi-baare-sharafeed Machadka Heritage*

Qaybta Tifaftirka

Peter waxa uu kaalin weyn ka qaatay tifaftirka dhammaan daraasooyinka ee luuqadda ingiriiska.

**Cawaale Xuseen Cabdi, Lataliye/cilmi-baare Madax-bannaan**

Cawaale ayaa daraasaddan Af-Soomaali u tarjumey.

**Dr. Cawil Cali Xaashi, Agaasimaha Guud ee Ednastics**

Tafaftirkii ugu danbeeyey ee labada luqadood ayaa Dr. Cawil uu dulmaray dhammaan qoraallada cilmi baarsitan asaga oo xagga luqadda, turjumaadda iyo isku-xirnaanta qoraalka shaqo wax ku ool ah ka qabtay.

**Bare Sare, Xaawo Wehelliye, MBA, JD**

*Agaasimaha Xarunta Sharci-caawinta ee Jaamacadda City ee Muqdisho*

Xaawo waxa ay dib u eegtay dhammaan cutubyada, waxa ayna gacan ka gaysatay hagaajinta nuqulkii ugu dambeeyey.

**Dr. Afyare Cabdi Cilmi**

Dr. Afyare waxa uu tafaftir ku sameeyey tarjumaadda Af-Soomaaliga.

**Lisa Clifford**

*Suxufi iyo filin-qaade*

Lisa waa khabiir luuqadda Ingiriiska ah, suxufi iyo tifaftire madaxbannaan. Waxa ay tifaftirtay daraasaadka gundhiga ah iyo dhammaan qoraalada kale ee ay qoreen cilmi-baarayaasha iyo shaqaalaha Machadka Heritage.

---

**Deeqa Cabdullaahi Macallin**

*Maamulaha Maaliyadda, Machadka Heritage*

Deeqa waxa ay u xilsaarnayd hubinta habsami u socodka barnaamijkan gaar ahaan xagga dhaqaalaha iyo saami-qaybinta.

**Muxyadiin Guutaale**

*Sarkaal Saadka, Machadka Heritage*

Muxyadiin waxa uu xagga maamulka, dhaqaalaha iyo saadkaba ka taageeray mashruuca HKB.

**Anisa Xaashi**

*Farshaxanka iyo Naqshadaynta, Machadka Heritage*

Anisa waxa ay hormuud u ahayd naqshadaynta guud ee daraasadda gundhiga ah iyo daraasadda lugu uruuriyey tabaha, waxa ayna ka qayb qaadatay samaynta barta Internetka ee gaarka u ah humurinta karaanka bulshada.

**Xuseen Maxamed**

*Khabiir Warbaahinta/Soosaare*

Xuseen waxa uu door muuqda ka qaatay baahinta daraasadaha iyo soosaaridda maqal iyo muuqaal hufan.

**Axmed Ibraahim Barre**

*Cilmi-baare, Machadka Heritage*

Axmed waxa uu door muhiim ah ku lahaa uruurinta xogaha iyo kumbuyuutar ku qorridda ama garaaca makiinadda iyo kaalmaynta baarista lagu sameeyey cutubyada caafimaadka iyo kalluumaysiga.

**Cabdirisaaq Macallin Ibraahim**

*Cilmi-baare Tababarte ah, Machadka Heritage*

Cabdirisaaq waxa uu door muhiim ah ka qaatay uruurinta iyo qorridda xogta.

**Ayaan Yaasin**

*Tababarte, Machadka Heritage,*

Ayaan waxa ay door muuqda ka qaadatay uruurinta iyo qorridda xogta.

**Maxamed Iimaam Buulle**

*Tababarte, Machadka Heritage*

Maxamed waxa uu door muhiim ah ka qaatay uruurinta iyo qorridda xogta.

---

## Hordhac

Kartida bulshadu waa arrin muhiim u ah kobaca, horumarka iyo loolan-galka bulshada. Kor u qaadidda aqoonta iyo xirfadda qofku waxa ay fure u tahay nolol wacan iyo fursad uu qofku bulshada wax ku biirin karo, noloshiisana qiimo iyo aqoonsi ugu yeeli karo. Heer qaran ahaan, sinnaanta loo siman yahay fursadaha waxbarashada iyo shaqada waxa ay horseedi kartaa horumar dhaqaale, waxa ayna dhalin kartaa natiijooyin bulsho iyo siyaasadeed oo wanaagsan.



*dayaca karaanka  
bulshadu wuxuu  
si daran u  
dhaawici karaa  
loolan-galka  
waddanku  
ku leeyahay  
adduunkan is  
badbadalka  
badan iyo weliba  
dhaqaalaha oo  
u baahan karti  
marba marka  
ka dambaysa  
soo kordhaysa  
kobaciisa*

2018-kii, Madaxweynihii Bangiga Adduunka ee xilligaa Jim Yong Kim waxa uu qoray “Dowladaha raadinaya kobaca dhaqaale waxa ay jecel yihiin inay maalgaliyaan hantida la taaban karo ama la arki karo sida jidad cusub, buundooyin qurux badan, gegi diyaaradeed oo dhalaalaya iyo dhismayaal kale. Laakiin in badan, ma xiiseeyaan in ay maal galiyaan karaanka bulshada, kaas oo guud ahaan kulminaya caafimaadka, xirfadaha, cilmiga, aqoonta iyo habdhaqanka bulshada. Taasi waa ahmiyad sare oo laga ilduufay maxaa yeelay dayaca karaanka bulshadu wuxuu si daran u dhaawici karaa loolan-galka waddanku ku leeyahay adduunkan is badbadalka badan iyo weliba dhaqaalaha oo u baahan karti marba marka ka dambaysa soo kordhaysa si loo joogteeyo kobaciisa.”<sup>1</sup>

Hordhaca Tiirka 4-aad (Horumarka Bulshada) ee qorshaha Horumarinta Qaranka Soomaaliyeed ee 9-aad waxa uu sharraxayaa wadatashiyadii saamileyda iyo qiimeynta saboolnimada. Waxa ay hoosta ka xarriiqeen heerka waxbarasho iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah (biyaha, caafimaadka iyo nadaafadda guud) oo hooseeya in ay yihiin sababaha ugu horreeya ee keena saboolnimada. Mid ka mid ah siddeeda arrimood ee aasaasiga ah ee tiirka 4-aad (ee horumarka bulshada) ayaa ah horumarinta karaan bulsheedka, si dhaqaalaha loo kordhiyo. Shacab caafimaad qaba oo aqoon leh ayaa noqon kara mid si mug leh uga qayb qaata suuqa shaqada iyaga oo isla markaana kaalmaynaya kobcinta dhaqaalaha, adkaysiga qoyska iyo yaraynta barakaca.<sup>2</sup>

Maalgalinta karaanka bulshadu waa lama huraan si dalku uu dhabbada horumarka cagta u saaro iyo in dalku aanu ugu dhicin dabin<sup>3</sup> dhaqaale kaas oo sababi kara u jilicsanaan dib-u-dhac.

---

<sup>1</sup> Jim Yong Kim, “The Human Capital Gap: Getting Governments to Invest in People,” Foreign Affairs (Council on Foreign Relations), 14 June 2018.

<sup>2</sup> “Somalia National Development Plan 2020 – 2024,” Volume 1, Federal Government of Somalia Ministry of Planning, Investment and Economic Development, 15 October 2019, p 249.

<sup>3</sup> Dr. Paul Collier, Professor of Economics and Public Policy at the University of Oxford, defines fragility trap as “a syndrome of characteristics: fractured identities, a lack of state legitimacy and capacity, insecurity, a dearth

---

Boqolkiiba afartan (40%) bulshada Soomaaliyeed da'deedu waxa uu u dhexeeyaa 6 ilaa 18 sano. Qaybtan muhiim ka ah ee bulshada ka midka ahi waa inay hesho fursado waxbarasho, caafimaad iyo xirfado si ay u noqdaan kuwo waxtar u leh dhaqaalaha dalka. Caalamka waxaa la qiyaasay 10 ilaa 30 boqolkiiba farqiga u dhexeeya dhakhliga soo gala madaxiiba waxaa sabab u ah kala duwanaanshaha heerka karaanka bulshada.<sup>4</sup>

Soomaaliya waxa uu Alle ku manaystay kheyraad dabiici ah oo balaaran. Waxaa ka mid ah xeebta Afrika ugu dheer, taas oo aan wali sidii la rabay loo isticmaalin, kayd shidaal, biro qaali ah iyo macdan. Intaa waxaa dheer Soomaalidu waxa ay caan ku tahay dhaqashada iyo ka ganacsiga xoolaha iyo dalagga beeraha. Hayeeshee, hantida ugu balaaran uguna yididiilada badan ee ay Soomaaliya leedahay waa dadkeeda.

## Waa maxay karaanka bulshadu?

Karaanka bulshadu waa fikrad ballaaran taa oo ay soo hoos-galayaan waxbarashada iyo tababarka iyo sifooyin kale sida badqabka, taagta, caado-shaqeedka iyo habdhaqanka bulshada.

Asalka fikradda karaanka bulshada waxaa loo tiiriyaa in uu markii ugu horreysey isticmaalay dhaqaale-yahan dhalashadiisu ay Iskootish ahayd oo la oran jiray Adam Smith kaa oo noolaa qarnigii 18aad. Waxa uu qoray “Xilliga waxbarashada iyo tababarka, xirfadaha uu qofku yeesho waxaa kaga baxa kharash dhab ah. Kharashkaasi waa tacab qofka u hara. Aqoontaasina waa dhaxal-gal qofka iyo dadkiisuba ay ku xisaabtami karaan.”<sup>5</sup> Erayga karaanka bulsho (human capital) waxaa gadaal ka faafiyey Gary Becker oo ahaa nin Billad Sharafta Noobelka ee dhaqaalaha ku guulaystay oo wax ka dhigi jiray Jaamacadda Chicago iyo Jacob Mincer oo qudhiisu ahaa bare sare oo cilmiga dhaqaalaha iyo xiriirka bulshada ka dhigi jiray Jaamacadda Columbia. Labada eray ee tacabka bulshada iyo karaanka bulshada si isku badbaddal ah ayaa loo isticmaalaa maadaama ay leeyihiin micne isku mid ah. Karaanka bulshada waxaa loo qaadan karaa hanti shaqsi, markii si guud loo eegana in ay tahay hibo qaran.



*Karaanka bulshada waxaa loo qaadan karaa hanti shaqsi, markii si guud loo eegana in ay tahay hibo qaran*

---

of formal enterprises, and proneness to shocks.” See Paul Collier, “A New Approach to State Fragility,” Brookings Institution website, 11 January 2019, available online at: <https://www.brookings.edu/research/a-new-approach-to-state-fragility/>, last accessed on 1 June 2020.

---

Markii qofka shakhsiga ah laga eego, karaanka bulshadu waa kasbashada iyo horumarinta xirfadaha, kartida, aqoonta, awoodda, khibradda, garashada, tababarka, go'aan qaadashada iyo xikmadda.<sup>6</sup> Si guud markii loo eego, karaanka bulshadu waa karti-wadareed bulshadu ay ku dhaliso hanti, taa oo loo isticmaali karo sidii loo gaari lahaa hadaf urur, bulsho, dhaqaale ama dal. Karaanka bulsho, waxaa la oran karaa waa meesha uu qofku kaga jiro dhaqaalaha/wax-soo-saarka umadda guud ahaan, iyo waxa ka dhalanaya ama saamaynta ay reebayso marka qofkaasi uu bulsho ku dhex-nool yahay ama uu dantiisa ka hawl-galo.

Karaanka bulshadu waxa uu ka mid yahay shanta rukun ee ku qeexan Jaantuska Noloshu ee la joogtayn karo ee wasaaradda DFID ee Ingiriisku ay tilmaantay: 1) Karaanka bulshada (taagta iyo tayada aqoon iyo shaqo ee raaska ama qoyska laga helo) 2) Kheyraadka dabiiciga ah (tayada iyo tirada kheyraada dabiiciga ah laga bilaabo kalluumaysiga ilaa tayada hawada), 3) Hanti lacageed (kaydka iyo lacagta sida caadiga ah usoo gasha) 4) Hantida ma-guurtada ah (dhismaha, qalabka iyo agabka loo isticmaalo kordhinta wax soo saarka) 5) Hantida bulshada (kheyraadka bulshada sida isku xirnaanta is-kaashiga leh, is-aaminka iyo is-taageeridda.)<sup>7</sup>

Horumarinta karaanka bulshadu waxa ay fure u tahay gaaridda horumarka bulshada Soomaaliyeed, laakiin ma aha shayga kaliya ee u baahan in la tixgaliyo. Qorshaha Horumarinta Soomaaliya ee 9-aad ayaa qeexaya tabta lagu dhimayo saboolnimada, adkaysiga iyo dulqaadka shaqsiga iyo qoyskaba iyada oo la hirgalinayo addeegga aasaasiga ah kuwaa oo diiradda saaraya dhinacyo badan oo ay ka mid yihiin: daryeelka caafimaadka, biyo nadiif ah, waxbarashada, ilaalinta daryeelka bulshada sida qorshaynta magaalooyinka, gargaarka bulshada iyo damaanad-qaadka cuntada; iyo weliba xoojinta xukunka sida maamulidda masiibooyinka, dhaadhicinta maamulka iyo baahinta addeegga.<sup>8</sup>

Waddamada sida habsamida ah u horumaraya waxa ay ku guulaysteen inay isku daraan isticmaalka kartida bulshada iyo hannaanka dhaqaale kobcinta oo la sii casriyeeyey, iyaga oo kor u qaadidda qanacsanaanta dadka u adeegsanaya, horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada, kobcinta iyo daryeelka bulshada iyo dhisidda kartida bulshada si qofkastaa uu u gaaro hiigsigiisa.

---

<sup>4</sup> "Building Education to Boost Human Capital," World Bank Somalia Economic Update, Fourth Edition, August 2019.

<sup>5</sup> Smith, Adam, *An Inquiry into the Nature and Causes of the Wealth of Nations*, Book 2. Modern Library Series Reprint. New York: Random House 1937, (pp. 265-266).

<sup>6</sup> Human Capital Strategy for Africa, 2014-2018. Tunis: African Development Bank 2014.

<sup>7</sup> "Sustainable Livelihoods Guidance Sheets," UK Department for International Development, available online at: <https://www.enonline.net/attachments/872/section2.pdf>, last accessed on 8 May 2020

“

*Haddii aan la helin qorshe mintidnimo wata oo go'aan adag leh, ubadka Soomaaliyeed ee maanta iyo kuwa iman doona, dhalinyarada iyo dadka waaweyn waxa ay halis ugu jiraan in uu ku dul dhoco xukun ah: saboolnimo ba'an, shaqo la'aan, hoos-udhac bulsho iyo mid dhaqaale iyo rajo xumo*

Haddii aan la helin qorshe mintidnimo wata oo go'aan adag leh, ubadka Soomaaliyeed ee maanta iyo kuwa iman doona, dhalinyarada iyo dadka waaweyn waxa ay halis ugu jiraan in uu ku dul dhoco xukun ah: saboolnimo ba'an, shaqo la'aan, hoos-udhac bulsho iyo mid dhaqaale iyo rajo xumo. Tabta horumarinta karaanka bulshadu lamahuraan ayay u tahay mustaqbalka Soomaalida oo dhan. Qorshaha Horumarinta Soomaaliya ee 9-aad ayaa u arka horumarinta karaanka bulshada ahmiyad qaran taa oo taageeraysa dib udhiska siyaasadeed iyo midka dhaqaaleba. Sidaa oo kale waxaa muhiim ah in la dhiso hay'ado dimoqraadi ah kuwaas oo kor u qaada tayada nololsha ummadda Soomaaliyeed.

## **Barnaamijka Horumarinta Karaanka Bulshada**

Si ay u diyaariso tabta kartida bulshada Soomaaliyeed, Wasaaradda Qarshayntu waxa ay hawl-gelisay Machadka Heritage iyo Jaamacadda City, si ay u hirgeliyaan cilmibaaristaan qaadatay laba sano ku-dhawaadka. Waxaa iyaguna si dhow mashruuca u taageeray Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha iyo Wasaaradda Waxbarashada. Waxaa barnaamijka daraasadani ay ka warramayso maal geliyey Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya ee loo yaqaan SSF. Ujeeddada mashruucani waxa ay ahayd qiimeynta xaalka ay ku sugan tahay horumarinta karaanka bulshadu iyo abuuridda tab ama istiraatajiyad qaran oo loo mari karo horumarinta karaanka bulshada taa oo la joogtayn karo, cid walba ay iska dhex arki karto ahna mid ay Soomaalidu leedahay.

Mashruuca horraantii waxaan u bixinnay Habraaca Horumarinta Karaanka Bulshada (HHKB) waxaana hoggaanka u hayey aqoonyahanno iyo cilmi-baarayaal Soomaali ah kuwaas oo ka kala socday Machadka Heritage ee Daraasaadka iyo Jaamacadda City ee Muqdisho. Waxa ay si dhaw u kaashanayeen saamileyda ay arrintani khusayso kuwaas oo kala socdey dowladaha (federaalka iyo maamul goboleedka), bulshada rayidka ah iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay.



---

**Mabaa'diida hagaya mashruucan waxaa ka mid ah:**

**Is-waafajin, iskaashi taabbagal ah iyo hawlgalinta bulshada:** Habraaca Horumarinta Karaanka Bulshada waxa uu xoojinayaa is waafajinta dadaalka hay'adaha dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, bulshada rayidka ah, aqoonyahannada iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay. Mashruucani waxa uu dhaqangelinayaa hawlgal salka laga soo unkayo kaa oo adeejinaya dhammaan saamileyda ama danleyda howshani ay khusayso si loo abuur xal ayagu ay leeyihiin iyo lahaansho.

**Isku-beegid iyo is badbadel:** Iyada oo Qorshaha Horumarka Qaranku uu leeyahay habraac lagula dhaqmo deeq bixiyayaasha, haddana Habraaca Horumarinta Karaanka Bulshada waxa ay si joogta ah ula shaqaysaa wasaaradaha ay howshani khushayso iyadoo gacan-saar lala yeelanayo deeq bixiyayaasha. Tallaabooyinka la qaadayo waxa ay ku jaan go'an yihiin qaab dhismeedka siyaasadda dalka, istaraatiijiyadda waddanka iyo is-dhexgalka wada shaqayneed ee gobolka. Qaabka howlgalku waa in uu ku dhidban yahay lahaansho qaran, iyo, halkii munaasab ah, lahaansho goboleed iyo isku xirnaan xoog leh oo u dhexaysa hay'adaha muhiimka ah ee dalka, gobolka iyo caalamka ee ka shaqeeya hormarinta karaanka bulshada.

**Aqoon iyo natiijooyin:** hawlgalka Habraaca Horumarinta Karaanka Bulshada waxa uu isku dayayaa inuu xaqiiqda ka tarjumo, waxa uuna yoolka saaraa cilmi iyo xog uruurin iyada oo uu hadafku yahay kobcinta karaanka bulshada taa oo loo dhan yahay.

**Xulasho:** Hawlaha Habraaca Horumarinta Karaanka Bulshada waxa ay la jaanqaadayaan awoodda, kartida iyo xeel dheeridda hay'adahan iskaashaday. Ahmiyaddu waa qaadidda talaabooyin muhiim ah kuwaa oo lagu taageerayo baahida muhiimka ah ee saamileyda si kor loogu qaado karaanka bulshada iyada oo waliba la yaraynayo sinnaan la'aanta dhaqan-dhaqaale iyo midda labka iyo dheddigga.

**Joogtayn ama sii-jiritaan:** Markii mashruucani uu dhammaado, hawlaha, cilmiga, xogaha iyo hawlo urureedka la xiriira Habraaca Horumarinta Karaanka Bulshada waxaa lagu wareejin doonaa hay'adaha dowladda ee ay howshani khusayso si ay halkaa uga sii ambaqaadaan.

---

### **Saddexda waji ee mashruuca:**

**Wajiga 1aad:** bilowga ka hor, mashruucu waxa uu sameeyey unug shaqo-tashi kuwaas oo ka koobnaa saamileyda horumarinta karaanka bulshada sida wakiillo dowladda ka socda, kuwo shirkadaha gaarka loo leeyahay ka socda, bulshada rayidka ah iyo aqoonyahanno.

**Wajiga 2aad:** Isaga oo kaashanaya oo adeegsanaya saamileyda uu la tashiga la sameeyey ayuu mashruucu waxa uu bilaabay wadatashiyo kuwaa oo uu la yeeshay dowlad goboleedyada iyo dowladda federaalka si loo caddeeyo hadafka iyo hirgalinta Horumarka Karaanka Bulshada. Qayb muhiim ah oo ka mid ah wada-tashiyadani waxa ay ahayd qiimeyn gundhig iyo jaangoyn ah oo dhammaystiran taas oo ku aaddan baahiyaha loo qabo tab qaran oo la xiriirta karaanka bulshada iyo dadaalka horumarineed.

**Wajiga 3aad:** Si la isugu keeno saamileyda loona helo isku duubni hirgalisa hawsha horumarinta karaanka bulshada, mashruucu waxa uu aasaasay gole kaas oo ay saamiley kala duwan ku kulmeen kuna soo bandhigeen natiijooyin iyo hage ama tilmaame lagu hiigsanayo horumarinta karaanka bulshada. Kadib waxa ay u kulmi jireen si joogta ah si ay isu kaashadaan oo ay u taageeraan kooxda shaqo ee Qorshaha Horumarinta Qaran ee 9-aad.

### **Habraaca Cilmi-baarista**

#### **Ilaha xogta, qaabka la raacay iyo hagayaasha**

Mashruuca waxaa lagu ibo-furay kulan shaqo oo ka dhacay Muqdisho 22 Sebteembar 2018. Kulankaa waxaa isugu yimid saamiley ay ka mid ahaayeen madax ka kala socda dowlad goboleedyada iyo wasaarado ka mid ah dowladda federaalka. Kuwaas waxaa ka mid ahaa wasiirrada waxbarashada, shaqada iyo shaqaalaha, caafimaadka iyo qorshaynta. Waxaa sidaa oo kale kulanka joogay wakiillo ka socda bulshada rayidka ah, kuliyaadaha waxbarashada iyo rugaha ganacsiga. Kulan-howleedkani waxa uu qaatay 3 maalmood waxa ayna ujeeddadiisa ahayd in saamileyda lagala hadlo horumarinta karaanka bulshada, aragtidoodana la dhagaysto. Cilmi-baarayaasha Machadka Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho waxa ay dadkii kulankaa joogay ka xusheen intii ay ku tuhmayeen inay hayaan macluumaad dheeri ah si ay waraysi qotodheer ula yeeshaan.

---

Nidaamkan oo kale ah ayaa laga sameeyey dhammaan caasimadaha dowlad goboleedyada. Guud ahaan, in ka badan 400 oo qof ayaa ka qayb qaatay kulamadii gogol-xaarka ahaa ee lagu qabtay xarumaha dowlad goboleedyada iyo Muqdisho.



*mashruucu waxa uu xogo kasoo uruuriyey 190 qof oo muhiim ah, waxa uuna qabtay 80 waraysi oo dood-wadaag dad badan ah, wadar ahaan 583 qof ayey ahaayeen kuwaa oo laga soo xulay shanta dowlad goboleed*

Intii u dhaxaysay bishii Luulyo 2018 iyo Nofeembar 2019, mashruucu waxa uu xogo kasoo uruuriyey 190 qof oo muhiim ah, waxa uuna qabtay 80 waraysi oo dood-wadaag dad badan ah, wadar ahaan 583 qof ayey ahaayeen kuwaa oo laga soo xulay shanta dowlad goboleed (Hirshabeelle, Galmudug, Jubbaland, Puntland iyo Koonfur Galbeed,) Ismaamulka Banaadir iyo hay'adaha dowladda dhexe. Isku dar ahaanna, dad kor u dhaafay kun ruux ayaa mashruucaan kobcinta karaanka bulshada Soomaaliyeed lagala tashaday.

### **Uruurinta xogaha tiroraaca ah (quantitative) iyo falanqayntooda**

Xogaha oollinka ama gacanta labaad ah waxaa loo soo uruuriyay si nadaamsan, waxaana lagu kaydiyey xog-nidaamiyaha tirooyinka ee Excel. Waxaa la isticmaalay isla Excel kaa si loo lafa-guro loona falanqeeyo xogta si guud, gaar ahaaneed iyo isu geynba.

Cilmi-baarayaashu waxa ay xog ka soo ururiyeen xarumo ku yaal Muqdisho iyo dowlad goboleedyada si ay u helaan xogo tiroraac ah oo is-wadata. Xog-uruuriyaal khibrad leh ayaa xogta galiyey waraaqda Excelka kaddib waxaa kala-dhigdhiigay falanqeeye khibrad leh, kaa oo baaray, kala shaandheeyey kadibna soo saaray duluc qeexan oo la hubiyey luguna kasloonaan karo.

### **Agaasinka xogta tiraabraaca ah (qualitative) iyo lafo-guridda waraysiyada**

Tiro cilmi-baarayaal iyo tababartayaal isugu jira oo uu kor-joogteynayey Bare-sare Cabdi Maxamed Kuusow ayaa xogta kumbuyuutarka ku qoray iyaga oo mid walba summad gaar ah u yeelaya. Waxa ay si wadajir ah u qoreen una falanqeeyeen ku dhawaad 2,000 oo bog oo qoraal ah. Qoriddii hore, xogta waxaa loo kala soocay unugyo kala jaadjaad ah waxaana la qiimeeyey sida ay isu leeyihiin iyo sida ay u kala duwan yihiin. Dabadeed waa la furfuray si ay u dhibyaraato in la garto qaybaha kala duwan, dhinac walbana looga istaago. Markii qaybihii iyo dhinacyadii kala duwanaa ee xogta la gartay kaddib ayaa la qeexay xiriirka ka dhexeeya qaybaha iyo dhinacyada xogtu ay taabanayso. Hawshaasi waxa ay dhalisay in laysla meel dhigo qaybaha udub dhexaadka u ah cilmi-baaristan si loo soo saaro qiimeyn guud oo maangal ah, sugan luguna kalsoonaan karo.

---

## **Gaabiska daraasadda**

Intii ay socotay xog uruurintu, Soomaaliya waxaa ka jiray nabadgelyo xumo ba'an, qalalaase siyaasadeed iyo kuwo dhaqaale kuwaa oo xaddiday cilmi-baarayaasha. Xiriirka u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ayaa sidaa oo kale si aad ah u xumaaday taa oo sii kordhisay nabadgelyo la'aantii iyo khalkhalkii siyaasadeed. Kayd-cilmiyeed badan oo rasmi ah Soomaaliya ma lahayn ama waa uu lumay sidaa awgeed cilmi-baarayaashu ma aanay helin dhigaal iyo xog badan oo la xiriirta horumarinta karaanka bulshada. Qodob kale oo cilmi-baarista xaddiday waxa uu ahaa iyada oo ku koobnayd Soomaaliya inta aqbashay dastuurka ku-meel-gaadhka ah ee 2012. Soomaaliland iyo qaybaha dalka ee ay Al-Shabaab ka taliyaan cilmi-baaristu ma daboolin.

## **Dib u eegidda xaaladda horumarinta karaanka bulshada**

Kulankii horumarinta karaanka bulshada ee Soomaaliya waxa uu dib u eegid balaaran ku sameeyey tabta (ama istiraatiijiyadda) horumarinta karaanka bulshada heer qaran iyo heer gobol iyo sida ugu wanaagsan ee loo wajihi karo tabtaa. Ujeeddada dib u eegaddani waxa ay ahayd in la isticmaalo tabaha haatan jira si loo kordhiyo fahamka, qaab-dhismeedka, habka loo wajahayo iyo qaybaha kala duwan ee tabtan cusub. Dadaalka noocan ahi waxa uu dhalay in kulanku uu wax ka barto qaab dhaqameedkii horay looga isticmaalay goobo ka baxsan Soomaaliya.

Waxaa dib-u-eeggiddan ka mid ahaa u dhabbagalka tabaha laga isticmaalo waddamo Soomaaliya oo kale ah. Qodobada la tixgaliyey waxaa ka mid ah in ay Soomaaliya deris la yihiin, isku ekaanshaha xaaladda dalkaas iyo Soomaaliya, khibradda kasoo kabashada khilaafaadka iyo nugeylka dowladda taa oo ay sabab u tahay dhibaatooyinka siyaasadeed iyo kuwa bulsho, sida ay uga soo kabteen hoosaynta kartida bulshada, horumarka muuqda ee ay ka sameeyey qorshaynta istiraatiijiyadeed, hirgalinta siyaasadaha iyo barnaamijta iyo jiritaanka qorshe qaran, kuwo goboleed iyo kuwo heer degaan ah kuwaa oo ku dhex shaqeeya qaab-dhismeedka guud ee qaranka.

---

Soomaalidu waa mujtamac dadyow badan ka duwan oo karti ama awoodo iyo baahiyo gaar iyaga u ah leh. Sidaa awgeed dib-u-eeggiddani waxa ay isku dayday in ay isha mariso qaababka kala duwan ee dowladaha kale ay u wajahaan horumarinta karaanka bulshada ama horumarinta kartida bulshada (HKB/HKB.) Taa macnaheedu ma aha in sida iyagu ay u wajahaan ay Soomaaliya qaadnayso ee waxa ay tahay in cilmibaarayaasha Machadka Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho iyo saamileyda la xiriira ay arkaan haddii ay jirto wax duruus ah oo ay ka baran karaan, dalalka kale ee ka hawl galay kor u qaadidda kartida iyo karaanka bulshadooda.

Waddamada iyo bulshooyinka dib loo eeggay markii ay ogaadeen hoos-u-dhaca ka haysta karaanka bulshada ayey si dheelitiran dib ugu qiimeeyeen qorshayaalkooda iyo hiigsigooda. Taasi waxa ay cilmi-baarayaasha u sahashay in uu keeno tab ku habboon jawiga lagu jiro.

In kasta oo aanay kuwan ku koobnayn, haddana dib-u-eeggistu waxa ay si gun dheer ugu kuur gashay tabaha horumarin karaanka bulsho iyo qaabka loo fuliyey ee siddeed dal. Kuwaasi waxa ay kala yihiin Barbaydos, Jasiiradaha Kareebiyaanka, Joordan, Ruwanda, Singabuur, Siri Lanka, Koonfur Afrika tabaha ay raaceen ee heer qaran iyo waliba Gobolka Galbeedka Kayb. Arrintan waxa aannu u isticmaalay tixraac ahaan intii aannu baarista ku guda jirnay. Sidaa oo kale kulanku waxa uu darsay laakiin aanu isticmaalin macluumaad la xiriira qorshaha qaran ee Hindiya, Lisooto, Laybeeriya, Malaysiya, Muruushiyaas, Nayjeeriya, Siiraaliyoon iyo Yugaandha.



*Ma jiro hal qaab oo sax ah oo loo diyaariyo tabta ama istiraatiijiyadda qaran ee horumarinta karaanka bulshada. Nooca shaqeeya waxa uu ku xiran yahay baahiyaha gaarka ah iyo duruufaha jira ee dalkaas, dhaxalka ay ka tageen isku-dayadii hore, dhaqanka iyo habdhaqanka iyo khayraadka dalka*

Ma jiro hal qaab oo sax ah oo loo diyaariyo tabta ama istiraatiijiyadda qaran ee horumarinta karaanka bulshada. Nooca shaqeeya waxa uu ku xiran yahay baahiyaha gaarka ah iyo duruufaha jira ee dalkaas, dhaxalka ay ka tageen isku-dayadii hore, dhaqanka iyo habdhaqanka iyo khayraadka dalka ama gobolka laga hadlayo. Joordan iyo Barbaydoos waxa ay isticmaaleen is barbardhig caalami ah iyo duruus laga bartay waddamo kale. Dowladda Joordan waxa ay uruurisay tusaalayaal gaar ah oo fulineed iyo qaab hawlgal oo ay ka soo uruurisay Koonfurta Kuuriya, Singabuur, Finland, Boqortooyada Ingiriiska, Dubeey iyo Boolaandi. Sababta ay waddamadan Joordan u dooratay waxaa weeye (gaar ahaan Koonfurta Kuuriya iyo Singaboor) waxa ay ahaayeen waddamo dakhliga soo gala uu yar yahay inta aanay bilaabin dib-u-habaynta, laakiin waxa ay dib-u-habaynta ka dib gaareen hufnaan iyo kobac dhaqaale.

# Jadwalka 1aad - Casharradii Joordan ay ka baratay cilmi-baaristeedii lixda waddan.<sup>9</sup>

## Kuuriyada Koonfureed

Xaaladda guud	Casharrada laga bartay
Lixdankii sano oo la soo dhaafay, Kuuriya waxbarashada ayay si cad aasaas uga dhigtay koboceda dhaqaale, taas oo ahayd arrin ugub ku ah. Waxa ay samaysay maalgashi sarreeya oo waxbarashada ah (7.6% deklhiga dalka); imtixaanno iyo qiimayn adag, shaqo ku xiran mudnaan iyo natiijada imtixaamada iskuullada/jaamacadaha, taas oo kor u qaaday dadaalka ardayda iyo waalidka – oo 80% ardayda. Kuuriyada Koonfureed waxa ay kireystaan macallimiin waxbarta si ardaygu u noqdo mid horreeya;	Maalgashi waxbarasho oo xiriiri ah sida uu tayada kor ugu qaadi karo; Mudnaanta (aqooneed) oo ahmiyad la siiyo in ay abuurto dhiirrigelin bulsho; Dhaqanka Kuuriya oo aaminsan in la shaqaysto lana dadaalo oo tayeynta qayb ka qaatay; Wel-wel hadda ka jira hal-abuurka xumada iyo shaqo la aanta dhalinyarada oo waxbarasho ay xal u noqon karto

## Singapore

Xaaladda guud	Casharrada laga bartay
Singapore waxa ay ku guuleysatay in ay isku xirto dib-u-habaynteeda waxbarashada iyo qorsheeda (kobcinta) dhaqaalaha. Waxaa kale oo ay Singapore si ka-baaraan-degid leh u dejisey dib-u-habaynteeda waxbarashada iyada oo ay caddayeen ahmiyadaha iyo ujeeddoyinka, dib-u-habayntaasna loo hirgeliyey hab hufnaan leh. Hirgelinta dib-u-habayntu waxa ay ahayd mid aan aragti keliya ahayn ee ay ahayd in ay dhacdo, dib-u-habyntu waxay ahayd mid joojaysan oo aan kala go' lahayn; dadka gacanta ku hayey hirgelintuna waxa ay ku khasbanayeen in ay ka mira dhalyaan. Tusaale ahaan, hirgelinta iskuullada farsamada gacanta waxaa la socdey hirgelinta xarun dhexe oo maamusha oo si dhow dowladda ula shaqaysa masuulka ka ah manhajka, tayada macallinka iyo aqoonta ardaygu kororsanaya.	Istiraatiijiyin dhaqaale iyo waxbarasho oo isla socda ama midaysan; Qorsheyaal shan sano ah oo si dhammaystiran loo hirgeliyey; Isla-xisaabtan dhab ah oo madaxda dhexdooda ah oo ku khasbaya fulinta wixii la qorsheeyey; Jiritaan isbahaysi is-baddel-doon ah oo mimitid ah; Si joogta ah in isha loogu hayo awoodda, aqoonta iyo wax ku oolnimada macalliimta

## Finland

Xaaladda guud	Casharrada laga bartay
Finland waxa ay mar kasta kaalin horyaal ah ka gashaa qiimaynta kala duwan oo caalami ah ee waxbarashada sida Heerarka Barashada Xisaabta iyo Sayniska (Trends in International Mathematics and Science Study (TIMSS) iyo Qorshaha Caalamiga ah ee Qiimaynta Ardayda (Programme for International Student Assessment (PISA). Dib-u-habaynta waxbarashada ee Finland waxa ay ku salaysan tahay awood-daadejin waxbarashada iyo ka talinteeda oo looga danbeeyo maamullada iskuullada iyo macalliimta; Finland waxa ay leedahay qorshe shan sano ah, macalliimiin xeel-dheerayaal ah, iyo iyada oo ardayda jaamacadaha aadaya ay macalliniimada in arkaan waxa ugu mihimsan ee jaamacadaha laga barto. Halkii boos oo macalliniimo ah oo jaamacadaha ka bannaan, waxaa soo dalbada toban arday. Dhaqanka dadka Finland oo salka ku haya madhabtada Calvinist (ee Kiristaankana) waxbarashada iyo waxbaridda waxaa loo arkaa wax weyn oo waajib diini ah ku salaysan.	In ay Filand noqoto dal horreeya, waxaa u sahlay waxbarashada tayaysan; Saamaynta qoyska iyo midda dhaqanka kaalin weyn ayay ku leeyihiin in la helo miro wax ku ool ah; Markii ay caddahay sida shaqada loo kala lee yahay, ciddii shaqada loo daadejiyana ay karti fulineed leedahay, daadejinta shaqada waa ay shaqayn kartaa miro dhanaa waa ay noqon kartaa;

## Ingiriiska

Xaaladda guud	Casharrada laga bartay
Labaatan-kii sano oo la soo dhaafay, waddanka Ingiriiska waxa uu ku soo caan-baxay in ay hirgeliyaan dib-u-habaynta lagu hagaajinayo, waxbarashada sida qorsheyaal horumarineed ee akhriiska iyo qoraalka, iyo barashada xisaabta oo wadata hagaagayaal rasmi ah, imtixaanno heer dalka oo dhan ah, shaacinta natiijoyinka iskuul kasta, manhaj wata halbeegyo cusub, iyo maal-gelin mashaaricda cusub oo lama taabtaan ah oo aan meel kale loo leexin karin iyo weliba awoodda oo loo kordhiyey xafiyada kormeerka. Dib-u-habaynta mira dhalka noqotay, waxa ay u badnayd, kuwa afar sano socdey. Dib-u-habaynta ayaa qayb ka ahayd, dib-u-habayn guud oo Ra'iisul Wasaaruhu sameeyey, isaga oo sameeyey Xafiiska Hirgelinta (Delivery Unit) si hirgelinta mashaaricda dawladda oo dhan si sahlan looga hagi karo hal meel oo lagu og yahay.	Dib-u-habayn si buuxda u jihaysan oo maal-gelintuna ay leedahay yoolal cad-cad, haystana taageero buuxda waa miro dhal; Isla xisaabtan buuxa oo hoos ka soo bilaabanaya waa muhiim sida in la daabaco natiijada iskuul kasta; Ma fududa in waddada horumarka lagu sugnaado, waase wax la samayn karo. Waa in aad looga firsadaan in hay'adaha shaqada dib-u-habaynta wada la saaro culayso iyo is-baddelka is-dabajooq ah oo ka baxsan awoodooda;

## Dubai

Xaaladda guud	Casharrada laga bartay
Dubai waxay iyadu falatay waddo cusub oo ah in ay dhiiri-geliso waxbarashada gaarka loo leeyahay si ay xal ugu noqoto culaysyada ka haysta in waxbarasho tayaysan loo diyaariyo ajaanibta badan ee Dubai ku nool. Dhanka iskuullada, Dubai kormeerka ayay u adeegsataa in ay iskuul kasta la xisaabtanto; qiime kordhinta si gaar ah ayay isha ugu haysaa oo waxaa shardi u ah in iskuulka ardayda qiimaha ku kordhinaya u dhacdo sare oo xagga tayada ah haysto, waxayna ku xukuntaa ama ku xakamsaa iskuullada gaarka loo leeyahay in ay markii ay doonto ay shatiga ka ceshan karto. Dubai waa ay dhaaftay Abu Dhabi iyo Doha waayo qaab-hoggaaminteeda ayay ka dhigtay mid firfircoon, sahlan, saamayna leh, suuqaas waxbarashada gaarka loo leeyahay ee ay kobcisay, meelo yar-yar marka laga reebo, hawl-gabdeedu culays muuqda waxbarashada ma saarin.	Isla-xisaabtanka ayaa loo isticmaalay aaladda lagu hirgeliyo dib-u-habaynta; kormeerka wax weyn buu ka tray hufnaanta. In dowladdu waxbarashada ay hoggamiso oo kafaalo qaaddo, ma aha xalka kaliya ee jira; ganacsatada oo waxbarashada qayb ka noqota ayaa iyana wax ku ool ah, maal-gashigana ka qaybqaadan karto; In la fahmo muhiimadda iyo xalka, si aan ka weecasho lahayna xoogga loo saaro waa naqshad shaqaynaysa In la isku-xiro tabaha waxbarashada iyo qorshaha dhaqaale ee magaalada waa labo aan kala maarmin

## Poland

Xaaladda guud	Casharrada laga bartay
Ilaa 1999, Poland waxa ay ahayd goob guul dib-u-habaynta waxbarashada ay ka hirgashay, iyada oo si xawaara ah uga horumartay dalalka ay tartanka ku jireen ama isku heerka ahayeen ee Yurub, isla markaana iyaga oo galay kharash ka yar midka ay galeen dalalka ay dhaaftay. Qiimaynta caalamiga ah ee loo yaqaanno PISA, hadda Poland waa ay ka horaysaa USA, France, Germany, Sweden, iyo UK. Is-beddelada u shaqeysay Poland ee manhajka iyo qiimaynta ee ay samaysay waxaa ka mid ahaa in ay dugsiyada hoose/dhexe urursatay; dugsiyada sarana ay saddex sano ku dartay, si ay ardaydu u helaan waqti dheeri ah inta aysan abbaarin farsamo gacan ama jaamacad. Guushaan waxa loo tiiriyey in ay salka ku hayso, dalab ka imaanayey bulshada, oo xaaladda siyaasadeed ee dalka ayaa is-badeshey oo markii shucuyaddu ay burburtay 1990-maadkii ayaa waxaa yimid baahi loo qabo isbaddel dhaqan dhaqaale oo ay ka dhalatay dalab la dalbanayo waxbarasho tayo leh.	Madaxbannaani iskuullada iyo maamulkooda la siiyo ayaa lafdhabar ahayd, laakiin kormeerka dowladdu markii loo baahdo iyo meelaha dadka saboolka ahi deggan yihiin wax weyn ayay tartay iyo weliba tababarrada macalliimtu; Ku dhiirshada in dib la isugu shaandheeyo sannadaha waxbarashada aasaasiga ah waxa ay ahayd mid wax ka baddashay tayada waxbarashada; Cadaadis iyo codsiyo waaridka ka imaanayey ayaa isbeddel inuu dhaco riixayey.

<sup>9</sup> The Hashemite Kingdom of Jordan, Education for Prosperity: Delivering Results – A National Strategy for Human Resource Development 2016 – 2025.



---

## Qaybaha tabta / istiraatiijiyadda horumarinta karaanka bulshada

Tabaha ama istiraatiijiyoo-yinka horumarinta karaanka bulshada ee ay cilmi-barayaashu darsen, waxaa kasoo dhex baxay dhawr qaybood oo ay wadaagaan kuwaas oo loo kala sooci karo lix qaybood oo ay istiraatiijiyad kasta leedahay.

**Gogol-xaarka hore ee dhismaha Tabta:** Qaybaha gundhigga ah waxaa loo kala saari karaa saddex marxaladood, kuwaa oo kala ah: wadatashi/iskaashi, falanqayn xaalladda dalka iyo qiimeyn baahida jirta iyo adeegyo baahi iyo helitaan ku jaan go'an.

**Qiyam, mabaadii, qorshe qaran iyo qaab-dhismeedka siyaasadeed oo isku sidkan:** Qodobkan waxaa loo kala qaybin karaa shan qaybood: qiyamta aasaasiga ah/ mabaadiida hagaya, is-waafajinta siyaasadda qaran, is-waafajinta howlaha dowladda oo dhan, qaadashada qaabka ugu wanaagsan ee hawl loo qabto iyo in aan qayb bulshada ah laga tegin oo tabtu ay koobayso dadka oo dhan (sida dumar, naafo, barakacayaal).

**Beegsi:** Ujeeddada la beegsanayo (marka la diyaarinayo tabta horumarinta bulshada) waa in la ciribtiro fakhriga, kor loo qaado isku filnaanshaha, wax soo saarka, adkaysiga – tabta horumarinta karaanka bulshaduna, asal ahaanba waa mid ujeedeysan, oo meel hiigsanaysa. Qodobkan waxaa loo kala jabin karaa dhawr qaybood oo kala ah: hiigsi ama aragti fog, hawlgal, qaabka lagu gaarayo ujeeddada istiraatajida, yoolka, tiirarka istiraatiijiga ah iyo weliba bar-tilmaameedyada la abbaarayo.

**Doorarka iyo Agaasinka:** Meelmarinta tabtu waxa ay ku xiran tahay qeexidda doorarka ay cid waliba ka ciyaarayso iyo waajibaadka saaran kuwaas oo ku dhidban daahfurnaan iyo xilkasnimo. Tabtu waxa ay dowladda, wasaaradaha iyo saamileyda kale ee horseedka ah u qeexday doorkooda. Qodobkan waxaa loo kala qaybin karaa saddex qaybood doorarka hay'adaha, wasaaradaha iyo awoodaha kale ee hormuudka ah iyo guddiyada / kooxaha shaqo-wadaagga ah.

---

**Qaab dhismeedka tabta Horumarinta Karaanka Bulshada:** Dal waliba sida ay tabtiisu waxtar u tahay waxa ay ku xiran tahay sida uu u qaabeeyey tabtiisa. Qaybtan waxaa loo sii kala jabin karaa sagaal qaybood: qeexitaanka guud; Qaabaynta Shahaadooyinka dalka; Jaantuska Dalka ee Tababarada oo ay ka mid yihiin habka halbeegyada; arrimaha mudnaanta tabta u aragto; ku xirnaanta siyaasadaha qaranka/nidaamka; wajiyada fulinta qorshayaasha tabta; jadwalka hannaanka horumarinta karaanka bulshada; waxyaabaha la qabanayo; xogaha iyo istaastikada kuwaa oo ay ka mid yihiin macluumaadka shaqada iyo shaqaalaha, hagidda iyo la talinta shaqaalaha.

**Hirgalinta:** Dhammaan qaybaha annu ka soo hadalnay ayaa la isu keenay si loo dhaqaaqiyo hawshan, maxsuulkeedana loo hagaajiyo. Qaybtan waxaa loo kala jabin karaa afar waaxood: xaaladda sahlaya fulinta tabta; isku xirka fulinta; ka-qayb-galayaasha tabta (dalka, dibadda iyo caalami); iyo kormeer iyo qiimeyn.

## Is waafajinta Horumarinta Karaanka Bulshada iyo xaaladda dalka

Afartankii (40) sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya waxa ay isku dayeysay inay dajiso qorshe horumarineed kaa oo uu riixayey horumarinta karaanka bulshada. Qorshaha horumarinta qaranka, NDP-9 oo daboolayey 2020-2024 waxa uu xoogga saarayaa toddoba ahmiyadood oo muhiim u ah horumarinta karaanka bulshada kuwaa oo badankoodu diiradda saaraya waxbarashada iyo horumarinta xirfadaha.<sup>10</sup>

**Xoojinta maalgalinta waxbarashada:** Dowladdu iyada oo kaashanaysa hay'adaha horumarinta waa in ay xoogga saarto maalgalinta waxbarashada qaybaha muhiimka ah ee bulshada si loo helo waxbarasho loo siman yahay oo tayo leh loona abuuro hannaan waxbarashada lagu maalgalinayo oo waara.

**Diyaarinta heerar iyo jaangoyn sharci iyo siyaasadeed:** Tani waxa ay ka socotaa dowladda waxa ayse sidoo kale khusaysaa hay'adaha aan dowliga ahayn. Qaybta waxbarshadu waa inay xoojiso siyaasaddeeda iyo qaab sharciyeedkeeda si kor loogu qaado gudbinta adeegga waxbarashada. Manhajka aasaasiga ahi sidiisa ayuu u sii socon doonaa, halka laga diyaarin doono manhaj qaran oo dugsiga sare ah. Tabta horumarinta karaanka bulshadu waxa ay u aragtaa muhiim degdeg ah in la sameeyo gole saamiley.

---

10 Somalia National Development Plan 2020 – 2024 (NDP-9), Volume 1, Federal Government of Somalia Ministry of Planning, Investment and Economic Development, 15 October 2019.

---

**Abuurrida nidaam maamula macluumaadka waxbarashada ee dalka:** Tani waxa ay soo saari doontaa macluumaad tayo sare leh oo sahla go'aan qaadasho cilmi iyo ogaansho ku dhisan.

**Mudnaan-siinta waxbarashada ee dadka bulshada ugu nugul:** Barakacayaasha iyo reer miyigu waxa ay wajahaan fursado yari xagga waxbarashada ah. Fursadahaasi waa sii yaraadaan xagga gabdhaha oo tirada gabdhaha iskuulka la geeyo iyo kuwa iskuulka dhammeeya waa ay ka hoosaysaa midda wiilasha. Caqabadahan waxaa lagaga gudbi karaa wada shaqayn dhexmarta hay'adaha aan dowliga ahayn, dhisidda iskuulo cusub, shaqaalaysiin macallimiin dumar ah, iyo kor u qaaddida wacyiga qoyska ee la xiriira muhiimadda ay waxbarashu leedahay, intaa oo lagu laray adkaynta nabadgalyada.

**Shaqaalaynta iyo tababarka macallimiin tayo leh:** Tani waxa ay sahlaysaa in la helo waxbarasho tayo leh oo habboon. Dalka oo dhan, macallimiin tababar fiican leh ayaa fulin doona manhajka cusub.

**Dhallinyarada oo xoogga la saaro:** Iyada oo lala tashanayo goobaha shaqada, ururrada shaqada iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, waa in la abuurto tababarka xirfadaha gacanta iyada oo il gaar ah lagu eegayo xirfadaha suuqa shaqada looga baahan yahay. Arrintani waxa ay qayb ka tahay tiirka dhaqaalaha ee NDP-9 waxaana lala kaashanayaa saamileyda. Siyaasadda Dhallinyarada ee Qaranka iyo Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ayaa isku hawli doona sidii ay dhallinyarada ugu abuurto lahaayeen fursado xirfadeed iyo kuwo farsamada gacanta la xiriira. Sidaa oo kale waxaa la dhiirri-gelin doonaa horumarinta tababarrada iyo xirfadaha, ganacsi abuurka iyo adeegyada kale.

**Kor u-qaadka awoodda waxqabad:** Dowladdu waxa ay xoojinaysaa shaqaalaha haatan shaqeeya waxa ayna tababar siinaysaa kuwa cusub si wax looga qabto baahiyaha waxbarasho ee mudnaanta sare u leh bulshada. Waxa ay sidaa oo kale xoojin doontaa maamulka, awoodda maaraynta iyo tayeynta waaxaha waxbarashada iyo waxqabadkooda si ay usoo bandhigi karaan waxbarasho tayo leh.



*Laga soo bilaabo sanadkii 2000, shan doorasho oo ay shan madax weyne xilka kula kala wareegeen ayaa Soomaaliya ka dhacay. Arrintaasi waxa ay Afrika gaar ahaan bariga Afrika ka tahay dhif iyo naadir*

## Xaaladda Soomaaliya

Qaabka horumarinta karaanka bulshadu waxa uu ku xiran yahay xaqiiqda Soomaaliya ka jirta. In kasta oo ay caqabado badani jiraan haddana rajadu ma xuma. Soomaaliya waxa ay soo martay 30 sano oo dagaal iyo deganaansho la'aan ah. Labaatankii sano ee u dambeeyey waxa ay caan ku yihiin soo kabasho gaabis ah iyo dib udhis laamaha dowladda sida nidaam dhexe oo muran badan dhaliyey, walina aan saldhigan. Dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab oo xiriir la leh Al-Qaacidda ayaa tobankii sano ee dambe ka soo ifbaxay gobolada dhexe iyo kuwa koonfureed gaar ahaan Muqdisho.

Xaaladaha dhaqan-dhaqaale, nabadgalyo iyo maamul ee Soomaaliya ka jira waa kuwo niyad jab leh isla markaana mustaqbal fiican uu ka muuqdo. Dalku waxa uu galaa halka ugu xun ee tusmooyinka caalamiga ah: tacliinta ugu hoosaysa, cimriga ugu gaaban ee dadka, caafimaadka ugu xun, xuquuq ku tumashada, saboolnimada, shaqo la'aanta, nafaqo darrida ubadka iyo musuqmaasuqa ugu sarreeya caalamka oo dhan. Laakiin ifafaaluhu ma xuma maxaa yeelay sanado badan ayey Soomaalidu ku dadaalaysay, bulshada caalamkuna taageeraysay, dib u dhiska dalka. Laga soo bilaabo sanadkii 2000, shan doorasho oo ay shan madax weyne xilka kula kala wareegeen ayaa Soomaaliya ka dhacay. Arrintaasi waxa ay Afrika gaar ahaan bariga Afrika ka tahay dhif iyo naadir.

Qaybahan soo socda waxa aan kusoo bandhigaynaa dulmar guud oo ku saabsan nabadgalyada, siyaasadda, maamulka, xiriirka dibadda, arrimaha dhaqaalaha, arrimaha bani'aadanimada la xiriira iyo qorshaha horumarinta karaanka bulshada ee Soomaaliya.

## Nabadgalyada

Amniga guud ee Soomaaliya ma ahayn mid kasoo raynaya 2019, meelaha qaarkoodna wuuba kasii daray in kasta oo ay dowladda federaalku badisay 36% dakhliga ay galiso arrimaha amniga.<sup>11</sup> Tobankii sano ee lasoo dhaafay, dowladda Soomaaliya waxaa caawinayey AMISOM oo leh 20,000 oo ciidan nabad ilaalin oo Afrikaan ah kuwaas oo ay Qaramada Midoobay soo dirtay, Midowga Afrikana uu kharashkooda bixiyo. Waxa ay ciidamada kala yimaadeen waddamada Soomaaliya dariska la ah. Dowladda federaalku waxa ay dhistay xoog ciidan oo dhan 20,000 oo isugu jira xoogga dalka, booliis iyo sirtoon.<sup>12</sup>

<sup>11</sup> "Building Education to Boost Human Capital," p.8.

<sup>12</sup> Security Pact agreed at London Conference on Somalia, 11 May 2017, available online at: [https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment\\_data/file/613720/london-somalia-conference-2017-security-pact.pdf](https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment_data/file/613720/london-somalia-conference-2017-security-pact.pdf), last accessed on 1 June 2020.

---

AMISOM waxa ay qunyar u dhimaysaa tirada ciidamadeeda si ay u fuliso istaraatiijiyad aan sahlanayn oo ay kaga baxayso Soomaaliya. Qaramada Midoobay mar ay bishii May 2019 dib u eegid ku samaysay waajibka AMISOM, golaha amnigu waxa uu ansaxiyey kolkii la gaaro bisha Febraayo ee sanadka 2020 in la yareeyo qiyaasta 3,000 oo askari ciidamada AMISOM. Ciidamada ugu badan ee Soomaaliya loo ogol yahay inay joogaan waa 19,626. Goluhu waxa uu sidaa oo kale faray AMISOM in ay si tartiib tartiib ah masuuliyadda ugu wareejiso dowladda Soomaaliya, waxa uuna dowladda Soomaaliya ka codsaday in ay la wareegto mas'uuliyadda amniga dalka markii la gaaro sanadka 2021. Xeel-dheerayaashu waxa ay rumaysan yihiin haddii AMISOM ay si degdeg ah uga baxdo Soomaaliya, in taasi ay horseedi karto in guulihii horay looga hantiyey Al-Shabaab ay bar-kuma-taal noqonayaan, halisna ay galayaan laamaha dowladda federaalka ee tallaabo qaadka ah.<sup>13</sup>

Al-Shabaab waxa ay dalka ka fuliyaan weeraro culculus oo argagixiso; hal weerar oo kali ah sanadkii 2019 ayey ku dileen dad ka badan 1,500. Reer Muqdisho ayey ku dhacaan badanka weeraradan foosha xun ee naxariis darrada ahi. Kooxda Al-Shabab waxa ay gacanta ku haysaa jidadka waqooyi iyo koonfurba magaalada uga baxa. Bishii Oktoobar 2017 iyo bishii Diseembar 2019, in ka badan 1,200 oo qof oo ka mid ah dadka magaalo madaxda deggan ayaa ku dhintay ama ku dhaawacmay labo ka mid ah xasuuq-wadareedkii ugu xumaa ee caalamka ka dhaca. Weeraradii u dambeeyey ee ka dhacay isgoys duleedka magaalada ee koonfur galbeed ah waxaa ku naf waayey in ka badan 90 qof oo badankoodu ahaa ardo jaamacadeed iyo xubno ka mid ah ciidamada booliiska.<sup>14</sup>

Dowladda federaalka ee Soomaaliya waxa ay qiratay in Al-Shabaab ay aad u dhexgaleen hay'adaha dowladda. Bishii Agoosto 2019, duqii magaalada Muqdisho Cabdiraxmaan Cismaan (Yiriisow) ayaa lagu dilay qarax ismiidaamin ahaa oo ay fulisay gabar Al-Shabaab ka tirsan oo u shaqaynaysay dowladda hoose taas oo gacan ka heshay qof kale oo isna xubin ka ahaa Al-Shabaab una shaqaynayey maamulka gobolka Banaadir.<sup>15</sup>

Labadii sano ee lasoo dhaafay, Al-Shabaab waxa ay aad u kordhisay awooddeeda dakhli-soosaar ee dalka oo dhan oo ay Muqdisho ka mid tahay. Machadka Hiiraal oo ah hay'ad cilmi-baaris oo arrimaha amniga u kuurgala oo fadhigiisu yahay Muqdisho waxa uu sheegay in Al-Shabaab ay uruuriyeen \$27 milyun sanadkii 2018 oo kaliya.<sup>16</sup>

“  
Bishii Oktoobar  
2017 iyo bishii  
Diseembar 2019,  
in ka badan  
1,200 oo qof oo  
ka mid ah dadka  
magaalo madaxda  
deggan ayaa ku  
dhintay ama ku  
dhaawacmay  
labo ka mid ah  
xasuuq-wadareedkii  
ugu xumaa ee  
caalamka ka dhaca

---

13 "Security Council Extends Mandate of African Union Mission in Somalia, Authorizes Troop Reduction, Unanimously Adopting Resolution 2472 (2019)", UN Press release, 31 May 2019, available online at: <https://www.un.org/press/en/2019/sc13828.doc.htm>, last accessed on 1 June 2020.

14 "Al-Shabab claims deadly attack in Somalia's Mogadishu," Al Jazeera, 30 December 2019, available online at: <https://www.aljazeera.com/news/2019/12/al-shabaab-claims-deadly-attack-somalia-mogadishu-191231002343929.html>, last accessed on 1 June 2020.

15 Sheikh, Abdi "Somalia Says Blind Female Suicide Bomber Killed Mogadishu Mayor," 9 August 2019, available online at: <https://www.reuters.com/article/us-somalia-security-bomber/somalia-says-blind-female-suicide-bomber-killed-mogadishu-mayor-idUSKCN1UZ1D0>, last accessed on 1 June 2020.

16 "The AS Finance System," Hiraal Institute, July 2018, p.7, available online at: <https://hiraalinstitute.org/wp-content/uploads/2018/07/AS-Finance-System.pdf>, last accessed on 1 June 2020.



*Dhammaadkii sannadkii 2019-ka, dowladda dhexe waxa ay diiwaangalisay farana ay ka qaadday in ku dhaw dhammaan xoogga dalka iyo ciidanka booliiska ee hoos taga dowladda dhexe si meesha looga saaro qof aan ciidamada ka mid ahayn oo magaciisa mushaar lagu qaato*



*Hay'adda caalamiga ah ee lagu magacaabo Aqalka Xorriyadda (Freedom House) ayaa imminka Soomaaliya ku daray sagaalka (9) dal ee dunida ugu liita xagga illaalinta xuquuqaha siyaasadeed ah iyo kuwa madaniga ah*

Kooxdu waxa ay leedahay nidaam si cabsigalin iyo handadaadi ku jirto ay dalka inta ay gacanta ku hayaan iyo inta ay dowladda dhexe gacanta ku hayso lacag uga uruursadaan. Warbixin ay qaramada midoobay soo saartay ayaa sheegaysa in kooxdani ay dekada Muqdisho ka qaadaan canshuur, dekada oo sidaa oo kale ah isha ugu muhiimsan ee ay dowladda dhexe dhaqaale ka hesho. Soomaali badan ayaa is weydiinaysa la xisaabtan la'aanta ka jirta laamaha amniga maxaa yeelay ku baahidda Al-Shabaab ee laamaha amniga iyo uruurinta dakhliga lagu uruuriyo caga-juglayn iyo cabsi galin ayaa heer aan hore loo arag gaaray.

Dowladda federaalku waxa ay sii waddaa dadaalkeeda dib-u-habaynta kaas oo hadafkiisu yahay la dagaalanka musuqmaasuqa baahay. Dhammaadkii sannadkii 2019-ka, dowladda federaalku waxa ay diiwaangalisay farana ay ka qaadday in ku dhaw dhammaan xoogga dalka iyo ciidanka booliiska ee hoos taga dowladda si meesha looga saaro qof aan ciidamada ka mid ahayn oo magaciisa mushaar lagu qaato. Hawlgalkani sidaa oo kale waxa uu wax ka baddalay nidaamka mushaar bixinta kaa oo markii hore ahaa lacag caddaan ah oo qofka la siiyo haddana noqday mushaarka oo askariga akoonkiisa ama teleefankiisa gacanta ugu dhaca.<sup>17</sup>

## Siyaasadda

Loollan siyaasadeed ku saabsan awoodda, kheyraadka iyo gooni wax isusiin ayaa khal-khaliyey siyaasadda Soomaaliya. Siyaasadda xisbi daacad u ahaanshaha ku dhisan ayaa caadi ka dhigay si xun wax usheegga, waxayna sumaysay jawiga siyaasiga ah. Sharciga dalka oo aan ilko fiican lahayn awgeed, musuqmaasuqii ayaa u ekaaday caadi taas oo wiiqday hay'adihii dowliga ahaa. Aragti gaabnida siyaasiyiinta Soomaaliyeed ayaa dhalisay in xukunku uu noqdo magac-u-yaal taa oo yaraysay garoonkii siyaasiga ahaa, iska hor keentay shacabkii, wareerisayna bulshada caalamka. Intaa waxaa dheer xuquuqda siyaasadeed iyo midda dadka ayaa lagu tuntay, waxaana aad u kordhay musuqmaasuqa.

Hay'adda caalamiga ah ee lagu magacaabo Aqalka Xorriyadda (Freedom House) ayaa imminka Soomaaliya ku daray sagaalka (9) dal ee dunida ugu liita xagga illaalinta xuquuqaha siyaasadeed ah iyo kuwa madaniga ah.<sup>18</sup> Laga soo bilaabo 2007 ilaa maanta, Soomaaliya waxa ay gashaa halka ugu hooseysa ee tasmada musuqmaasuqa ee ay samayso hay'adda Daahfurnaanta Caalamiga ah (Transparency International) ee ay kaga hadasho heerarka musuqmaasuqu uu marayo.<sup>19</sup>

<sup>17</sup> Waal, Hassan Yuusuf, "Renewed hope: Rebuilding Somalia's national army," Daily Sabah, available online at: <https://www.dailysabah.com/op-ed/2019/10/24/renewed-hope-rebuilding-somalias-national-army>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>18</sup> "Freedom in the World 2020: A Leaderless Struggle for Democracy," Freedom House, available online at: [https://freedomhouse.org/sites/default/files/2020-02/FIW\\_2020\\_REPORT\\_BOOKLET\\_Final.pdf](https://freedomhouse.org/sites/default/files/2020-02/FIW_2020_REPORT_BOOKLET_Final.pdf), last accessed on 1 June 2020.

<sup>19</sup> 2019 Corruption Perceptions Index, Transparency International, available online at: <https://www.transparency.org/en/cpi/2019>, last accessed on 1 June 2020.



---

Tan iyo markii la doortay Madaxweyne Maxamed Farmaajo bishii Febraayo 2017, jawiga guud ee siyaasadeed ee dalka waxa uu noqday waxa ay xeeldheerayaasha qaarkood ugu yeeraan “fashilkii wada-shaqaynta siyaasiyiinta.”<sup>20</sup> Xiriirka u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada ayaa xumaaday bilo uun ka dib markii Farmaajo uu xukunka la wareegay uuna la yimid nidaam xukun, oo taladii kusoo uruuriyey dowladda federaalka. Tani waxa ay meesha ka saartay nidaamkii federaaliga ahaa ee ku dhisnaa is-qancinta iyo isu-tanaasulka tan iyo sanadkii 2004. Khilaafka ugu weyn waxa uu ahaa awood qaybsiga dastuuriga ah ee dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada si kuwan dambe ay u gaaraan ah-daaftooda siyaasadeed, dhaqaale iyo diblomaasiyadeed. Muqdisho shaki ayey ka qaaday dowlad goboleedyada waxa ayna si degdeg ah uga shaqaysay sidii ay u minjo-xaabin lahayd, xataa haddii ay ku kallifto in ay xoog u isticmaasho.

Afar ka mid ah dowlad goboleedyada shanta ah ayaa doorashooyin qabtay ama qabanayey. Dowladda federaalku halkaa waxa ay ka aragtay fursad ay saameyn ku yeelan karto haddii ay suuragal tahayna ayba karkaarka ku waydaarin karto madaxda dowlad goboleedyada ee aan xiriirka fiican la lahayn kuna baddali karto kuwo iyada u dhaganugul. Sida culus ee ay dowladda federaalka u maamushay siyaasadda ku aaddan dowlad goboleedyada ayaa dhalisay duufaana siyaasadeed kaa oo hakiyey horumar kasta oo laga sameeyey abuuridda siyaasad cid walba ay iska dhex arki karto.

Awoodda oo ay isku soo koobto dowladda federaalka waxa ay dhalisay in aanu shaqaynin Haykalkii Amniga ee Qaranka (NSA) kaa oo la sameeyey 2017 hadafkiisuna ahaa iskaashi xagga amniga ah oo u dhexeeya dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada.<sup>21</sup> Muruqtuujintaa iyo is-mahadintaasi waxa ay keentay is-mari-waa, waxa ayna abbuurtay xaalad ay argagixisadu ku baraarto kuna xoogaysato.

Sanadkii u dambeey, wax horumar ah oo la taaban karo lagama gaarin qabyo-tiridda dastuurka. Sababta ugu weyn ee arrintaa keentay waa khilaafka siyaasiga ah ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Dastuurka ku meelgaarka ahi waxa uu u baahan yahay dibu eegis buuxda iyo heshiis ku saabsan awood iyo kheyraad qaybsiga oo dhexmara saamileyda muhiimka ah.

---

20 Menkhaus, Ken, “Elite Bargains and Political Deals Project: Somalia Case Study” paper for the UK Government Stabilisation Unit, February 2018, available online at: [https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment\\_data/file/766049/Somalia\\_case\\_study.pdf](https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment_data/file/766049/Somalia_case_study.pdf), last accessed on 1 June 2020.

21 London Conference Security Pact.

---

Wasaaradda faderaalka ah ee Arrimaha Dastuurka iyo guddiga madaxa bannaan ee dib-u-eegidda dastuurka waxaa loo xilsaaray in ay hoggaamiyaan howshan. Laakiin waxa ay u baahan yihiin midaynta aragtiyaha iyo wadashaqaynta dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada.

Mid ka mid ah guulaha waa weyn ee uu baarlamaanku gaaray waa meelmarinta sharciga dalka ee doorashooyinka 28 Diseembar 2019. Kaddib in ka badan hal sano oo wadhadallo iyo gorgortan kusaabsan qaabkii loo qaban lahaa doorashada 2020-2021 ee golaha shacabka iyo madaxweynaha, badanka xubnaha golaha shacabka iyo saamileyda muhiimka ahi way taageersan yihiin qaab-doorashada cusub.<sup>22</sup> Laakiin waxaa la isku raacsan yahay in aan sharcigan la meelmarin karin doorashada 2020, maxaa yeelay arrimo muhiim ah ayaan wali la isla meel dhigin.<sup>23</sup>

“  
Kulan bishii  
Febraayo 2020  
Addis Ababa  
ku dhexmaray  
Madaxweyne  
Farmaajo iyo  
hoggaamiyaha  
Soomaaliland  
Muuse Biixi Cabdi  
ayaa dhaliyey rajo  
fuf cusub dhaliyey  
oo wadahal

Wadhadalladii u dhexeeyey dowladda federaalka iyo Soomaaliland ayaan wali dhinacna u dhaqaaqin. Soomaaliland waxa ay ku dhawaaqday inay Soomaaliya ka go'day sanadkii 1991. In kasta oo aan wadhadalladii hore wax macne lihi kasoo bixin, haddana waxa ay ugu yaraan abuureen jawi la is hor fariisan karo. Haatan waxaa muuqata colaad furan oo afka ah oo u dhexeeya labada dhinac maxaa yeelay dowladda federaalka ayaa qaadatay mowqif adag. Guddi dibu-heeshiineed oo dhawaan loo igmaday in ay la taliso dowladda federaalka ayaan qudhiisu wali wax horumar ah gaarin. Kulan bishii Febraayo 2020 Addis Ababa ku dhexmaray Madaxweyne Farmaajo iyo hoggaamiyaha Soomaaliland Muuse Biixi Cabdi ayaa dhaliyey rajo fuf cusub oo wadahal, laakiin kaasi durba wuu dhaday kadib markii war ku-tiriku-teen ah uu soo baxay in Farmaajo uu booqan doono Hargaysa ay ka caraysiisey Soomaaliland.<sup>24</sup>

“  
Soomaaliya  
waxaa ka jirta  
faragalin dibadeed  
oo baahsan. Si  
amniga dalka loo  
sugo loona xasiliyo  
waa in wax laga  
qabto danaha kala  
duwan, cakiran  
ee inta badan  
lidka isku ah ee  
ay shisheeyuhu  
Soomaaliya ka  
leeyihiin

## Xiriirka arrimaha dibadda

Soomaaliya waxaa ka jirta faragalin dibadeed oo baahsan. Si amniga dalka loo sugo loona xasiliyo waa in wax laga qabto danaha kala duwan, cakiran ee inta badan lidka isku ah ee ay shisheeyuhu Soomaaliya ka leeyihiin. Dowladda federaalka waxa ay dhawaan bilowday inay ka muuqato diblomaasiyadda gobolka. Soomaaliya waxa ay kamid ahayd waddamadii Geeska Afrika ee Suudaan ka caawiyey inay noqoto guddoonka IGAD.<sup>25</sup> Xiriirka u dhexeeya Kiinya iyo Soomaaliya ma ficna, waxaana xumeeyey dhawr arrimood oo ay ka mid yihiin muranka xuduudda badda iyo ku lug-lahaanshaha Kiinya ee dowlad goboleedka Jubbaland, halkaa oo ay joogaan 4,000 oo ciidan Kiinyaan ah oo ka tirsan AMISOM.<sup>26</sup>

<sup>22</sup> "Somali parliament passes the country's Electoral Bill," Horn Observer, 28 December 2019, available online at: <https://hornobserver.com/articles/90/Somali-parliament-passes-the-countrys-Electoral-Bill>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>23</sup> "Expanded Participation Model: Alternative for Somalia's 2020 One-Person One-Vote Plan," Heritage Institute for Policy Studies Policy Brief, May 2020, available online at: <http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2020/05/Heritage-Institute-Policy-Brief-on-the-2020-Election-English.pdf>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>24</sup> Alfa Shaban, Abdur Rahman, "Somaliland rejects proposed visit by Ethiopia PM, Somali president," 16 February 2020, available online at: <https://www.africanews.com/2020/02/16/abiy-wants-trip-to-hargeisa-with-somali-president-somaliland-top-official/>, last accessed 1 June 2020.

<sup>25</sup> Mutambo, Aggrey, "Kenya-Djibouti row delays choice of new IGAD leader," Daily Nation, 18 March 2020, available online at: <https://www.nation.co.ke/news/Kenya-Djibouti-in-row-over-IGAD-top-seat/1056-5365602-kitk02z/index.html>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>26</sup> Mohamed, Jibril, "Kenya's Misbehavior in Kismayo and Consequences of Disrespecting the AMISOM Mandate," 3 July 2013, available online at: <https://africanarguments.org/2013/07/03/kenyas-misbehavior-in-kismayo-and-consequences-of-disrespecting-the-amisom-mandate-by-jibril-mohamed/>, last accessed on 1 June 2020.

---

Xiriirka saaxiibtinimo ee u dhexeeye Madaxweyne Farmaajo iyo Ra'iisul Wasaare Abiy Axmed ayaa sii fiicnaanaya waxaana sii xoojiya siyaasadaha labada hoggaamiye ee shacab-ku-milnaanta iyo is-baddel doonka ah. Ereteriya waxa ay dib-usoo celisay xiriirkii ay la lahayd Soomaaliya sanadkii 2018, kaddib markii uu madaxweynaha Soomaaliya booqday Asmara. Laga soo bilaabo markaa, Ereteriya waxa ay kamid noqotay waddamo dhawr ah oo tababara ciidamada amniga ee Soomaaliya. Il xog-ogaa ah ayaa sheegtay in dowladda federaalka ee Soomaaliya ay si qarsoodi ah ugu dirtay Ereteriya 600 oo askari si ay tababar gaar ah usoo qaataan. Ujeeddada Farmaajo, Abiy iyo madaxweyneha Ereteriya, Isaias Afwerki, waa in ay hoggaamiyaan is-dhexgalka gobolka Geeska Afrika. Jabbuuti iyo Kiinya ayaa arrintan u qaatay mid aan iyaga u fiicnayan.<sup>27</sup>

Itoobiya iyo Kiinyaba waxay faragalin ku sameeyeen doorashooyin mar-dhexe ka dhacay maamul goboleedyada Koonfur Galbeed iyo Jubbaland. Ciidamada Itoobiya ee jooga Baydhabo ayaa iyaga oo fulinaya codsi uga yimid dowladda dhexe gacan ka gaystay xiridda Mukhtaar Roobow oo ahaa musharrax deegaanka koofur galbeed ah oo aanay madaxda Muqdisho jeclayn. Ciidamada Kiinya ee Kismaayo jooga ayaa qudhoodu caawiyey Madaxweyne Axmed Madoobe si dib loogu soo doorto uuna uga hortago iskuday khatar ahaa oo ay dowladda federaalka samaysay si ay u badasho.<sup>28</sup> Dowladda federaalka ee Soomaaliya waxa ay Kiinya ku eedaysay faragalin qaawan oo ay ku samaysay Jubbaland waxa ayna ku hanjabtay in ay dacwad Kiinya dhan ka ah u gudbin doonto Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay. Eedeeyntaa waxay dowladda Kiinya ku tilmaantay marin-habaabin aan munaasab ahayn.

Markii ay doorashadu ka dhacaysay Galmudug horraantii bisha Diseembar 2019, ciidamo Itoobiyaan ah ayaa magaalo madaxda Galmudug ee Dhuusamareeb lagu soo daadgureeyey. Mucaaradku waxa ay ku andacodeen in ujeeddada ciidamadan Itoobiyaanka ah ee laga soo buuxiyey Dhuusamareeb ay tahay caga-juglayn iyo cabsigalin musharraxiinta mucaaradka.<sup>29</sup> Mucaaradku waxa uu sidaa oo kale Itoobiya ku eedeeyey in ay faragalin dheeri ah ku waddo arrimaha Soomaaliya waxayna Qaramada Midoobay iyo beesha caalamka wayddiisteen in ay arrinta faraha lasoo galaan.<sup>30</sup> Maraykanka waxaa Ballidoogle oo ahaan jirtay saldhig ciidamada difaaca cirka ee Soomaaliya ka jooga ilaa 600 oo askari oo ka mid ah ciidamadiisa sida gaarka ah u tababaran. Waxa uu sidaa oo kale Maraykanku si joogta ah u isticmaalaa diyaaradaha aan duuliyaha lahayn si uu u weeraro Al-shabaab iyo kooxaha kale ee argagixisada ah.

---

27 Mutambo, Aggrey, "Once a pariah, Eritrean president comes up with regional bloc idea," *The East African*, 3 February 2020, available online at: <https://www.theeastafrican.co.ke/news/africa/Eritrean-president-floats-regional-bloc-idea---/4552902-5441802-12c3n3z/index.html>, last accessed on 1 June 2020.

28 Hassan, Abdiqani, "Leader of Somalia's Jubbaland, at odds with Mogadishu, wins new term," Reuters, available online at: <https://www.reuters.com/article/us-somalia-politics/leader-of-somalias-jubbaland-at-odds-with-mogadishu-wins-new-term-idUSKCN1VC15B>, last accessed on 1 June 2020.

29 "Somalia's opposition scolds Ethiopian PM for 'violent involvement' in Somalia," *Goobjoog News*, 30 November 2019, available online at: <https://goobjoog.com/english/somalias-opposition-scolds-ethiopian-pm-for-violent-involvement-in-somalia/>, last accessed on 1 June 2020.

30 Joint Press Statement by Somali political parties on Ethiopian troops and AU Representative in Somalia, available online at: <https://twitter.com/HarunMaruf/status/1263028499515932674/photo/1>, last accessed on 1 June 2020.



*Sannadkii 2019ka, Maraykanku waxa uu Soomaaliya ka fuliyey 60 weerar oo uu ku fuliyey diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, halka uu fuliyey 47 weerar sanadkii 2018*

Sannadkii 2019ka, Maraykanku waxa uu Soomaaliya ka fuliyey 60 weerar oo uu ku fuliyey diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, halka uu fuliyey 47 weerar sanadkii 2018. Boqortooyada Ingiriiska waxaa Baydhaba uga furan xarun tababar halka Midowga Yurub ay tababaraysay ciidamada Soomaaliya muddo 10 sano ku dhaw. Saldhigga ciidan ee ugu weyn ee Turkigu uu ku leeyahay dibadda waxa uu ku yaallaa Soomaaliya halka oo uu ku tababaro ciidamada Soomaaliya.<sup>31</sup>

Hay'adda Xasaradaha Adduunku (ICG) warbixin ay dhawaan soo saartay waxa ay sheegtay “Qulquladaha Khaliijku waxa ay ku faafeen Geeska Afrika gaar ahaan waxa ay sii huriyeen xasillooni darrada Soomaaliya ka jirta.”<sup>32</sup> Xiriirka u dhexeeya Soomaaliya iyo Isutagga Imaaraadka Carabta ayaa sii xumaanayey tan iyo markii dowladda federaalku ay ku eedaysay Abu Dabay in ay maalgaliso xubno mucaaradka ka mid ah. Imaaraadku waxa uu Soomaaliland ka dhisayaa saldhig ciidan iyo dekad ku taalla magaalada Berbera kuwaa oo qayb ka ah heshiis tababarka ciidanka Soomaaliland oo 30 sano ah. Shirkadda Dekedaha ee Dubai World waxa ay sidaa oo kale ka shaqaysay horumarinta dekadada Berbera taas oo kamid ahayd heshiis saddex geesood ah oo ay la gashay Itoobiya iyo Soomaaliland, iyada oo baalmartay go'aan midaysan oo kasoo baxay golaha shacabka ee Soomaaliya kaasoo u diiday shirkaddaasi inay dalka soo gasho.<sup>33</sup>

Taas baddelkeeda, xiriirka ay dowladda dhexe la leedahay Qadar ayaa sii fiicnaanayey markasta oo ay Dooxa malaayiin doolar ku kordhiso kaalmada dhaqaale ee ay galiso arrimaha bani'aadiminimada iyo kuwa horumarinta, taas oo waliba ay kor socoto kaalmada dhaqaale ee sida tooska ah ay Qatar Soomaaliya u siiso. Dowladda federaalka waxa ay isku dayeysey in ay wanaajiso xiriirka iyada iyo Sucuudi Careebiya waxa ayna aqbashay wadhadalka Sucuudigu uu hoggaaminayo ee ku saabsan “Badda Cas.” Ujeeddada wadhadalkani waa in la isu keeno waddamada Carbeed iyo kuwa Afrikaanka ah ee kulaala Badda Cas, in kasta oo ujeeddada dhabta ah ee arrintani aanay wali caddayn.<sup>34</sup>

<sup>31</sup> “Turkey sets up largest overseas army base in Somalia,” Al Jazeera, 1 October 2017, available online at: <https://www.aljazeera.com/news/2017/10/turkey-sets-largest-overseas-army-base-somalia-171001073820818.html>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>32</sup> Somalia and the Gulf Crisis,” International Crisis Group, 5 June 2018, available online at: <https://www.crisisgroup.org/africa/horn-africa/somalia/260-somalia-and-gulf-crisis>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>33</sup> “Somalia bans Dubai ports operator DP World, says contract with Somaliland null,” Reuters, 13 March 2018, available online at: <https://www.reuters.com/article/us-somalia-ports/somalia-bans-dubai-ports-operator-dp-world-says-contract-with-somaliland-null-idUSKCN1GP10E>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>34</sup> Calabrese, John, “The Bab el-Mandeb Strait: Regional and great power rivalries on the shores of the Red Sea,” Middle East Institute, 29 January 2020, available online at: <https://www.mei.edu/publications/bab-el-mandeb-strait-regional-and-great-power-rivalries-shores-red-sea>, last accessed on 1 June 2020.

---

## Dhaqaalaha

Sida uu sheegay Bangiga Adduunku, dhaqaalaha Soomaaliya waa uu koray mar labaad kadib markii uu hoos udhac daran ku yimid xilliggii abaaraha ee sanadihii 2016-17. Warbixinta Dhaqaalaha Soomaaliya waxa ay xustay “dib-u-habayn baaxad leh ayaa dhalisay dib-u-dhis dhaqaale taa oo keentay nooc deganaansho ah iyo kobac dhaqaale oo dhexdhexaad ah.”

Adkaynta nabadda oo ay weheliso cawimaad caalami ah oo xooggan, dhakhliga xawaaladda oo koray iyo koror dhaqaale oo ku yimid ganacsiyada gaarka loo leeyahay ayaa aasaas fiican u ahaa sookabashada dhaqaale ee Soomaaliya. Tacabka Guud ee Dalka (TGD) ee Soomaaliya ayaa koray celcelis ahaan sanadkiiba labo boqolkiiba sanadihii u dhexeeyey 2013 ilaa 2018kii.<sup>35</sup>

Ilaha kheyraadka dalka ayuu kasoo baxay dakhliga ugu badan (70 boqolkiiba), waxaana soo raaca shaqooyinka adeegga. Ilaha kheyraadka oo ay ka mid yihiin xoolaha, beeraha iyo kalluumaysigu waxa ay shaqaaleeyaan kudhawaad 46 boqolkiiba shaqaalaha guud ee dalka.<sup>36/37</sup> Kororkaa dhaqaaluhu waxa uu keenay in dakhliga soo gala dowladda dhexe uu kor ukaco. Sida uu sheegay Bangiga Adduunku, “dakhliga ka soo xerooda canshuuraha iyo ilaha kale ee dalka ayaa koray 29 boqolkiiba.” Isbaddalka lagu sameeyey siyaasadaha canshuuraha iyo hagaajinta maamulkeeda ayaa dowladda dhexe ka caawiyey in ay yarayso ku tiirsanaanta daran ee ay ku tiirsanayd canshuuraha dekedaha iyo ganacsiga kale.<sup>38</sup> Laakiin COVID-19 ayaa si weyn hoos ugu dhigtay dakhliga kasoo baxa dekedda iyo gegida diyaaradaha ee Muqdisho kuwaas oo ah labada ilood ee ugu muhiimsan ee uu dolwadda dhaqaale kasoo geli jiray.<sup>39</sup>

“  
Marka loo eego  
qiyaasahii u  
dambeeyey sida kii  
2aad ee sanadka  
2018 ee  
Sabool-sahanka  
Joogtada ah  
ee Soomaaliya,  
saboolnimadu wali  
way sarraysaa  
waana qiyaastii 69  
boqolkiiba

In kasta oo uu dhaqaaluhu kobcay, haddana Bangiga Adduunku waxa uu caddeeyey in saboolnimadu ay wali sarrayso, kororka tirada bulshada oo aad uga badan koror ka TGD darteed. Marka loo eego qiyaasahii u dambeeyey sida kii 2aad ee sanadka 2018 ee Sabool-sahanka Joogtada ah ee Soomaaliya, saboolnimadu wali way sarraysaa waana qiyaastii 69 boqolkiiba. Saboolnimadu aad ayey ugu baahday dalka oo dhan, gaar ahaan reer guuraaga inkastoo miyiga ay deggan yihiin iyo guurguurkooda badan dartood ay adag tahay in la gaaro.<sup>40</sup>

---

<sup>35</sup> World Bank Somalia Economic Update, August 2019.

<sup>36</sup> “Rebuilding Resilient and Sustainable Agriculture in Somalia,” World Bank and FAO Somalia Country Economic Memorandum, Volume I, 2018, available online at: [Rebuilding Resilient and Sustainable Agriculture in Somalia](https://bit.ly/2Xnz6XW); <https://bit.ly/2Xnz6XW>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>37</sup> “2014 Somalia Labor Force,” International Labour Organization (See Appendix B).

<sup>38</sup> World Bank Somalia Economic Update, August 2019.

<sup>39</sup> According to the UN Envoy to Somalia, the federal government projects an 11 percent decline in nominal GDP for 2020,” Xinhua, 22 May 2020, available online at: [http://www.xinhuanet.com/english/2020-05/22/c\\_139076468.htm](http://www.xinhuanet.com/english/2020-05/22/c_139076468.htm), last accessed on June 2020.

<sup>40</sup> Ibid.

---

Ururrada lacagaha ee caalamiga sida IMF iyo Bangiga Horumarinta Afrika ayaa caawiyey dowladda si ay u meelmeriso siyaasado iyo nidaamyo maaliyadeed, sanadkanna waxa ay u ogolaadeen in daymaha laga cafiyo. Haddii ay tani suuragasho waxa ay Soomaaliya helaysaa deeqo iyo daymo dhaqaale kuwaasoo albaabka u furi doona dhaqaale ilo badan ka yimaada oo deymo iyo deeqo isugu jira. Arrintaasi waxa ay muhiim u tahay maalgalinta waxbarashada, caafimaadka iyo horumarinta xirfadaha kuwaa oo aasaas u ah kobaca dhaqaalaha, yaraynta saboolnimada, shaqo-abuurka iyo dib udhiska xajmiga dhaqaalaha. Dowladda federaalka waxaa kale oo ay qaadday tallaabooyin ay ku suuqgaynayso kaydka shidaalka ee xeebaha Soomaaliya, taasoo iyana kaalmayn doonta soo kabashada dalka.

## Xaaladda banii'aadminimo iyo horumarineed

Xaaladda guud ee banii'aadminimada Soomaaliya waa mid aad u liidata. Labo sano uun kaddib markii abaar gaag-ma-reeba ahi ay barakicisay dad ka badan 1 milyuun, qorshaha Soomaaliya ee ka falcelinta abaaraha ee ay dowladda federaalka iyo hay'adaha samafalku dejiyeen ayaa xusay in “xaaladaha cimilada ee ba'an oo ay weheliso waxyaalaha kale ee saameeya xaaladda banii'aadminimo, dagaalo hubaysan, barakac dabadheeraaday iyo barakacayaashii oo kolba halkii ay degaan laga sii cayriyo ayaa halis weyn oo banii'aadminimo ku ah Soomaaliya.” Warbixinta ayaa sidaa oo kale sheegtay in ku dhowaad Soomaalida barkeed ay halis ugu jiraan cunto yaraan una baahan yihiin kaalmo degdeg ah iyo carruur ah 1.5 milyuun ay hayso nafaqodarro aad u daran.<sup>41</sup>

Qaramada Midoobay waxa ay Soomaaliya u aqoonsatay in ay tahay “dal u baahan gurmud” taa oo macnaheedu yahay in qayb balaaaran oo bulshada ka mid ah ay u arkaan in ay xaalad halis ah ku sugan yihiin. Hadda iyo sanadkii 2011, Soomaaliya waxaa ka dhacay labo abaarood. Hay'adaha Qaramada Midoobay waxa ay ka digeen in dalku halis ugu jiro abaar saddexaad taa oo khatar galin karta dad malyuumaad ah. Fatahaado ayaa burburiyey magaalooyin waaweyn sida Beledweyne iyo Bardaale kuna qasbay tobanaan kun oo dad ahi inay ka cararaan guryahooda.<sup>42</sup> Xajmiga dhaqaalaha oo liita ayaa malyuumaad dad ah oo awalba u nuglaa masiibooyinka ka dhigaya kuwa sii il daran.

“  
*Qaramada Midoobay waxa ay Soomaaliya u aqoonsatay in ay tahay 'dal u baahan gurmud' taa oo macnaheedu tahay in qayb balaaaran oo bulshada ka mid ah ay u arkaan in ay xaalad halis ah ku sugan yihiin*

---

<sup>41</sup> UNICEF Somalia Humanitarian Situation Report, No. 11, 30 November 2019, available online at: [https://www.unicef.org/appeals/files/UNICEF\\_Somalia\\_Humanitarian\\_SitRep\\_Nov\\_2019.pdf](https://www.unicef.org/appeals/files/UNICEF_Somalia_Humanitarian_SitRep_Nov_2019.pdf), last accessed on 1 June 2020.

<sup>42</sup> Shi Yinglun, “Over 270,000 people displaced in Somalia floods: UN,” Xinhua, available online at: [http://www.xinhuanet.com/english/2019-11/01/c\\_138521791.htm](http://www.xinhuanet.com/english/2019-11/01/c_138521791.htm), last accessed on 1 June 2020.





*Bulshada*

*Soomaaliya barkood da'doodu waa ay ka hoosaysaa 15 sano, halka 70 boqolkiiba ay ka hoosayso 30 sano. Wax kayar boqolkiiba laba ayaa ka weyn 65*

Dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada midkoodna ma diyaarin tab iyo qorshe ay arrimahan kaga falcelinayaan, taa oo ku qasabtay inay ku tiirsanadaan wixii ay ka helaan shacabka, qurbajoogta, ururrada aan dowliga ahayn, deeq-bixiyayaasha iyo Qaramada Midoobay.<sup>43</sup>

Sanadkii 2014, tirada dadka Soomaaliya waxaa lagu qiyaasay 12.3 milyuun, waxaana la filayaa in ay gaarto 16 milyuun dhammaadka sanadka 2020. Bulshada Soomaaliya barkood da'doodu waa ay ka hoosaysaa 15 sano, halka 70 boqolkiiba ay ka hoosayso 30 sano. Wax kayar boqolkiiba laba ayaa ka weyn 65. Bulshada badankeedu waxa ay ku nooshahay magaalooyinka (qiyaastii bar) ama tuulooyin (dalool), halka saddex dalool mid ay yihiin reer miyi. Shaqo la'aantu aad ayey u sarraysaa waxayna cagacagaynaysaa 70 boqolkiiba.<sup>44</sup> Ku dhowaad 70 boqolkiiba bulshada Soomaaliyeed waxa ay ku nooshahay meel ka hoosaysa xariiqda saboolnimada ama xariiqda dusheeda (oo waxaa soo gala \$2 ama ka yar maalintiiba). Qaramada Midoobay waxa ay ka digtay in ka badan shan milyuun oo Soomaali ahi in ay halis ugu jiraan cunto la'aan.<sup>45</sup>

Soddan sano oo degnaansho la'aan siyaasadeed iyo nabadgelyo xumo daran ah ayaa Soomaaliya ka dhigay mid kamid ah lixda dal ee qaxootiga ugu badan ee adduunku uu ka yimaado. Hal arrin oo wanaagsan oo kasoo baxday Soomaalida dibadda u yaacday ayaa ah, qurbajoogta oo dalka dib ugu soo celisa wax ka badan \$1 bilyan sanadkiiba, taa oo kafaalaqaadda nololsha malyuumaad Soomaali ah.<sup>46</sup>



*Warbixintu waxa ay gebagebadii soo bandhigaynaa tabo ama istiraa-tiji-yooyin horumarinta karaanka bulshada ah oo dhammaystiran kuwaa oo loogu talagalay inay hagaan Soomaaliya si ay uga baxdo ku tiirsanaanta dhaqaale ee cid kale, isku filnaanshana ay u gaarto*

Cutubyadan soosocda waxa aannu ku lafo-guraynaa sababta ay horumarinta karaanka bulshadu muhiim ugu tahay Soomaaliya. Waxa aan soo bandhigaynaa shan daraasadood oo gundhig ah kuwaas oo si buuxda ugu kuurgalaya caqabadaha iyo fursadaha waxbarasho, caafimaad, shaqo iyo shaqaale, kalluumaysi iyo beeraha/xoolaha ee Soomaaliya hor yaalla. Warbixintu waxa ay gebagebadii soo bandhigaynaa tabo ama istiraa-tiji-yooyin horumarinta karaanka bulshada ah oo dhammaystiran kuwaa oo loogu talagalay inay hagaan Soomaaliya si ay uga baxdo ku tiirsanaanta dhaqaale ee cid kale, isku filnaanshana ay u gaarto; waxaa kale oo aan soo bandhigaynaa jaantus sahlaya isku xiridda dadaalada saamileyda (dowlad, bah waxbarasho, ganacsato, iwm.) si loo gaaro hadafka tabaha lasoo bandhigay.

<sup>43</sup> "Somalia's deadly drought-flood cycle," UN OCHA, 29 November 2019, available online at: <https://unocha.exposure.co/somalias-deadly-drought-flood-cycle.html>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>44</sup> World Bank Group, "Transition Amid Risks with a Special Focus on Intergovernmental Fiscal Relations," Somalia Economic Update, October 2015, available online at: <http://documents.worldbank.org/curated/en/247911468197970788/pdf/100964-WP-P151626-PUBLIC-Box393254B-1st-Edition-Somalia-Economic-Update-Report.pdf>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>45</sup> World Bank Group, "Somali Poverty and Vulnerability Assessment: Findings for Wave 2 of the Somali High Frequency Survey," April 2019, available online at: <http://documents.worldbank.org/curated/en/464241565765065128/pdf/Findings-from-Wave-2-of-the-Somali-High-Frequency-Survey.pdf>, last accessed on 1 June 2020.

<sup>46</sup> "World Bank Makes Progress to Support Remittance Flows to Somalia," World Bank press release, available online at: <https://www.worldbank.org/en/news/press-release/2016/06/10/world-bank-makes-progress-to-support-remittance-flows-to-somalia>, last accessed on 1 June 2020.



---

## Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada Ee Qaran

### Hordhac



*hal kheyraad ayaa ugu mug, macno iyo miisaan weyn uguna muhiimsan galladaha Eebbe Soomaaliya ku mannaystay, galladdaas oo ah midda horseedka u ah horumar kasta oo macna leh iyo kobaca dhaqaale – waana dadka Soomaaliyeed*

Soomaaliya kheyraad aad u badan oo dabiici ah sida dhul beereed, macdan, xoolo, saliid iyo kheyraadka badda ayaa Alle ku manaystay. Sidaas oo ay tahayna, hal kheyraad ayaa ugu mug, macno iyo miisaan weyn uguna muhiimsan galladaha Eebbe Soomaaliya ku mannaystay, galladdaas oo ah midda horseedka u ah horumar kasta oo macna leh iyo kobaca dhaqaale – waana dadka Soomaaliyeed. Dalku waxa uu u baahan yahay dad leh aqoontii iyo kartidii loo baahnaa si uu uga faa'iidaysto dhammaan kheyraadkiisa loona abuurto shaqooyin waxtar leh. Soomaali karti leh oo hanan kara shaqooyin mushaar fiican bixinaya waxa ay caawinaysaa in dhaqaaluhu kobco, dalkuna uu horumaro.

Cutubkani waxa uu soo koobayaa natiijooyin shan ah oo daraasaddan gundhig u ah, kuwaa oo la sameeyey intii u dhexaysay 2018 iyo 2020 qaybna ka ah mashruucan si hagaag loogu fahmo baahida ay Soomaaliya u qabto karaanka bulshada siiba waxbarashada, caafimaadka, shaqada iyo shaqaalaha iyo ilaha wax-soosaarka ee beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga. Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ee Qaran (THKBQ) waxa ay dejinaysaa ama soo bandhigaysaa waddadii loo mari lahaa horumarinta karaanka bulshada Soomaaliyeed.



*Cilmi-baaristani waxa ay soo jeedinaysaa ahmiyado isku xiran oo istaraatiiji ah kuwaa oo haddii la fuliyo si wanaagsan wax uga qaban kara caqabadaha dalka horyaala ee ku saabsan horumarinta karaanka bulshada*

Cilmi-baaristani waxa ay soo jeedinaysaa ahmiyado isku xiran oo istaraatiiji ah kuwaa oo haddii la fuliyo si wanaagsan wax uga qaban kara caqabadaha dalka horyaala ee ku saabsan horumarinta karaanka bulshada. Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ee Qaran waxa ay garwaaqsan tahay muhiimadda ay leedahay in qaybaha bulshada oodhan ay ka dhex muuqdaan hayaankan horumarinta karaanka bulshada, waxa ayna tix-gelisay dheddig ama lab, saboolnimada, dhallinyarada, iyo dadka ku dulman faquuqa iyo takoorka bulshada. Arrimahan intooda badan waxa aannu kaga hadalnay wax ka qabashada istaraatiijiyadeed iyo qorshayaasha fulineed ee aannu kusoo bandhignay shanta cutub. Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ee Qaran waa tallaabadii u horraysay ee diyaarinta qorshe istaraatiiji ah oo qaran kaa oo ay dib u hubin doonaan dadka ay khusayso shantii sanaba mar.

---

Sidoo kale, Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ee Qaran waa daraasad muhiim ah oo qayb ka ah Qorshaha Sagaalad ee Horumarintan Qaran (QHQ-9), kaa oo oranaya:

“Wasaaradda Qorshayntu iyada oo si dhaw ula tashanaysa Wasaaradaha Shaqada iyo Shaqaalaha iyo Waxbarashada ayey 2018 u xilsaartay Machadka Heritage ee Daraasaadka iyo Jaamacadda City ee Muqdisho kuwaa oo ay maalgaliyeen Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (SXS) in ay abuuraan Mashruuca Horumarinta Karaanka Bulshada kaa oo loo dhan yahay, Soomaaliyeysan, waarina kara.”



*Ujeedooyinka waaweyn ee Mashruuca Horumarinta Karaanka Bulshada waa in marka hore la abuurto iskaashi ka dhexeeya saamileyda horumarinta karaanka bulshada ee ka kala socda hay'adaha dowliga ah, kuwa gaarka ah, bulshada rayidka ah, iyo aqoonyahannada tacliinta ka shaqeeya*

Ujeedooyinka waaweyn ee Mashruuca Horumarinta Karaanka Bulshada waa in marka hore la abuurto iskaashi ka dhexeeya saamileyda horumarinta karaanka bulshada ee ka kala socda hay'adaha dowliga ah, kuwa gaarka ah, bulshada rayidka ah, iyo aqoonyahannada tacliinta ka shaqeeya si ay isula jaanqaadaan, una wada hirgeliyaan qorshaha qaran ee QHQ-9.

Mashruuca Horumarinta Karaanka Bulshada iyo iskaashiga cilmi-baariseedka waxaa si gaar ah loogu xilsaaray in ay: sameeyaan cilmi-baaris gundhig ah, dhammaystiran oo dalka oo dhan ku saabsan taa oo il gaar ah ku eegaysa ilaha wax-soosaarka (beeraha, kalluumaysiga iyo xoolaha,) si halkaa looga soo dhirin-dhiriyo tabta horumarinta karaanka bulshada, loona soojeediyo habraac fududaynaya midaynta dadaalka saamileyda horumarinta karaanka bulshada.

Sanadka 2020 ayaa la daabici doonaa cilmi-baarista gundhigga ah iyo tabta qaran si ay u hagaan horumarinta karaanka bulshada Soomaliyeed.



*Tabta horumarinta karaanka bulshadu waxa ay ka hadlaysaa shan waaxood oo muhiim ah: waxbarashada, caafimaadka, shaqada iyo shaqaalaha, kalluumaysiga, beeraha iyo xoolaha*

Tabta Horumarinta Karaanka Bulshada ee Qaran waxay hagaysaa dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada iyaga oo la shaqaynaya ama kaashanaya waaxaha gaarka loo leeyahay, saamileyda bulshada rayidka ah, ururrada caalamiga ah iyo hay'adaha aan dowliga ahayn si loo gaaro ama loo xaqiijiyo ahdaafta iyo ahmiyadaha horumarinta karaanka bulshada.

Tabta horumarinta karaanka bulshadu waxa ay ka hadlaysaa shan waaxood oo muhiim ah: waxbarashada, caafimaadka, shaqada iyo shaqaalaha, kalluumaysiga, beeraha iyo xoolaha. Qayb kasta dhexdeeda waxaa lagu qeexay caqabadaha jira waxaana la soo jeediyey sidii loo wajihi lahaa, loona kala hormarin lahaa. Waxaa kale oo la caddeeyey saamileyda fulin doonta kana qayb qaadan doonta arrintan kuwaa oo hoggaamintoodu ay muhiim tahay.

---

## Tabaha Horumarinta Karaanka Bulshada ee Dhinacyo Badan Taabta



*Daraasaddan waxa aannu ku ogaannay in jowi habboon oo la abuurto ay fure u tahay hellida qorsheha horumarinta karaanka bulshada Soomaaliyeed oo aannu u aragnay in ay isku-xirayaal u yihiin dadaallada kale oo dhan*

Daraasaddan waxa aannu ku ogaannay in jowi habboon oo la abuurto ay fure u tahay hellida qorsheha horumarinta karaanka bulshada Soomaaliyeed oo aannu u aragnay in ay isku-xirayaal u yihiin dadaallada kale oo dhan. Deganaansho siyaasadeed, nabadgelyo, koronto joogta ah oo haqabtiri karta baahida jirta iyo sarreynta sharciga ayaa iyaguna lagama maarmaan u ah horumarinta karaan bulsho oo sii jiri kara.

Waxaa jira laba tabood oo kala duwan: midda hore waa kuwa isku-xirayaalka ah ama dhinacyo kala duwan taabanaya taa oo khusaysa waaxyaha ama ilaha wax-soosaarka, dalka oo dhan. Tabta labaad waa mid waaxyo gaar ah ku saabsan, caqabadaheeda iyo tallaabooyinkeeda istaraatiijiga ahna waxaannu kusoo koobnay shaxda hoose.

### Tabaha isku-xirka ee dhinacyada badan taabanaya waxaa ka mid ah kuwan hoose:

**Abuuridda nidaam qaran oo lagu kala sooco shahaadooyinka.** Qaab dhismeedka waxbarashada iyo tababarrada ee haatan Soomaaliya ka jira ma laha wax nidaam qorshaysan ah, oo qiimeeya shahaadooyinka iyo kartida dadka shahaadooyinka haysta. Dowladda federaalka ee Soomaaliya waa in ay abuurto hay'ad u xilsaaran qiimeynta shahaadooyinka taa oo masuul ka noqon doonta qiimeynta heerarka aqoonta, xirfadaha iyo kartida ee qof kasta.



*Qaybaha wax soosaarku (beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga) iyo laamaha addeeggu waa laf-dhabarta dhaqaalaha isla markaana waxa ay shaqaaleeyaan badanka shaqaalaha Soomaaliyeed*

**Diyaarinta xirfadaha loo baahan yahay.** Aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha Soomaaliyeed waa ay kooban yihiin marka laga hadlayo qaybo badan oo ka mid ah ilaha dhaqaalaha dalka. Arrintani waxa ay u baahan tahay kala hormarinta kobcinta xirfadaha iyada oo laga jawaab celinayo baahiyaha dalka ka jira, jaamacadaha iyo goobaha tababarkuna ay xoogga saarayaan waxbarashada iyo tababar-gacmeedka suuqa shaqada looga baahan yahay. Qaybaha wax soosaarku (beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga) iyo laamaha addeeggu waa laf-dhabarta dhaqaalaha isla markaana waxa ay shaqaaleeyaan badanka shaqaalaha Soomaaliyeed.

---

Xarumaha tababarka xirfadaha gacanta ee jaamacadaha iyo kulliyadaha ayay tahay in la siiyo mudnaan gaar ah si ay u bixiyaan tababar tayo leh una soosaaraan shaqaale leh xirfadihii loo baahnaa, loollanka suuqa shaqadana la jaanqaadi kara. Xirfadaha daboolaya baahiyaha muuqda ee beeraha iyo ganacsiga beeraha la xiriira, ka faa'iidsiga xoolaha iyo kalluumaysiga, tamarta dib loo dhalin karo, caafimaadka, waxbarashada, dalxiiska, isgaarsiinta, dhismaha, socdaalka, bangiyada iyo maaliyaddu waa in ay noqdaan ahmiyad qaran.

“

*Si looga gudbo hannaanka go'aan-qaadashada ee ku tijaabida ah, waa in la helaa dadaal qaran oo midaysan, kaas oo ay ka qayb-qaataan dowladaha iyo inta dowladda ka soo hartay si habaysanna loo uruuriyo xogaha loo baahan yahay, lana dhiso tab fududayn karta hab go'aan qaadasho, oo xog dhab ah ku dhisan*

**Ku dhisidda xog dhab ah horumarinta karaanka bulshada:** Horumar (ama horumar la'aanta) Soomaaliya ka jira waxaa calaamad u ah qaab-shaqeed aan aad looga fiirsan kuwaas oo inta badan la sameeyo iyada oo aan xog buuxda laga hayn baahida dhabta ah ee suuqa shaqada ka jirta. Xog la'aantaasi waxa ay sababtay in ardaydu aanay helin gacan-qabashadii ay u baahnaayeen ee xagga waxabarashada iyo tababarka iyo in shaqaale aan tababar fiican lahayni la haray ilo badan oo dhaqaalaha dalka muhiim u ah. Si looga gudbo hannaanka go'aan-qaadashada ee ku tijaabida ah, waa in la helaa dadaal qaran oo midaysan, kaas oo ay ka qayb-qaataan dowladaha iyo inta dowladda ka soo hartay si habaysanna loo uruuriyo xogaha loo baahan yahay, lana dhiso tab fududayn karta hab go'aan qaadasho, oo xog dhab ah ku dhisan.

**Abbuuridda qorshe qaran ee shaqo-u-tababaridda ardayda:** Si ardada soo qallin jabinaysa ay u hantaan xirfadaha muhiimka ah ee suuqu u baahan yahay, waa in la sameeyo qorshe qaran oo ardada shaqada loogu diyaarinayo kuwaas oo ardayga qalinjabiya lagu qorayo goob shaqo oo dowladeed ama mid gaar ah wakhti ku filan si uu u yeesho xirfadaha lagama maarmaanka ah, oo uu u xagsado shaqadiisa.

**Tayeynta waxbarashada iyo shaqo-helidda ardayda iyada oo luqadda waxbarashada si rasmi ah loo barayo siiba haddii ay Ingiriisi tahay:** In la soo rogo, lana taageero baridda luuqadda Ingiriiska oo ku xiran, qaybna ka ah waxbarashada haddiiba luqadda wax lugu baranayo ay iyada tahay. In waajib looga dhigo dhammaan jaamacadaha in ay sameeyaan xarunta barashada luuqadda Ingiriiska oo ardaygu uu dhiganayo sannadka koowaad ee jaamacadda ilaa ardaygu uu ka gaaro heer qiimeyn caalami ah leh oo uu keeni karo dhibco sare imtixaannada IELTS, TOEFL ama kuwa la midka ah.

---

**Dib-u-habaynta hay'adaha dalka:** Waa in loo habeeyo hay'adaha dowladda federaalka, kuwa dowlad goboleedyada iyo kuwa kale ee dowliga ah si ay u noqdaan kuwo karti iyo hufnaan leh, si habsami leh u jihaysan, lana jaanqaadi kara dastuurka dalka, daboolina kara baahiyaha qaran ee la xiriira horumarinta karaanka bulshada. Haatan waxaa jira dhaqan ah in ra'iisul wasaare kasta oo cusubi uu iyadoo aan laga baaraan degin uu abuurro wasaarado cusub. Dhaqanka waa in laga guuro lana abuurro hay'ado dowladeed oo joogto ah, sharci ku dhisan, u adeegaya muwaadiniinta, mudnaantana siinaya horumar waara.

**Baddel aragti-dhaqameedka horumarka hortaagan:** Qaybo muhiim ah oo bulshada ka mid ah ayaa dhaqan ahaan ka faana shaqooyin badan una arka inay qabashada shaqooyinkaasi sharaf dhac tahay sida sancada hargaha iyo biraha. Fahamka noocaa ah ee ka faanaya shaqooyinka qaarkood waxa uu caqabad ku yahay horumarka dalka. Waxaa lama huraan ah in dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, laamaha waxbarashada iyo ganacsataduba ay si wadajir ah u diyaariyaan olole qaran oo ka hadlaya muhiimadda ay shaqadu leedahay isla markaana xoojinaya fahamka ah in qofka sharaftiisu ay ku jirto dadaalka badan ee daacadda ah ee shaqo, shaqadaasi waxa ay dooniba ha ahaato'e.

**Dhisidda qiyamka aasaasiga ah ee dalka:** Soddon sano oo dowlad la'aan ah ayaa afka ciidda u daray masuuliyaddii iyo xuquuqdi muwaadiniinta. Daraasaddani waxa ay muujisay baahi loo qabo olole wacyigalin ah oo shacabka lagu dareensiinayo waajibaadka saaran, waddaniyad iyo kor uqaadid qiyamka, akhlaaqiyadka iyo iskulkalsoonida bulshada.

**Mideynta saamileyda horumarinta karaanka bulshada:** Waa in la sameeyo madal qaran oo ay ku kulmaan saamileydu si ay u fuliyaan tabta horumarinta karaanka bulshada una xaqiijiyaan sii jiritaankeeda. Madashaasi waa in ay noqotaa mid iskaashi, oo ay xubno ka yihiin wakiillo ka kala socda dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, bulshada rayadka ah, ganacsatada iyo laamaha waxbarashada.

## **Tabaha Horumarinta Karaanka Bulshada ee Waax Kasta**

Tallaabooyinka waxqabad ee annu soo jeedinney ma cayimayaan cid gooni u leh ama si gaar ah looga rabo inay qaataan door hoggaamineed. Sidaa oo kale tirada saamileydu ma ah mid dhammaystiran ee waa uun soo jeedin qaybeed. Laamaha dowladda ee ay tabahani (istiraatijiyooyinkaani) khuseeyaan ayaa si waafaqsan shuruudahooda tixraac (Terms of Reference TORs) u fulin doona.

## Caqabadaha curyaamiyey Waxbarashada: Tabaha (istiraatajiyadaha) iyo xalka daawada u ah

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in la fuliyo ol-ole qaran oo degdeg ah oo shan sano ah si kor loogu qaado aqoonta akhriska, qoridda iyo xisaabta</b></p>	<p>Kudhawaad bar dadka Soomaaliyeed wax ma qoraan waxna ma akhriyaan. Taasi waxa ay Soomaaliya ka dhigaysaa mid ka mid ah waddamada ugu liita caalamka xagga tacliinta.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada, dhaqanka iyo tacliinta sare,</p> <p>Madaxweynaha, xafiiska ra'iisul wasaaraha; madaxweynayaasha dowlad goboleedyada, (sababo wacyi galin iyo culays siyaasadeed awgeed);</p>	<p>Samee gole ay isku kaashadaan dowladaha (federaalka iyo goboleedyada) iyo daneeyayaasha gaarka ah si loo abuuuro Guddiga Qaran ee Akhriska iyo Qoraalka kaas oo u xilsaaran isku duwidda iyo hirgalinta ol-olaha qoraalka iyo akhriska ee dalka.</p>
	<p>Muwaaddin wax qora waxna akhriya waxa uu muhiim u yahay horumarka bulsho, dhaqaale iyo karaan. Dadka in loo sahlo in ay kor u qaadaan awooddooda wax akhrin, qoris iyo xisaabta aasaasiga ah waxa ay u sahlayaa in qofku uu noqdo qof isku filan oo wax soo saar leh.</p>	<p>Wasaaradda maaliyadda (qoondayn miisaaniyadeed awgeed)</p>	<p>In la sameeyo qorshe qaran oo qoraal, akhris iyo xisaab baris ah iyada oo la adeegsanayo iskuulaadka iminka jira, masaajidda ee ay suuragal tahay in la isticmaalo, lana sameeyo xarumo cusub oo farbarasho oo ku yaal tuulooyinka aan iskuulada lahayn.</p>
		<p>Wasaaradda Qorshaynta (raadin taageero caalami ah awgeed)</p>	<p>In loo isticmaalo dhismayaasha iskuulaadka hadda ka jira dhammaan gobolada iyo Muqdisho sidii loogu adeegsan lahaa xarumo farbarasho kaddib saacadaha iskuulka.</p>
		<p>Qaramada Midoobay iyo Hay'adaha Waxbarashada ee Caalamiga ah</p>	<p>In la isticmaalo qaybaha manhajka dalka ee munaasabka u ah far iyo xisaab baridda iyada oo la dejinayo haabraac fulineed.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
		<p>Dalladaha Waxbarashada, dugsiyada gaarka loo leeyahay, dugsiyada Quraanka ee ubadka yaryar wax lagu baro;</p>	<p>Waa in la isku xiro ol-olaha far baridda iyo manhajka dugsiyada hoose-dhexe; waana in loo qoondeeyo miisaaniyad dheeri ah dugsiyada ka qayb-qaata ol-olaha akhriska iyo qoridda, waana in la diyaariyo qaab iskaashi iyo wadashaqayn oo ay isla yeeshaan hay'adaha gaarka loo leeyahay ee maamulaya kormeerayana ol-olaha far baridda ee dugsiyada ka socda.</p>
		<p>Wasaaradda Arrimaha Diinta (Dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>Waa in la sameeyo, lana qaybiyo qalabka waxbaridda ku habboon ee qofka caadiga ahi uu uga qayb-qaadan karo baridda akhriska iyo qorista qoyskiisa iyo saaxiibadiis.</p>
		<p>Laamaha maalgalinta ee dowladda iyo kuwa gaarka ah,</p>	<p>Waa in la hirgeliyo ol-ole ballaaran oo lagu hawl-gelinayo muwaadiniinta wax akhriin kara waxna qori kara iyada oo loo diyaarinayo habraacyo ku habboon si ay u fuliyaan ol-olaha far baridda ee dalka oo dhan.</p>
		<p>Deeq bixiyayaasha iyo tujaarta Soomaalida</p>	<p>Waa in la adeegsado xarumaha muhiimka ah ee bulshada sida dugsiyada Quraanka (halkaa oo ay carruurta ka helaan waxbarashada ugu horaysa noloshooda); waana in la tababaro macallimiinta Quraanka dhiga si ay akhriska iyo qoraalka ugu daraan manhajka dugsiyada Quraanka.</p>
		<p>Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tignooloojiyadda</p>	<p>Waa in la abuurdo iskaashi u dhexeeya hay'adaha teknoolajiyada internet-ka bixiya si looga faa'iideysto teknoolajiyada loona badiyo, tayeeyo, loona horumariyo fursadaha akhriska iyo qoraalka.</p>
		<p>Wasaaradda War Faafinta ee dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada.</p>	<p>Waa in loo helo kombuyuutaro raqiis ah oo aqoon ku jirto kuna shaqeeya awoodda qorraxda ama telefonada shaashadda leh oo qiime ahaan jaban, kuwaas oo lagu diyaarinayo duruus akhris iyo qoraal ah oo ay reer miyigu iyo reer tuulaaadku akhriska, qoraalka iyo xisaabta ka baran karaan.</p>
			<p>Waa in laga hawl-galo ka baahinta idaacadaha, telefishinada iyo goobaha gaarka loo leeyahay ee waxbarashada wacyigalin iyo dhiirrigalin la xiriira ol-olaha akhriska iyo qoridda.</p>



Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in si degdeg ah kor loogu qaado tirada ubadka iskoollada dhigta.</b></p>	<p>Daraasadda qiimaynta waxbarashada dalku waxa ay tustay saddex malyan oo carruurta Soomaaliyeed ah ama 70% ubadka xilligii iskuulka gaaray, in aanay iskuul dhigan. Tani waxa carruur badan ay halis uga dhigtay una nuglaysay in kooxaha xagjirka ahi ay jiitaan.</p>	<p>Wasaaradaha Waxbarashada, (ee dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada),</p>	<p>In la dhaqan geliyo ugu dambayn sanadka 2025 xuquuqda dastuuriga ah ee waxbarashada aasaasiga ah ee da' yar kasta uu xaqa u leeyahay (dugsiyada hoose-dhexe ilaa sare), waxbarashadaas-na waa in laga bixiyo dugsiyada dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo ay dowladdu taageerayo (kormeeraysana)</p>
	<p>Waxaa loo baahan yahay in la dhiso in ka badan laba iyo toban kun oo iskuul si ubadka aan dugsiyada dhigan ay waxbarasho u helaan.</p>	<p>Dalladaha waxbarashada, dugsiyada gaarka ah,</p> <p>Deeq bixiyayaasha caalamiga ah,</p>	<p>Laga bilaabo bisha Janaayo 2021, waa in laga shaqeeysaa in waxbarasho dugsiyada hoose ilaa sare loo helo hal malyan oo arday iyada oo laga faa'iideysanayo dhaqaalaha dowladda, taageerada deeq bixiyayaasha iyo kuwa sida gaarka ah wax u taageera.</p>
		<p>Wasaaradaha Warfaafinta;</p>	<p>Waa in la abuu qorshayaal iskaa wax u qabso ah oo maamul-goboleedyada ah, oo lagu dhisayo iskuullo cusub, kuwa dhisanna lagu dayactirayo iyada oo muhiimad gaar ah la siinayo tuulooyinka yaryar iyo degmooyinka danyarta ah si loo balaariyo waxbarashada dadkana loo gaarsiiyo.</p>
			<p>Sanad kasta waa in lagu daraa 30% tiro cusub oo macallimiin karti iyo aqoon leh, iyada oo lagu dadaalayo in qoridda macalimiinta, maal-gelintooda aqoon-kororsigooda, hawl-gelintooda, dallacsiintooda iyo meesha loo dirayo lagu go'aamiyey si mudnaan ah.</p>
			<p>Waa in si guud oo dalka oo dhan ah loo jaangooyo loona sharciyeeyo tababarka, ruqso siinta iyo shahaado bixinta macallimiinta.</p>
			<p>Waa in loo sameeyo wacyigalin guud oo ku aaddan bulshooyinka la fogaayo iyo kuwa tabarta yar, iyada oo lagu tirtirsiinayo qiimaha iyo faa'iidooyinka tacliinta, si ay ubadka u geeyaan dugsiyada, waana in dadkaasi ay helaan talo siin, dhiirrigalin iyo deeqo waxbarasho.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in xal loo helo u-sinnaan la'aanta waxbarashada iyo waxbarasho la'aanta gaar ahaan dadka la faquuqo, kuwa nugul iyo kuwa danyarta ah.</b></p>	<p>Qaybo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed ma helaan fursado waxbarasho ama waxay helaan wax yar. Kuwaa waxaa ka mid ah dumarka, dadka nugul iyo danyarta (sida barakacayaasha, naafada) iyo reer miyiga.</p> <p>Sinnaan la'aantan waxaa lagu sababayn karaa dhaqanka iyo caadooyinka bulshada, caqabado dhaqan-dhaqaale iyo maqnaanshaha ama jilicsanaanta siyaasad dadka oo dhan ay iska dhex arki karaan. Arrimahaasina waxa ay horumarka Soomaaliya ku yihiin caqabad.</p> <p>Jiritaanka waxbarasho loo siman yahay waxa ay keenaysaa in muwaadinku uu helo fursad uu wax ku barto, shaqo ku helo dhaqaale ahaanna uu u horumaro.</p>	<p>Wasaaradaha Waxbarashada, (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p> <p>Wasaaradda Warfaafinta</p> <p>Dalladaha waxbarashada iyo Dugsiyada gaarka ah</p>	<p>Waa in la dhaqan-geliyo siyaasad iyo dib-u-habayn sharciyeed si gabdhaha iyo wiilashu ay si siman ugu helaan fursadaha waxbarashada.</p>
			<p>Waa in la bilaabo ol-ole waxbarasho oo dalka oo dhan ah, kaas oo ku salaysan natiijo la cabbiri karo oo lagu wacyigalinayo bulshada si gabdhuhu ay u helaan fursado waxbarasho oo u dhigma kuwa wiilashu ay helaan.</p>
			<p>Waa in gabdhaha loo qoondeeyo 30% oo iskool-qorid ah meelaha aanay gabdhuhu helin fursadihii ay mudnaayeen taa oo waliba la raacinayo deeqo waxbarasho si kor loogu qaado waxbarashada aasaasiga ah ee dumarka.</p>
			<p>Waa in laga sameeyo dugsiyo iyo goobo waxbarasho oo cusub meel kasta oo ay degan yihiin barakacayaashu iyada oo miisaaniyad gaar ah la siinayo si loo xaqiijiyo in barakacayaashu ay helaan iskuulo bixiya waxbarasho tayo leh.</p>
			<p>Waa in la diyaariyo oo la gaarsiiyo goobaha barakacayaasha qalab waxbarasho iyo waxbarid si gaar ah loo diyaariyey taas oo ka tarjumaysa manhajka dalka si loo hubiyo in carruurta barakacayaashu ay helaan waxbarasho tayo sare leh.</p>
			<p>Waa in meesha laga saaro caqabadaha sharci iyo maamul ee hortagan iskuulada ee ubadka barakacayaasha sida waraago aqoonsi oo aanay heli karin in la weydiyo ama lagu xiro.</p>
			<p>Si looga hortago faquuq iyo takoor, waa in diiradda la saaro qorridda dugsiyada ee gabdhaha barakacayaasha.</p>
			<p>Waa in la fuliyo siyaasad iyo dib-u-eegid sharci si loo helo waxbarasho dowladdu ay maalgalisay dammaanadna qaadayso oo ay helaan dadka naafada ahi.</p>
			<p>Waa in la sameeyo guddi howleed isku dhaf ah (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada) oo heer wasiir ah si loo diyaariyo loona fuliyo siyaasad qaran oo loogu talagalay dadka naafada ah ayna fulinayso hay'adda naafada dalka.</p>
			<p>Waa in la sameeyo guddi howleed hay'ado kale duwan oo dowlad ah ka kala socda, guddiga oo hadafkoodu yahay dejinta barnaamij wax ka qabta baahiyaha dadka naafanimadoodu aad u daran tahay sida kuwa indhaha ama dhagaha la'. Guddigaasi waa in ay dejiyaan waxbarasho ay qaadan karaan dadka naafada ahi oo baahiyahooda daboolaysa.</p>
<p>Waa in laga sameeyo goobaha waxbarashada ee caadiga ah xarumo iyo barnaamij waxbarasho oo dadka naafada ah loogu talagalay. Waana in la siiyo tababar shaqo dadka waaweyn ee naafada ah.</p>			

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in la is waafajiyo manhajka waxbarashada jaamacadaha iyo baahida xirfadeed ee suuqa iyo ilaha wax soosaarka</b></p>	<p>Nidaamka tacliinta sare ee hadda jira ma aha mid si habboon kor ugu qaadi kara aqoonta lagama maarmaanka u ah ilaha wax soo saarka ee muhiimka u ah dhaqaalaha. Waqtigan, jaamacadaha dalku cilmiga ay dhigayaan kuma salaysna xogta suuqa shaqada ama baahiyaha aqooneed ama xirfadeed ee dalka ka jira.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada),</p>	<p>Waa in la is waafajiyo tacliinta sare iyo baahida xirfadeed ee ilaha wax soosaarka (beeraha, xoolaha iyo kalluumaysiga) iyo qaybaha adeegga si kor loogu qaado fursadaha shaqo helid ee ardada qalin jabinaysa.</p>
	<p>Tacliinta sare waa in ay door muhiim ah ka ciyaarto kobcinta dhaqaalaha dalka iyada oo soo saaraysa shaqaale tayo leh oo si buuxda u tababaran. Si arrintaa looga miro-dhaliyo waa in la is-waafajiyo diyaarinta barnaamijta waxbarasho iyo xogta baahida suuqa shaqada.</p>	<p>Wasaaraddaha shaqada iyo arrimaha bulshada,</p>	<p>Waa in manhajka tacliinta sare lagu daraa koorsooyin ama barnaamij ku saabsan ilaha dekhliga (xoolaha, kalluumaysiga iyo beeraha) iyo ganacsiga, qorshaynta qanacsiga iyo fanka maamulka si kor loogu qaado fursadaha shaqo iyo shaqo-abuurka.</p>
		<p>Wasaaraddaha ganacsiga iyo warshadaha;</p>	<p>Waa in ganacsatada iyo hoggaanka waxbarashadu ay ka tashadaan sida loo soo saarayo jaamiciyiin xirfad iyo karaan shaqo leh.</p>
		<p>Ururada waxbarashada,</p>	<p>Waa in la isku xiraa deeqaha waxbarasho iyo takhasusyada laf-dhabarka u ah wax soosaarka sida beeraha iyo kalluumaysiga, iyada oo loo damaanad qaadayo in ardaygu uu shaqo heli doono haddii uu dhammeeyo barnaamijkiisa waxbarasho.</p>
		<p>Rugaha ganacsiga, iyo Shiirkadaha gaarka loo leeyahay ee shoqooyinka bixiya;</p>	<p>Waa in kumanaanka deeqood ee waxbarasho ee Soomaaliya ay siiyaan waddamada saaxiibka la ah loo isticmaalo si ay u buuxiyaan baahida cilmiyeed iyo xirfadeedka oo muhiimka ah ee ay daraasaddani soo bandhigtay (laamaha wax soo saarka iyo kuwa adeegga);</p>
			<p>Waa in la sameeyo guddi ay ka mid yihiin wasiirrada waxbarashada, shaqada &amp; shaqaalaha, ganacsiga oo heer dowladda dhexe &amp; dowlad goboleedyada ah si ay uga taliyaan qorshaynta tacliinta sare, taas oo ku dhisan xog iyo baahiyaha suuqa shaqada.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in culuumta farsamada gacanta loo aqoonsado muhiimad qaran, si kor loogu qaado shaqo-abuurka iyo wax-soo-saarka;</b></p>	<p>Nidaamka tababarka farsamada gacanta ee Soomaaliya ka jira waa mid isku dhex-yaacsan oo aan ku tallaalayn suuqa shaqada. Arday yar ayaa dhigata waxbarashada farsamooyinka gacanta, macallimiin tayo leh ma jiraan, maamulka iyo maarayntuna waa ay liidataa. Arrimahaa oo is biirsaday ayaa dhaliyey in bulshadu aanay aad u qiimeynin farsamada gacanta.</p>	<p>Wasaaradaha Waxbarashada, (dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>Waa in la is-waafajiyaa manhajka tababarka farsamada gacanta iyo xirfadaha iyo midka waxbarashada guud iyada oo koorsooyinka lagu salaynayo baahida suuqa ka jirta (xirfadaha looga baahan yahay goobaha shaqada); isla markaana ku jaan-go'an ilaha wax soosaarka ee muhiimka ah iyo istiraatiijiyadda kobaca dhaqaalaha;</p>
	<p>Farsamada gacanta oo la tayeeyo waxa ay door muuqda ka qaadan kartaa la dagaalanka saboolnimada iyo kobcinta dhaqaalaha. Haddiise aanay farsamada gacantu la jaanqaadi karin baahida suuqa, ardada kasoo baxda niyad jab iyo dareen ah inay ku khasaareen ayaa galaya.</p>	<p>Wasaaradaha Shaqada iyo arrimaha bulshada;</p>	<p>Waa in la dhiirigaliyaa isku xirnaanta iyo wada shaqaynta ganacsatada iyo dadka ka shaqeeya waxbarashada si koorsooyinka farsamada gacanta loo wanaajiyey;</p>
	<p>Dadaallada lagu tayeynayo laguna tabaraynayo farsamada gacantu waa in ay jawaab u noqdaan baahiyaha haatan &amp; kuwa mustaqbal ee suuqa shaqada ee dalka.</p>	<p>Dugsiyada farsamada ee gaarka loo leeyahay;</p>	<p>Si ubadku ay xilli hore u ogaadaan qiimaha ay leedahay waxbarashada farsamada gacanta, waa in manhajka aasaasiga ah iyo midka dugsiga sare lagu daraa duruus bilow ah oo la xiriirta barashada farsamada gacanta;</p>
		<p>Deeq-bixiyayaalka</p>	<p>Waa in la aasaaso guddi qaran oo ay xubno ka yihiin dowladda dhexe, dowlad goboleedyada, laamaha waxbarashada iyo ganacsatada si loo qiimeeyo, loo dardargaliyo, loona dayactiro dugsiyada iyo xarumaha farsamada gacanta ee haatan jira, loona abuur qorshe qaran oo istiraatiijiyada ah, kaas oo samayn doona macaahid farsamo oo cusub kuwaa oo la waafajin doono dhaqaalaha iyo wax soosaarka gobolada iyo degmooyinka iyada oo lagu salaynayo fursadaha dhaqaale-abuur ee deegaan walba uu ku horreeyo;</p>
			<p>Waa in ilaha wax soo saarka looga faa'iideysto in ay dhiiri-galiyaan tababarka farsamada gacanta ayna u bixiyaan tababarro ku habboon;</p>
			<p>Waa in la bixiyo deeqo waxbarsho si loo soo jiito loona dhiirigaliyo ardayda si ay u qaataan tababarro farsamo gacmeed, kuwaas oo ah kuwa suuqa shaqada looga baahan yahay;</p>
			<p>Waa in la qabto carwooyin iyo ol-olayaal dhiirigalin ah oo muujinaya faa'iidada culuumta farsamada gacanta iyo sida ay qofka uga caawin karaan inuu shaqo ka helo ilaha dhaqaale abuurka qaran (beero, xoolo iyo kalluumaysi);</p>
			<p>Waa in la siiyo dadka ku shaqeeya farsamada gacanta – ha u shaqeeyeen dowlad ama ganacsi gaar ahe – mushaar soo jiidasho leh si kor loogu qaado sumcadda farsamada gacanta.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in la hirgeliyo nidaam waxbarsho oo ku salaysan mabaa'diida dun-wanaagga, dadnimo iyo dal-jacylka</b></p>	<p>Nidaamka waxbarasho ee haatan dalka ka jira uma samaysna inuu soo saaro ama dhiirrigaliyo arday leh waddaniyad, qab iyo sarrayn, isku kalsooni, mas'uuliyad iyo dareen qaran oo sarreeya.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p> <p>Ururrada bulshada rayidka ah;</p>	<p>Waa in duruus-qarameedka (waddaniyadda, islaamka, hoggaaminta,) la dhex-geliyaa manhaj-ka waxbarashada (duruusta dowladnimada, taariikhda, iyo dhaqanka iyada oo yoolka la saarayo midnimada, waddaniyadda iyo is-jacaylka ama Soomaalinimada);</p>
	<p>Ku barbaarinta ardayda dareen qaran waxa ay dhistaa aragtida iyo is-aaminaadda ardayga, waddaniyadda, is-xilqaanka iyo tixgalinta xuquuqda muwaadinka oo lagama maarmaan u ah nabadgelyada iyo horumarka bulshada.</p>	<p>Dalladaha waxbarashada iyo saamileyda kale ee waxbarashada gaarka ah.</p> <p>Wasaaradaha warfaafinta</p> <p>Xafiisyada madaxda qaranka iyo kuwa gobolada</p>	<p>Waa in la hirgeliyo hawl-gallo iskuulada ka dhex socda oo haddana waxbarashada fasallada ka dhex-baxsan (sida tartannada ciyaaraha, iskaa wax-uqabsada, suugaanta, doodaha) kuwaas oo xoojinaya dowlad-wanaagga, sarraynta sharciga, &amp; waddaniyadda oo dhammaantood shardi looga dhigayo in la qalin-jabiyo;</p> <p>Waa in la qaado ol-ole qaran oo dadka lagu wacyigalinayo ahmiyadda ay leedahay waxbarashada tayaynaysa dunta iyo dadnimada ardayga; kuwaas oo lagu baahinayo warbaahinta oo dhan.</p>
			<p>Waa in la hirgeliyo tababar macallimiinta dhiga waxbarashada arrimaha bulshada si ay ardayda u fahamsiin karaan maskaxdoodana u geliyaan ahmiyadda iyo baahida in ardayga laga dhigo mid hoos u qodan oo ku barbaara dun-wanaag, dal-jacayl iyo waddaniyad.</p>
			<p>Waa in waxbarashada lagu dhisayo maskaxda iyo dadnimada ardayda ay noqoto howl-wadaag, laga qayb-galinayo waaliddiinta iyo dowlad goboleedyada.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Waa in la sameeyo Nidaam Qaran ee Qiimeynta Shahaadooyinka (NQQS) kaa oo si habaysan u qiimeeya aqoonta iyo xirfadaha iyo qof walba heerka uu ka gaarey.</b></p>	<p>Adduunka oo dhan, waxaa loo arkaa qaab-dhismeedka shahaadooyinka inuu yahay hage dhammaystiran oo loo isticmaalo hagidda horumiranta karaanka bulshada.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada (dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>Waa in la sameeyo Golaha Tasdiiqinta Shahaadooyinka Dalka (GTSD) kaas oo ka kooban goleha waxbarashada aasaasiga ah ee dalka, guddiga tacliinta sare, guddiga farsamada gacanta iyo guddiga imtixaanaadka dalka. GTSD ayaa mas'uul ka noqon doona dib u eegidda ama qiimaynta heerarka aqoon iyo xirfad ee haatan jira iyo diyaarinta halbeegyo cusub.</p>
	<p>Hadda, nidaamka waxbarashada dalku ma laha Hannaanka Aqoonsiga (ama qiimaynta) Shahaadooyinka si loo qiimeeyo tayada goobaha waxbarashada iyo barnaamijta ay bixiyaan.</p>	<p>Dalladaha waxbarashada;</p> <p>Ururka Jaamacadaha Soomaaliyeed;</p> <p>Shabakadda Cilmibaarista iyo Waxbarashada Soomaaliya</p>	<p>Waa in laga qaybgaliyaa saamileyda marka la diyaarinayo lana hirgelinayo Hannaanka Aqoonsiga (ama qiimaynta) Shahaadooyinka, sida midaynta heerarka &amp; shuruudaha shahaadooyinka; samaynta qiimeyn ku salaysan shuruudo cad, nidaam guud oo koorsooyinka &amp; qiimaha aqooneed sheegaya; hab lagu sharaxayo shahaadooyinka &amp; hab guud oo kala astaynaya koorsooyinka &amp; shaqada ku xiran.</p>
	<p>In kasta oo ay waddamada dariska ahi raacaan Jaantuska Qiimeynta Shahaadooyinka Tacliinta Sare ee Bariga Afrika, Soomaaliya uma qiimeeyo shahaadooyinka si habaysan oo tixraac leh.</p>	<p>Hay'adaha waxbarasha sare ee gaarka loo leeyahay.</p>	<p>Xarunta dhexe ee Hannaanka Aqoonsiga (ama qiimaynta) shahaadooyinka ayaa mas'uul ka ah dib u eegidda shuruudaha iyo nidaamka ardayda ay ku helayaan aqbalaadda jaamacadaha iyo hannaanka lagu kala xulayo dhammaan qaybaha waxbarashada.</p>
	<p>Samaynta Xarun dhexe ee Hannaanka Aqoonsiga (ama qiimaynta) Shahaadooyinka waxa ay tayaynaysaa waxbarashada iyo tababarada iyada oo keenaysa shuruudo ay tahay in qof kasta uu buuxiyo iyo aqoon ay tahay in qof kasta oo shahaado wata in uu yaqaanno;</p>		<p>Dhammaan xarumaha bixiya tacliinta sare iyo tababarrada waa inay iska diiwaangaliyaan Xarunta dhexe ee Hannaanka Aqoonsiga (ama qiimaynta) Shahaadooyinka; waana in aan loo ogolaan machadyada ama jaamacadaha in ay shaqeeyaan iyaga oo aan shati ogolaansho haysan.</p>
			<p>Ujeeddada ama bartilmaameedka 1-aad ee aasaasiga ah ee Hannaanka Aqoonsiga (ama qiimaynta) Shahaadooyinka waa daahfurnaan, is-barbar-dhig iyo aqoonsiga shahaadooyinka dalka oo dhan.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Midee dadaalada saamileyda waxbarashada si loo helo isku-xirnaan xagga maamulka waxbarashada ah.</b></p>	<p>Qaybaha waxbarashada waxaa naafeeyey doorka dowladda dhexe iyo midka dowlad goboleedka oo aan sharci ahaan kala caddayn, kala qeybsanaan maamul, haykal guud la'aan, isku-duwid liidata iyo is waafajin la'aan xagga saamileyda ah. Mar haddaan dadaalku midaysnayn, waxaa gaabis noqda saamaynta;</p> <p>Wada shaqaynta dowladda dhexe, dowladaha gobolada iyo saamileyda kale ayaa sahla in la gaaro tiigsiyada jira ayna noqdaan kuwo wax ku ool ah;</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada, (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p> <p>Ururka jaamacadaha Soomaaliyeed;</p> <p>Shabakadda cilmibaarista iyo Waxbarashada Soomaaliya;</p> <p>Hay'adaha waxbarashada sare ee gaarka loo leeyahay</p>	<p>Waa in la sameeyo hay'ad ama dallad qaran oo ka shaqaysa horumarinta karaanka bulshada, diyaarisana warbixin qaybo kala duwan leh (sida mid ku socota dowladda federaalka, ganacsatada, jaamacadaha iwm) oo lala wadaago wasaaradaha ay khusayso, bulshada rayidka ah, waaxda gaarka loo leeyahay iyo deeq bixiyayaasha.</p> <p>In la dhammaystiro dastuurka isla markaana la jaangooyo doorka ay leeyihiin iyo mas'uuliyadka saaran heerarka dowladda oo idil.</p> <p>Inta laga qabyo-tirayo dastuurka, si degdeg ah oo ku meel-gaar ah waa in heshiis uu dhexmaro wasaaradaha waxbarashada ee dowladda dhexe, kuwa dowlad goboleedyada iyo hay'adaha tacliinta gaarka ah maamula.</p>



Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>Samee nidaam sharciyeysan iyo tabo lagu uruurinayo laguna wadaagayo xogta waxbarashada.</b></p>	<p>Waxaa jirta awood darro, karti yaraan iyo xog la'aan baahsan marka ay timaaddo xog uruurinta waxbarashada. Saamileydii aannu xog-warraysannay inta badan ma aqoon sida xog loo uruuriyo, xogaha ay na siiyeenna waxay ahaayeen kuwo aan dhammays-tirnayn, guud ahaanna waxa ay u muuqdeen in aanay fahamsanayn qiimaha xogtu u leedahay go'amada iyo qorshaynta.</p> <p>Helidda iyo isticmaalka xog sugan oo wakhtigii ku habboonaa la helo ayaa muhiim u ah go'aan qaadashada. Haddii aanay jirin xog la isku halayn karo, waa ay adag tahay in la qorsheeyo lana maamulo ilaha dhaqaalaha iyo horumarinta waxbarashada.</p>	<p>Wasaaradaha Waxbarashada, (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p> <p>Wasaaradda qorshaynta, Maalgalinta iyo hurmarinta dhaqaalaha;</p> <p>Ururada bulshada rayidka ah Shabakadda cilmibaarista iyo waxbarashada Soomaaliya;</p> <p>Hay'adaha cilmibaarista ee kale.</p>	<p>Laamaha dowladda oo dhan waa in lugu xiraa Waaxda Istaatistikada ee Wasaaradda Qorshaynta si loo helo talo-bixin xog ku dhisan oo waxtar u leh uruurinta xogta waxbarashada.</p> <p>Deji tilmaamayaasha horumarka dalka ee waxbarashada (tusaale ahaan: is-qorridda, tayada, saamiga macallinka iyo ardayga) si kor loogu qaado heerarka waxbarashada ee caadiga ah, loogu fududeeyo saamileyda muhiimka ah falanqeynta xogta waxbarashada, loona daabaco macluumaad sanadle ah oo wax u tara go'aan ka gaaridda arrimaha waxbarashada la xiriira.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Tallaabooyinka
<p><b>U qoondee dhaqaale ku filan qaybaha mudnaanta gaarka ah in ay leeyihiin la sheegay ee Hannaanka Horumarka Karaanka Bulshada.</b></p>	<p>Dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyadu waxa ay waxbarashada u qoondeeyeen miisaaniyad ka yar midda ay waddamada soo koraya iyo kuwa gobolkan ay u qoondeeyaan tacliinta.</p>	<p>Wasaaradaha maaliyadda (dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>Laga bilaabo 2021, kordhi miisaaniyadda waxbarashada si loo galiyo 25% miisaaniyadda dowladda dhexe iyo midda dowlad goboleedyada sanadka 2025.</p>
	<p>Hellida iyo tayada waxbarashadu uma eka in ay soo fiicnaanayaan haddii aan miisaaniyad ku filan la gelin.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada,</p>	<p>Ka warbixi qoondoynta gaarka ah iyo midda goonida ah ee maaliyadda guud ee waxbarashada aasaasiga ah, midda dugsiga sare iyo midda heer kulliyadeed ama jaamacadeed si loo dhiirigaliyo daah-furnaan loona arko waxqabadka maaliyadeed ee kala duwan ee qayb walba.</p>
	<p>Maalgelinta horumarinta waxbarashadu waxa ay tiir-dhexaad u tahay ballan-galka horumarinta karaanka bulshada. Waxa ay sidaa oo kale lagama maarmaan u tahay hellidda waxbarasho tayo leh.</p>	<p>Wasaaradaha qorshaynta,</p>	<p>Samee xarun deeq bixineed oo la isugu keeno deeqaha waxbarashada ee laga helo laamaha gaarka loo leeyahay, qurbajoogta, tujaarta iyo dadka ama hay'adaha kale ee wax bixiya si deeqdaa loogu xiro daah-furnaan iyo natiijooyin la taaban karo.</p>
		<p>Dalladaha waxbarashada;</p>	<p>Samee guddi kormeer oo madax-bannaan kaas oo waajibkiisu yahay xaqiijinta daah-furnaanta, hubin iyo kormeer si loo ogaado in miisaaniyadda waxbarashada ee dowliga ah iyo midda gaarka ahba loo isticmaalo sidii ugu mudnayd iyo in si guud ah oo muuqata looga hadlo wixii walaac ah ee kasoo baxa maamul xumada maaliyadda waxbarashada</p>
		<p>Hay'adaha gaarka ah ee waxbarashada;</p>	
		<p>Saamileyda caalamiga ah.</p>	



Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Wagtiga	Saamileyda
	<p>8. Waa in la siiyo shaqaalaha caafimaadka tababar ku wajahan nadaafadda biyaha, goobaha caafimaadka iyo fayadhowrka guud iyo weliba la taacalidda xaaladaha adag iyo kuwa degdegga ah, ka hortagga iyo wax kaqabadka cudurrada aan faafin sida dhimirka, daryeelka indhaha, ilkaha iyo caafimaadka guud ee afka.</p> <p>9. Waa in la dhiso awoodda wasaaradda caafimaadka si ay u dhiso una fuluso barnaamij joogteysan oo aqoon-kororsi ah oo la xiriiira caafimaadka hooyada, dhallaanka iyo nafaqaynta;</p> <p>10. Waa in la abuurto jewi u jajaban una diyaar ah kororsiga aqooneed; waana in la aasaaso Machadka Kobcinta Aqoonta iyo Xirfadda Caafimaadka ee dowladda Federaalka iyo machadyo la nooc ah oo heer dowlad goboleed ah</p> <p>11. Waa in ay shaqo qaran maraan shaqaalaha caafimaadka ee dawladdu ay waxbarashada qayb ahaan ama wadar ahaan ay ka bixisay taa oo shardi kaga dhigaysa in ay ka shaqeeyaan rugaha caafimaadka ee degmooyinka iyo gobollada muddo ugu yaraan u dhiganta intii ay waxbarashada ku jireen;</p> <p>12. Dhammaan maamul goboleedyada iyo Banaadir waa in laga sameeyo ugu yaraan hal machad / jaamacad caafimaad oo tayo leh;</p> <p>13. Waa in wadashaqayn dhow lala yeesho khuburada caafimaadka ee qurbajoogta ah si ay u xoojiyaan adeegga caafimaadka dalka iyo barashada caafimaadka.</p> <p>14. Waa in waqti iyo miisaaniyad loo qoondeeyo si bulshada loo fahamsiiyo ahmiyadda ay dalka iyo dadka u leedahay in la maal-geliyo xirfadleyda caafimaadka</p>	<p>In la hirgeliyo qorshe tababar shaqada dhexdeeda ah oo lugu tababarayo shaqaalaha caafimaadka.</p> <p>In la sameeyo barnaamijyo aqoon kororsi oo loo hirgeliyo si hufan dhammaan dowlad goboleedyada iyo degaannadooda.</p> <p>In la hirgeliyo xarumo lugu tayeeynayo xirfadaha iyo karaanka shaqaalaha heer Federaal iyo xarumo laga yagleelo dowlad goboleedyada.</p> <p>Waa in meelo badan laga helaa xirfadlayaal caafimaad, gaar ahaan markii gargaar caafimaad oo degdeg ah loo baahan yahay iyo goobaha iyo deegaannada dadka nugul.</p> <p>Waa in la hirgeliyo jaamacad / machad dowladdu leedahay gobol kasta</p> <p>200 oo khabiir caafimaad ayaa xiriir wada-shaqayn lala yeelanayaa</p>	<p>Umul-raaca iyo isku-dhimashada dhallaanka iyo hooyada ayaa yaraanaya;</p> <p>In wax laga qabto shaqaale yarida jirta.</p> <p>In shaqaalaha caafimaadku ay heli karaan tababar shaqo oo ay ka helaan goobahooda shaqo iyo goboladooda.</p> <p>In kor loo qaado tirada xirfadlayaal yaraanta</p> <p>In sare loo qaado shaqaalaha caafimaadka ee shahaadooyinka haysta.</p> <p>In adeegyada caafimaad la gaarsiyo dadka u baahan</p> <p>Waxaa la daadejijey tababarka caafimaadka, tayada ayaa kor loo qaaday</p> <p>In aqoonta iyo xirfadaha caafimaad ay gaaraan shaqaalaha goobahooda iyo hay'adaha caafimaadba.</p>	<p>Degdeg/waqtiga dhow</p> <p>Wagtiga dhexe</p> <p>Wagtiga dhexe</p> <p>Mustaqbalka dheer</p> <p>Degdeg/waqtiga dhow</p>	<p>Wasaaradaha caafimaadka, qorshaynta, waxbarashada, maaliyadda, deeq-bixiyayaalka;</p> <p>Wasaaradaha caafimaadka, maaliyadda iyo deeq-bixiyayaalka;</p> <p>Wasaaradda Caafimaadka, Maaliyadda iyo xarumaha tababarrada.</p> <p>Wasaaradaha caafimaadka, maaliyadda iyo deeq-bixiyayaalka;</p>

## Hiigi 2

Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Waqtiga	Saamileyda
Waa in la hirgeliyo siyaasad caafimaad oo ku salaysan aqoon iyo baahi	Tallaabada 2.1: Waa in xirfadaha iyo aqoonta caafimaad ee jaamacadaha lagu baranayo lagu saleeyo baahiyaha xirfadlayaasha caafimaad ee dalka ka jira;	<p>Waa in ay isku jaan go'an yihiin ardayda jaamacadaha caafimaadka galaya (ama dhakhaatiirta la tababarayo) iyo baahiyaha xirfad caafimaad ee dalka ka jirta;</p> <p>In si joogto ah loola socdo dib uhabayna lugu sameeyo manhajka ardayda goobaha caafimaadka si loo soo saaro shaqaale leh xirfad iyo aqoontii loo baahnaa leh.</p> <p>In la sameeyo qorshe isku-xiran, hab loo qiimeeyana leh oo ku wajahan tababarrada shaqada dhexdeeda ah.</p>	Waxaa kordhaya xirfadlayaal caafimaad oo takhasusyo kala duwan leh	Degdeg/ waqtiga dhow	Wasaaradda Caafimaadka, Maaliyadda iyo xarumaha tababarrada.
	Tallaabada 2.2: Markii ay soo qalin-jabiyaan xirfadlayaasha caafimaad (dhakhaatiir iyo kaaliyayaal) waa in ay goobaha caafimaadka ka helaan xirfad iyo aqoon kororsi teknoolojiyadda ku salaysan iyo waxbarashada shaqada lagu garab wado;	<p>In la tayeeyo tababarrada la siiyo tababarayaasha goobaha caafimaadka ka hawl gala.</p> <p>In la diyaariyo, tiknoolajiyadda, manhajka tababarrada, qalabka tababarrada iyo habraaca caafimaad ee xirfadlayaasha la tababarayo.</p> <p>In la bilaabo waxbarashada caafimaadka oo lugu qaadan karo teknoolojiyadda casriga ah.</p> <p>In la sameeyo hay'ad qaran oo hubisa tasdiiqisana shahoodooyinka taa oo leh awood loo igmaday.</p> <p>In la isticmaalo tignoolajiyadda casriga ah ee waxbarashada lugu gudbiyo si kor loogu qaado aqoonta iyo tababarka shaqaalaha caafimaadka iyadoo waxbarasho iyo tababarro tayo leh la gaarsiinayo goobaha caafimaad oo magaalooyinka ka durugsan safarkooduna uu adag yahay.</p>			
	Tallaabada 2.3: Tabaraynta tababarrada hay'adaha iyadoo kor loo qaadayo tayada xarumaha tababarka bahda caafimaadka	<p>In la hagaajiyo agabka iyo goobaha tababarka ee ay shaqaalaha caafimaadku isticmaalaan lana maalgaliyo machadyada waxbarashada.</p> <p>In la bixiyo kaalmo farsamo taa oo yoolka saaraysa tababarka, manhaj tayeysan oo waxbarasho kaa oo dalka oo dhan si isku heer ah uga jira iyadoo isla markaasna la wanaajinayo waxbarashada caafimaadka luguna larayo tababarro, tilmaamayaal iyo qalab ama agab waxbarasho.</p> <p>In kor loo qaado tayada goobaha iyo agabka Isbitaallada ee lugu tababarto</p> <p>In la diyaariyo lana casriyeeyo tababarrada caafimaad ee bahida loo qabo iyo goobaha iyo agabka tababarradu u baahan yihiin intaba</p>			

### Hiigsi 3

Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Waqtiga	Saamileyda
Waa in a hirgeliyo siyaasad caafimaad oo ku salaysan cilmi iyo baahi	<p>Tallaabada 3.1: Waa in la sameeyo hannaan dalka oo idil ah oo lagu aqoonsanayo xirfadaha iyo darajooyinka, lagu qaadanayo shatiyada xirfadaha, lagu helayo tasdiiga shahaadooyinka</p> <p>Tallaabada 3.2: In xirfadlayaasha caafimaad loo kala qeexo aagagga ay ka hawl galayaan</p> <p>Tallaabada 3.3: In la hagaajiyo xeerarka shaqaalaha ee mushaarka, hab-raaca shaqada iyo xeerarka kale ee saamayn kara shaqaalaha</p> <p>Tallaabada 3.4: In la dejiyo shruucda shaqada iyo shaqaalaha ee saamaynta ku leh bahda caafimaadka</p>	<p>Hirgelinta hay'ad guud oo caafimaad oo xirfadleyda caafimaad oo dalka oo dhan matasha;</p> <p>Hirgelinta hannaan xirfadlayda caafimaad u qeexaysa shaqadooda;</p> <p>Dejinta hannaan lagu socodsiiyo hawlaha caafimaadka ayna ku wada shaqeeyaan bahweynta ku shaqada leh caafimaadka (sida dawladdaha, jaamacadaha; hay'ado/ururada caafimaadka);</p> <p>Dejinta shruucda shaqada iyo shaqaalaha ee saamaynta ku leh bahda caafimaadka;</p>	<p>Waxaa la dejiyey lana hirgeliyey xeerarka shaqaalaha, masuuliyadahooda, heerka shaqo oo laga doonayo iyo dhisidda shaqaale caafimaad oo tayo leh.</p>	Xilliga dhow	Wasaaradaha caafimaadka, ururada xirfadlayaasha caafimaadka, & deeqbixiyayaasha

### Hiigsi 4

Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Waqtiga	Saamileyda
Tayee maamulka caafimaadka iyo hannaanka bahda caafimaadka loogu fududaynayo in ay ku sii jiraan ka shaqaynta caafimaadka iyo ka hawl galka goobaha looga baahan yahay	<p>Waa in la hergeliyo hannaan xirfadleyda caafimaad sida dhakhaatiirta ku dhiirri gelinaya (sida gunnooyin iyo mushaar soo jiidasho leh) si ay uga shaqeeyaan degmooyinka iyo magaalooyinka leexsan una baahan daryeel iyo khubaro caafimaad;</p> <p>Waa in loo diyaariyo gunnooyin iyo dekhli xirfadleyda caafimaadka u jihaynaya tuulooyinka iyo degaannada durugsan;</p> <p>Waa in la hirgeliyo hannaan dalka oo dhan ah oo daah-furan oo ku saabsan sharciyada iyo xeerarka shaqaalaynta xirfadleyda caafimaadka;</p> <p>Waa in la hirgeliyo in shaqaalaynta caafimaadka ee dumarka ah ay xaqooda helaan iyo in goobaha caafimaadku ay yihiin kuwo soo dhaweynaya xirfadleyda dumarka ahna ku haboon;</p>	<p>Mushaar soo jiidasho leh in lagu bixiyo xirfadleyda ka shaqaynaysa tuulooyinka iyo magaalooyinka fog-fog;</p> <p>Diyaarin gunnooyin soo jiidasho leh, si xirfadlaydu dalka oo dhan u gaaraan oo aan magaalooyinka waaweyn lagu soo ururin;</p> <p>In la hirgeliyo hannaan shaqaalaysiin oo caddaalad ku salaysan;</p> <p>In haweenku ka helaan qoondo sax ah shaqada caafimaadka;</p>	<p>Waxaa xaqooda la siiyey xirfadleyda caafimaadka ka shaqaysa,</p> <p>Waxaa la hirgeliyey hanaan shaqada caafimaadka caddaalad lagu helo iyo xaq-soor;</p>	Waqtiga dhexe	Wasaaradaha caafimaadka, maaliyadda iyo deeq-bixiyayaasha,

## Hiigsi 5

Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Wagtiga	Saamileyda
Waa in la hagaajiyaa lana horumariyaa hannaanka maalgelinta hawlaha caafimaadka	<p>Waa in la tayeeyo oo kor loo qaado, mushaarka xirfadlayaasha caafimaadka iyo gunnooyinkooda;</p> <p>In la diyaariyo miisaaniyad iyo odoros ku saabsan dhaqaalaha loo baahan yahay in la tayeeyo xirfadlayda ka shaqaysa caafimaadka sida waxbarashadooda, aqoon kororsigooda iyo mushaarkooda iyo gunnooyinkooda;</p> <p>Waa inkor looqaado dhaqaalaha galaya caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadka ee dowladda, ganacsiga gaarka ah iyo deeq-bixiyayaashuba ay ku tabarrucaan;</p>	<p>In xirfadlayda caafimaadka loo helo mushaaro iyo gunnooyin u dhigma waxa ay ka heli karaan meelo kale, ama magaaloooyinka waaweyn;</p> <p>In la isku jaan-gooyo ama mushaarada iyo gunnooyinka xirfadlayda caafimaadka iyo waaxyaha kala duwan ka shaqeeya (si aan hal meel la isugu buuran, takhasus kasta qofkii bartana uu u helo mushaar ku fulan);</p> <p>In la uruuriyo xogta caafimaadka iyo kharashka ku baxa;</p>	Dekhli iyo dhaqaale ku filan xirfadleyda caafimaadka ayaa la qorshaynayaa oo la qoondaynayaa lana gaarsiinayaa bahda caafimaadka	Xilliga dhexe	Wasaaradda maaliyadda, deeq-bixiyayaasha;

## Hiigsi 6

Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Wagtiga	Saamileyda
Waa in caafimaadka loo abuurto iskaashiyo	<p>Waa in la dhiso golayaal wada-shaqayneed iyo iskaashi; (guddi wasiiri, xirfadlayda caafimaad oo talada caafimaadka gudbisa, iyo gole isku duwid oo deeq-bixiyayaasha iyo saamileyda heer qaran iyo heer maamul goboleed ay ku wada jiraan);</p> <p>Waa in la hirgeliyo hannaan ay ku wada shaqayn karaan ganacsatada iyo dowladda oo leh heshiisyo iyo qaab-wada-shaqayneed;</p> <p>Waa in abuurto hannaan ay bulshadu cod iyo saamayn ugu yeelan karto qaabka loo maamulo caafimaadka dalka ;</p> <p>Waa in la aasaaso gole sanadle ah oo daneeyayaasha caafimaadku ku kala xogqaataan, halkaas oo iskaashatooyin lagu dhiso, dhaqaalaha lagu aruuriyo, la isku kaashado, guulaha iyo culays-yadana lagu qiimeeyo</p>	<p>In la meel dhigo hannaan wada-shaqayneed oo wasaaradaha kale duwan, Soomaalida iyo deeq-bixiyayaasha, isbitaalada iyo xirfadlayaasha, barayaasha caafimaadka dhiga;</p> <p>In la hirgeliyo heshiis wadashaqayneed ee wasaaradaha caafimaadka iyo inta caafimaadka ka shaqaysa;</p> <p>In la hirgeliyo hannaan shacabku ay talo iyo saamayn ugu yeeshaan caafimaadka dalka;</p>	Wada-shaqayn iyo iskaashi toos iyo mid aan toos ahayn oo dhex-mara bahweynta ka shaqaysa caafimaadka	Wagtiga dhexe;	Wasaaradaha caafimaadka, deeq-bixiyayaalka, iyo ganacsatada iyo bulshada caadiga ah



## Hiigsi 7

Tabaha	Tallaabooyinka	Yoolka	Faa'iidooyinka	Waqtiga	Saamileyda
Waa in la dhiso hoggaanka iyo maamulka xirfadleyda caafimaadka dalka	<p>Waa in la tayeeyo awoodda hoggaamineed iyo maamul;</p> <p>Waa in la xoojiyo ururrada caafimaadka sida kuwa dhakhaatiirta iyo xirfadleyda kale ee caafimaadka si ay u ahaadaan kuwo hoggaan iyo maamul hufan;</p>	<p>Karaanka xirfadeed iyo aqooneed ee hoggaanka iyo maamulka caafimaadka oo la tayeeyey;</p> <p>Awoodda iyo karaanka xirfadlayaasha caafimaad iyo ururadooda ookor u kacay si ay kaalintooda u gutaan;</p>	<p>Waxaa kor u kacaya awoodda iyo aqoonta hoggaanka caafimaadka dalka si ay u hagaan soo kabashada, u kasbaaan dhaqaale ayna isugu dubbaridaan dadaalada xirfadleyda caafimaadka;</p> <p>Waxaa iyana kartidooda iyo karaan koodu kor u kacaysaa bahweynta caafimaadka si ay ula jaan-qaadaan hoggaanka caafimaadka ee heer kasta ayna uga qayb qaataan soo kabashadaas;</p>	Waqtiga dheer	Wasaaradaha caafimaadka, maaliyadda, iyo deeq-bixiyayaasha

## Caqabadaha Curyaamiyey Shaqada iyo Shaqaalaha: Tabaha (istraatijiyadaha) iyo xalka daawada u ah

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka	
<p><b>Waa in loo aqoonsado shaqo la'aanta dhalinyaradu in ay tahay musiibo qaran; waana in lagu dhaqaaqo qorshe ballaaran oo dhalinyarada shaqo loogu abuurayo</b></p>	<p>Shaqo la'aanta dhalinyarada Soomaaliyeed waxa ay kor u dhaaftay 70%. Shaqo la'aantaasi waxa ay dhalisay saboolnimo baahsan, hijro iyo qaxid qar iska tuurnimo wadata iyo in dhallinyaradu ay u nuglaadaan qaadashada fikradaha xagjirka ah.</p>	<p>Wasaaradaha Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Qorshaynta, Ganacsiga, Warshadaha,</p>	<p>Midee dadaalada dowladaha, deeq bixiyayaasha iyo saamileyda kale si kor loogu qaado tababarka xirfadaha isla markaana la isu waafajiyo xirfadda iyo shaqooyinka laga abuuriro ilaha adeegga, isgaarsiinta, maaliyadda, bangiyada iyo dalxiiska.</p>	
	<p>Maalgalin la'aanta shaqo abuurka dhalinyarada ee ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo dowladaha, xirfadaha la bartay iyo shaqooyinka jira oo aan is lahayn, xirfadaha muhiimka u ah shaqo helidda ah oo aan dhallinyaradu lahayn (sida luuqadda English-ka, qorista, computer-ka aasaasiga ah, cod karnimada, iwm); bulshada oo yasta shaqooyinka gacanta laga qabto ayaa caqabado ku ah shaqo helidda dhallinyarada.</p>	<p>Guddiga Shaqaalaha,</p> <p>Maalgeliyayaasha Caalamiga,</p> <p>Rugaha Ganacsiga;</p> <p>Maalgaliyayaasha;</p>	<p>Ahmiyad sii maalgalinta kaabayaasha muhiimka ah si kor loogu qaado adeegga, loo sahlo hoosna loogu dhigo kharashka ku baxa iyo caqabadaha hor yaalla aasaasidda iyo wadidda ganacsiga.</p>	
			<p>Hay'adaha samafalka</p>	<p>Waa in la badiyo tababarrada tayada sare leh iyo tababarka xirfadaha ganacsi abuurka si loo casriyeeyo korna loogu qaado fursadaha ay ku guulaysan karaan ganacsiga bilowga ah, kuwa yar-yar iyo ganacsiga meel dhexaadka ah iyo kuwa hadda la unkayo.</p>
				<p>Waa in kor loo qaado hellida deynta iyo horumariska ay helaan ganacsatada, heerka hoose, dhexe iyo kuwa bilowga ah, waana in la is-waafajiyo xirfadaha iyo tababarka ganacsatada, horumarinta iyo ganacsi abuurka.</p>
				<p>Waa in la hirgeliyo shaqooyinka dhismaha sida kaabayaasha (waddooyinka) ee hawlaha guud si dadka aan xirfadaha lahayn shaqo loogu abuurto loona siiyo tababarka xirfadaha farsamada.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Waa in la waafajiyo tababarka farsamada gacanta iyo baahiyaha suuqa shaqada ee ilaha wax soosaarka (beeraha, xoolaha, kalluumaysiga) iyo kuwa adeegga (dhismaha, dalxiiska, gaadiidka) ee dalka muhiimka u ah.</b></p>	<p>Ilaha wax soosaarku ma helaan shaqaale xirfad leh waxa ayna taa sabab uga dhigaan xirfadda shaqadoonka iyo xirfadda looga baahan yahay meelaha shaqadu taallo oo aan is lahayn iyo in shaqadoonku ay buunbuuniyaan shahaadooyinkooda iyo iyaga oo aan sidii loo baahnaa aan shaqada u qabin karin.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada, shaqada iyo shaqaalaha iyo qorshaynta</p> <p>Dalladaha waxbarashada</p> <p>Dugsiyada gaarka ah ee farsamada gacanta</p> <p>Saamileyda caalamiga ah</p>	<p>Waa in ay isla jaanqaadaan dadaalada wasaaradaha qorshaynta, shaqada iyo waxbarashada si loo helo xog sugan oo ku saabsan shaqooyinka dalka looga baahan yahay si jaamacaduhu ay u dhigaan waxbarasho dabooolaysa baahida suuqa ka jirta laysuna waafajiyo ardada soo qalin jabinaysa iyo baahi-xirfadeedka suuqa shaqada.</p>
			<p>Waa in ahmiyad gaar ah la siiyo tababarrada xirfadaha ee shaqooyinka dalka muhiimka u ah sida caafimaadka, lana siiyo qoondayn daahfuran oo la wada og yahay.</p>
			<p>Waa in goobaha waxbarashada laga dhaqangeliyaa qorshayaal ardada kala taliya meheradaha ama aqoon-shaqeedka u habboon qorshayaashaas oo la xiriirsan qorshayaasha dowladda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada ee dhiirrigelinaya kobcinta ilaha wax soosaarka iyo adeegga, waana in la is waafajiyo tababarka xirfadaha iyo baahida suuqa shaqada.</p>
			<p>Waa in la diyaariyo xarumo shaqo helidda kacaawiya ardayda kuna xiriirsan iskaashatooyinka iyo hay'adaha shaqo-abuurayaasha ah, rugaha ganacsiga iyo xogogaalka kale ee aqoonta u leh suuqa shaqada.</p>
			<p>Waa in la iswaafajiyo barnaamijta shaqa berridda ardayda iskoolka ku jirta ama qalinjabisay ee dalka iyo tababarka farsamada gacanta si dowladda, iyo ganacsatadaba looga dhexaburo fursado xirfadaha gacanta loona caawiyo ardada si ay u yeeshaan xirfado korna loogu qaado fursadahooda shaqo ama isushaqaynta.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Waa in la xoojiyo siyaasadaha shaqada ee dalka haatan ka jira kuwo cusubna loo sameeyo si loo ilaaliyo korna loogu qaado xuquuqda qaybaha bulshada ee nugul ama tabarta daran amaba la takooro.</b></p>	<p>Shaqo la'aan heerkeedu aad u sarreeyo iyo tartan ba'an oo loogu jiro shaqooyinka yar ee jira oo ay weheliyaan fikrado dhaqameed qalloocan oo lid ku ah dadka naafada ah iyo in aan dadka naafada ah la siin wakhti dheeri ah oo ku filan si ay shaqadooda u gutaan ayaa sabab u ah xaqiraad, duudsin, iyo gacan-bidixayn badan oo ay dadka naafada ahi la kulmaan.</p>	<p>Wasaaradaha shaqada, haweenka iyo xuquuqul iinsaanka, guddiga shaqaalaha rayadka ah, ururrada shaqaalaha, rugaha ganacsiga, bulshada rayadka ah;</p> <p>Madaxda qaranka iyo kuwa maamul goboleedyada</p>	<p>Hirgeli sharci lagula dagaalamayo duudsigu shaqo helidda, kaas oo u xaq-sooraya isla markaana difaacaya, korna u qaadaya fursadaha shaqo ee dumarka, dadka naafada ah, barakacayaasha iyo qaybaha kale ee bulshada ee la faquuqo, kuna lamaani olole wacyigalin ah oo ku saabsan shaqaalaynta loo siman yahay kuwaa oo ay ka mid yihiin ilaalinta xuquuqda dumarka, ha noqoto midda madaniga ah iyo sharciga Islaamka.</p>
			<p>Sii dhiira-gelin shirkadaha shaqada siiya naafada – sida canshuur dhaaf, iyo in keligood ay qaadan karaan qandaraasyada dowladda.</p>
			<p>Hirgeli hannaan lagu soo gudbinayo dadka shirkad kasta iyo hay'ad kasta ay shaqaalaysiinayaan si loo ogaado cidda shaqada siinaysa ama aan siinayn haweenka, naafada iyo dadka la takooro.</p>
			<p>Dhiirri-geli maal-gelinta ganacsiga ay leeyihiin dumarka, dadka naafada ah iyo dadka la duudsiyo; una sahal deyn iyo deeqo ayada oo la isticmaalayo hay'adaha daymaha yaryar bixiya, Xafiiska Apex ee Gargaarka iyo Horumarinta ama xafiis kasta oo leh tabartii iyo tayadii loo baahnaa ee heer dowlad dhexe iyo dowlad goboleedba.</p>
			<p>Dhiirrigeli shaqo-abuurayaasha ama shaqo bixiyayaasha in ay yeeshaan nidaam si habboon oo sinnaan iyo caddaalad ah u qiimeeya arjiyada shaqada ee dadka naafada ah si ay u soo gaaraan wajiga shaqo bixinta ee waraysiga.</p>
			<p>Diyaari hannaan shaqo-bixiyayaasha u sahla inay qiimeeyaan dadka naafada ah si ay u shaqaalaysiiyaan.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Waa in la dhiirigaliyo hab dhaqameed shaqo bixineed oo daahfuran oo ku dhisan karti iyo aqoon si meesha looga saaro qaraaba-kiilka, nin jeclaysiga shaqaalaysiinta la xiriirta</b></p>	<p>Shaqo-doonayaalka waxaa niyad jabiya qaraabakiil, nin-jeclaysi ku baahday meelaha shaqada laga doonto ha noqdaan kuwo dowladeed ama kuwa gaarka ahe; mana aha in go'aanka shaqaalaynta lagu dhiso "yaad taqaanaa ama yaa ku yaqaanna" ee waa in lugu dhisaa maxaad taqaanaa, soo baratay ama maxaad qaban kartaa.</p>	<p>Dhammaan wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada</p>	<p>Hirgeli xarun laga hubiyo shahaadooyinka ama xirfadaha la xiriira nooc kasta oo shaqo ah, waana in shaqo-bixiyayaalka lugu dhiirrageliyo, hubinta sax ahaanta shahaadooyinka, si qofkii wax bartay ee shahaado wata uu shaqo u helo halka uu ka heli lahaa qof qaraabakiil ku yimid.</p>
		<p>Wasaaradaha Shaqada iyo Shaqaalaha dowladda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada</p>	<p>Si loo xaddido shaqaaleysiinta qaraabakiilka iyo qabyaaladda ku timaadda, waa in la sameeyo sharci si shaqo bixinta iyo shaqo heliddu ay u noqto mid daahfurnaan ;</p>
		<p>Hay'adda Shaqaalaha rayadka ah ee dalka</p>	<p>Samee sharci shaqo bixinta iyo shaqo helidda ka dhigaya mid daahfuran – si loo xaddido shaqaaleysiinta qaraabakiilka iyo qabyaaladda ku timaadda;</p>
		<p>Rugaha Ganacsiga</p> <p>Goobaha shaqada ee gaarka loo leeyahay</p> <p>Hay'adaha aan dowliga ahayn</p> <p>Saamileyda caalamiga ah</p>	<p>Samee kormeere madax bannaan oo hoostaga wasaaradda shaqada kaa oo dhagaysta caba-shooyinka shaqada iyo shaqaalaha la xiriira kana soojeediya talooyin wax lagaga qabanayo dhaqanka shaqaalaysiinta ee aan caddaaladda ahayn.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>In la diyaariyo lana dhiirrigaliyo xeerar iyo siyaasado shaqo iyo shaqaale si loo hago suuqa shaqada, loo boorriyo shaqo abuur loona ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha.</b></p>	<p>Waxaa loo baahan yahay in dib loo eego oo la iswaafajiyo sharciyada shaqada iyo shaqaalaha si loo abuuru jawi dabacsan, tartan, wax soosaar, shuruudo shaqo oo wanaagsan iyo fursado shaqo oo loo siman yahay.</p> <p>Sharciyada shaqada oo aan ahayn kuwo habboon oo shaqayn kara, siyaasadaha shaqada oo aan midaysnayn iyo sharciga oo aan la ilaalin ayaa caqabad ku ah shaqo abuurka.</p>	<p>wasaaradaha shaqada iyo shaqaalaha dowladda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada</p>	<p>Samee, dhaqangali, dib u eegisna ku samee sharciyada dowladda dhexe iyo kuwa dowlad goboleedyada ee shaqada iyo shaqaalaha la xiriira si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha oo dhan (kuwa dowladaha u shaqeeya iyo kuwa goobaha shaqada ee gaarka ah ka shaqeeya)</p>
		<p>Hay'adda Shaqaalaha rayadka ah ee dalka</p>	<p>Cusboonaysii oo dhaqan geli sharciyada iyo siyaasadaha shaqooyinka dalka ka jira u xiraya muwaadiniinta mudan.</p>
		<p>Rugaha Ganacsiga</p> <p>Goobaha shaqada ee gaarka loo leeyahay</p> <p>Hay'adaha aan dowliga ahayn</p> <p>Saamileyda caalamiga ah</p>	<p>Samee, dib u eegis ku samee, isna waafaji sharciyada shaqada iyo shaqaalaha ee haatan jira iyada oo lala tashanayo saamileyda.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Waa in la xoojiyo uruurinta iyo baahinta macluumaad dhamaystiran oo la xiriira shaqooyinka dalka.</b></p>	<p>Maal-gashadeyaasha shisheeye iyo kuwa sokeeyaba ma helaan xog lagu kalsoonaan karo, xog la'aantaasina waxa ay dhalisay in ay ka feejignaadaan ama ay ku dhiirran waayaan maal-gashiga dalka halkii haddii macluumaad jiri lahaa ay maalgashan lahaayeen shirkado abuuri lahaa shaqo.</p>	<p>Wasaaradaha shaqada iyo qorshaynta</p> <p>waxbarashada Rugaha ganacsiga</p> <p>Hay'adda Istaatistikada Qaranka</p> <p>Guddiga Shaqaalaha Rayadka;</p> <p>Rugta Ganacsiga</p>	<p>Kordhi dadaalka lagu uruurinayo xogaha la xiriira shaqada iyo shaqaalaha iyada oo la hawlgalinayo lana kaashanayo Hay'adda Istaatistikada Dalka iyo goobaha shaqada ee kale, kuwa dowladaha iyo kuwa gaarka ahba.</p> <p>Abuur xiriir wada shaqayneed oo u dhexeeya dowladda dhexe, dowlad goboleedyada iyo saamileyda kale si loo uruuriyo loona baahiyo xogaha ku saabsan shaqada iyo shaqaalaha.</p> <p>Wajib uga dhig goobaha tacliinta, shaqada iyo saamileyda kale in ay soo gudbiyaan warbixino iyo wargalin joogta ah iyaga oo isticmaalaya Internetka ama si kale usoo gudbinaya.</p>

## Caqabadaha curyaamiyey ila-dakhliyeedka beeraha iyo xoolaha: Tabaha (istiraatajiyadaha) iyo xalalka daawada u ah caqabadahaas

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Diyaari iskuullo tababarka farsamada gacanta (TVET) oo ku dhisan baahida suuqa ka jirta; sidoo kale diyaari barnaamij aqoon iyo xirfad kordhineed ee beeraha iyo xoolaha.</b></p>	<p>Dhallinyarada hadda ka soo qalinjabisay machadyada iyo jaamacadahu ma laha xirfadihii aasaasiga ahaa ee beeraha iyo xoolaha. Sidoo kale ma laha aqoonta aasaasiga u ah si ay u isticmaalaan tignoolojiyadda casriga ah ee cilmibaarista beeraha, sida dalagyada iyo cimilada ay ku baxaan, maamulka iyo tignoolojiyadda wax soo saarka beeraha iwm.</p> <p>Waxbarashada beeraha iyo xoolaha oo hadda la bixiyaa, ma laha aqoonta gacanta laga qabto oo qofka la tusayo si uu u tababarto, oo waxa ay u badan tahay buug la akhriyo. Tignoolojiga beeruhu si degdeg ah ayuu isu baddalayaa, haddii aan la helin xirfadlayaal tignoolojiyadda yaqaana oo isticmaala, Soomaaliya waxaa laga yaabaa in ayna kor u qaadin wax soo-saarkeeda beeraha ama loollan-galkeeda gobolka iyo caalamkaba.</p>	<p>Wasaaradaha beeraha, xoolaha, Shaqada, Dhallinyarada, Waxbarashada, Qorshaynta iyo Maaliyadda (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada.)</p> <p>Machadyada tacliinta sare iyo kuwa tababarka farsamada gacanta;</p>	<p>In la hormariyo iskuullada tababarka gacanta iyo barnaamijta kobcinta xirfadaha iyada oo diiradda la saarayo xirfadaha looga baahan yahay suuqa shaqada ee beeraha iyo xoolaha si kor loogu qaado shaqo abuurka iyo kobaca dhaqaalaha.</p>
			<p>In loo abuurdo ardayda jaamacadaha tababar-shaqeed (internships) iyo tababr-gacmeed (apprenticeships) si ay u helaan khibrada lagama maarkaanka u ah ka shaqaynta beeraha iyo xoolaha;</p>
			<p>In la diyaariyo manhaj waxbarasho oo loogu talagalay beeraha iyo xoolaha kaas oo ku wajahan xaaladda Soomaaliya, kana jawaab celinaya baahiyaha suuqa. Tababarradu waa in ay noqdaan kuwo ardayda baraya xirfado gacmeed uu ardaygu adeegsan karo tignoolojiyadda casriga ah iyo ka gacansiga iyo maamulka beeraha.</p>
			<p>In la shaqaaleeyo macallimiin tayo iyo aqoon leh ama ah xirfadlayaal ku takhasusay beeraha iyo cilmiga xoolaha oo leh xarumo wax lugu baaro (shay-baarro) si loo helo barnaamijyo waxbarasho oo leh tayada waxqabad ee dalka lugu horumarin karo.</p>



Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
			<p>In la soo rogo, lana taageero baridda luuqadda ardayga wax lagu barayo sida Ingiriiska oo ku xiran, qaybna ka ah waxbarashada. In waajib looga dhigo dhammaan jaamacadaha in ay sameeyaan xarunta barashada luuqadda Ingiriiska oo ardaygu uu dhiganayo sannadka koowaad ee jaamacadda ilaa ardaygu uu ka kaaro heer qiimeyn caalami ah leh oo uu keeni karo dhibco sare intxaannada IELTS, TOEFL ama kuwa la midka ah.</p> <p>In la abuurto wadashaqayn u dhaxaysa hay'adaha dowladda, jaamacadaha, goobaha shaqada, kuwa dowladda iyo kuwa gaarka ahba, si ay u bixiyaan tababar shaqo iyo tacliin wada socota oo kor loogu qaadi karo cilmi-baarista beeraha iyo xoolaha, isticmaalka tignoolojiyadda iyo weliba soo bandhigidda noocyo cusub oo tignoolojiyadda casriga ah</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Si loo soo saaro jaamiciyiin karti leh, waa in la diyaariyo oo la kobciyo tacliin sare oo xirfadeed oo tayo leh oo beeraha iyo xoolaha ah kuwaas oo leh manhaj, xeerar iyo qawaaniin haga waxbarashada.</b></p>	<p>Cilmibaaristu waxa ay soo bandhigtay cillado badan oo ragaadiyey isticmaalka tignoolojiyadda tacliinta sare ee beeraha iyo xoolaha. Machadyada tacliinta sare ma laha shaybaaro munaasab ah, macallimiin aqoon fiican leh, beero ay ku sameeyaan tijaabooyin iyo manhaj la xiriira waxbarashada ay bixiyaan</p>	<p>Wasaaradaha beeraha, xoolaha, waxbarshada (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>Si loo xaqiijiyo, ahmiyadda Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP-9) ee ah in la xoojiyo waxsoosaarka, waa in dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu ay maalgeliyaan tignoolojiyadda casriga ah ee beeraha iyo xoolaha, dibna loo habeeyaa qaab dhismeedka siyaasadda, hannaanka maamul iyo xeerarka haga ilaha dekhli-abuurka.</p>
		<p>Machadyada iyo jaamacadaha, dugsiyada tababarka farsamada gacanta, wasaaradaha qorshaynta iyo maaliyadda (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>In waxbarashada beeraha iyo xoolaha ee buug akhrinta ah lugu daro tababarro ama xirfad-gacmeedyo ay la socoto shaybaarro iyo beero lugu tababarto si ardadu ay u yeeshaan aqoon dhab ah iyo xirfadaha suuqa looga baahan yahay.</p>
		<p>Rugaha ganacsiga</p>	<p>In la hirgaliyo barnaamijyo waxbarasho oo lagu barto: mehered-abuur, maamulka beeraha iyo xannaanada xoolaha si loo soo saaro xirfadlayaal abuur kara, maamulina kara ganacsi beereed ama mid xoolaad oo tiknoolijidda casriga ah adeegsan kara.</p>
			<p>In laga dalbo machadyada iyo jaamacadaha tacliinta sare ee beeraha iyo xoolaha in ay leeyihiin, kuna dhaqmaan hannaan tayo-dhawr ah; waana in Guddiga Tacliinta Sare ee Dalka (GTSD) ay kormeeraan jaamacadaha iyo machadyada ay aqoonsiga siiynayaan.</p>
			<p>Si loo daboolo baahiyaha shaqo ee ilaha wax soosaarka dalka, kulliyadaha beeraha, xannaanada xoolaha, kalluumaysiga iyo khayraadka badda ee Jaamacadda Ummadda waa in la siiyo mudnaanta ugu sarraysa iyo dhaqaale ku filan si ay u shaqaalaysiiyaan macallimiin tayo leh, u helaan goobo waxbarasho oo tayeysan kuwaas oo loo oggolaanayo in ay ku tababaran karaan ardayda jaamacadaha kale ee ay wasaaradda waxbarashada hiddaha iyo tacliinta sare ay aqoonsan tahay.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Muhiimad gaar ah in la siiyo maalgashiga kaabayaasha ilaha wax-soosaarka ee xoolaha iyo beeraha si dalku uu u hanto ama u daboolo baahidiisa cuntada ama quudka.</b></p>	<p>Soomaaliya waxaa aafeeyey cunto la'aan iyo saboolnimo in kasta oo dhul beereed iyo wabiyaalba uu dalku leeyahay.</p>	<p>Wasaaradaha beeraha iyo xoolaha nool, waxbarshada (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>In la hirgeliyo barnaamij qaran oo meelaha daaqsinta iyo beeraha ah lagaga dhisayo xurfodo / barkedo yaryar iyo biyo-xireenno.</p>
	<p>Abaaro iyo daadad soo noqnoqday ayaa iyaguna ka mid ah sababaha ay tiro ku dhow 80% bulshada Soomaaliyeed ugu nool yihiin saboolnimo.</p>	<p>Machadyada iyo Jaamacadaha, dugsiyada tababarka farsamada gacanta,</p>	<p>In la dejiyo xeer-hoosaadyo ay meelmariyaan dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu oo dhiiri-galinaya wax soosaarka cuntada aasaasiga ah iyadoo la isticmaalayo tabo sida canshuur dhaafka ah.</p>
	<p>Bulshadeenna barkeed waxa ay ku tiirsan tahay cawimaad bani'aadamnimo, inta kalena waxa ay ku tiirsan yihiin cuntada aasaasiga ah ee dibada laga keeno.</p>	<p>Wasaaradaha Qorshaynta iyo Maaliyadda (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>In dib loo dhiso mashruucii bariiska ee Jowhar si dalku isu quudiyo, loo yareeyo cuntada dibadda laga keenayo, loona abuuro fursado shaqo oo cusub.</p>
		<p>Rugaha ganacsiga.</p>	<p>In laga ilaaliyo hay'adaha caawimaaddu inay suuqa dalka kasoo buuxiyaan cuntada aasaasiga ah taas oo wax u dhimaysa wax soo saarka dalka.</p>
			<p>In dowladuhu (federal ama gobolka) ay ahmiyad siiyaan tababarka injineerada iyo farsamo yaqaanada beeraha iyo kaydinta biyaha.</p>
			<p>In la hirgaliyo hannaan cusub oo dalka oo dhan ah oo ku saabsan isticmaalka tignoolojiyadda si biyaha waraabka beeraha loo tashiilo oo ay ka mid tahay waraabka biyaha oo lala beegsado xididka ama gunta dalagga (drip irrigation);</p>
			<p>In la horumariyo suuq-raadinta dalagga soo go'a ee dalka gudahiisa iyo dibbaddiisaba.</p>
		<p>In la bixiyo deeqo kooban lana fududeeyo deymo yaryar si loo dhiiri-geliyo wax soosaarka beeraha iyo xoolaha ee dalka.</p>	

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Maal-geli oo horumari wax soosaarka, dhoofinta, kaabayaasha, maamulka iyo ka ganacsiga xoolaha iyo ganacsiyada ku xiriirsan si dhaqqaalaha loo kobciyo</b></p>	<p>Soomaaliya waxaa ku nool 50 milyan oo xoolo ah. Dalku waxa uu soo saaraa hilib ku filan bulshada Soomaaliyeed.</p>	<p>Wasaaradaha xannaanada xoolaha, dhirta iyo daaqa; maaliyadda iyo qorshaynta (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>In la dhiso goobo tayo sare leh oo lagu quudiyo lagana waraabiyo xoolaha iyada oo biyo-xireenno cusub la dhisayo lana dayactirayo kuwii hore si biyaha la kaydiyo loo isticmaalo xilliga abaaraha.</p>
	<p>Dhoofinta xoolaha nooli waa isha ugu weyn ee dalka soo galisa lacagta adag.</p>	<p>Iskaashatooyinka xoolaha;</p>	<p>In la sameeyo nidaam xakameeya cudurrada xoolaha iyo dullinka beeraha iyada oo la isticmaalayo tallaallo iyo ka warhayn joogto ah.</p>
	<p>Laakiin qaybtan xoolaha weli sidii la rabay uma horumarsana, waxa ayna u baahan tahay in il-gaar ah lagu eego arrimaha ay ka midyihiin: daryeelka caafimaadka xoolaha, kaabayaasha laf-dhabarka u ah horumarinta xoolaha iyo suuqa xoolaha iyo inta ku xiriirsan iyo ballaarinta ka ganacsiga iyo ka faa'iideysiga xoolaha</p>	<p>Hay'adaha maalgashiga</p>	<p>In dadka ka shaqeeya dhaqashada iyo wax soosaarka xoolaha la siiyo tababar ku wajahan beekhaaminta iyo ilaalinta daaqsinka, calafka xoolaha iyo diyaarintoodaba.</p>
			<p>In la abuurto barnaamij iyo mashaariic maalgashi oo lugu kobcinayo wax soosaarka iyo ka ganacsiga xoolaha oo ay ka qayb qaadanayaan dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahayba</p>
			<p>In la qaado ol-olayaal qorshaysan oo lagu dhiiri-galinayo maalgashiga dalka iyo midka caalamiga ah ee xoolaha.</p>
			<p>In la dhiiri-galiyo iskaashiga u dhexeeya shirkadaha teknoolajiyadda casriga ah si loo horumariyo suuqgeynta xoolaha, wadaagga xogta iyo adeegyada kale sida dirista maaliyadda iyo agaasinka xisaabaadka, ka warhaynta xanuunnada soo kordha iyo xog-wadaagoodaba.</p>
			<p>Waa in wax laga baddalo aragtida dadku ay ka qabaan qaabkii hore ee xoolaha loo dhaqan jirey.</p>
			<p>Waana in la soo bandhigo qaabab casri ah oo looga ganacsan karo xoolaha iyada oo la adeegsanayo warbaahinta ayaa wacyi gelin ku aaddan wax soosaarka xoolaha iyo ganacsiyadooda kala duwan lala wadaagi karaa dadweynaha iyo xoolo dhaqatadaba.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Hirgeli oo si adag u dhaqangali siyaasado iyo sharciyo bii'ada ama degaanka dhawraya</b></p>	<p>Nabaad-guurka ku dhacay qaybo badan oo dalka ah waxaa keenay maamul xumo xagga bii'ada ah sida kheyraadka oo si xad kabax ah loo isticmaalo, dhowrida iyo dhaqangelinta sharciga oo aan fulin, hay'adahii laf-dhabarka ahaa oo doorkoodii gabay, carrada iyo biyaha oo aan sidii loo baahnaa loo daryeelin iyo kiimikada bacriminta iyo midda cayayaanka disha oo si aan sax ahayn beeraha qaarkood loogu isticmaalo.</p>	<p>Madaxda dowladda dhexe iyo kuwa dowlad goboleedyada;</p>	<p>In la dhammaystiro, la is-waafajiyo oo la dhaqangeliyo xeerarka dalka ee haatan jira oo ku saabsan dhaqaaleynta iyo ilaalinta bii'ada iyo ka hortagga nabaad-guurka iyo xaalufinta</p>
		<p>Hay'adda bii'ada ama deegaanka; xafiiska ra'iisul wasaaraha;</p>	<p>In la sameeyo Wakaaladda Deegaanka Qaranka si ay u hoggaamiso xeerarka deegaanka iyo bii'ada la xiriira, una diyaariso qorshaha ka badbaadidda musiibooyinka, oddorokooda, ka digiddooda iyo ka-falcelinta abaaraha, fatahaadda iyo masiibooyinka kale.</p>
	<p>Masiibooyinka dabiiciga ah sida is-baddelka cimilada, abaaraha iyo daadadka ayaa iyaguna saameyn weyn ku leh horumarinta beeraha iyo xoolaha.</p>	<p>Wasaaradaha kaalmada banii'adminimada iyo ka hortagga masiibooyinka;</p>	<p>In la dhiirri-galiyo daryeelka iyo ilaalinta bii'adu in ay tahay masuuliyad qof kasta saaran iyada oo si gooni ah loo wacyigelinayo xoolo-dhaqatada iyo beeraleyda, hoostana laga xarriiqayo muhiimadda ay leedahay daryeelka iyo sax u isticmaalka kheyraadka dalka.</p>
		<p>Wasaaradaha biyaha iyo kheyraadka tamarta (dowladda dhexe &amp; dowlad goboleedyada);</p>	<p>In la sameeyo xarumo iyo barnaamijyo qaran iyo kuwo goboleed oo ka hortagaya nabaad-guurka iyo xaalufinta dhulka si deegaanadu ay u ahaadaan kuwo ku habboon daaqa.</p>
		<p>Saamileyda caalamiga ah;</p> <p>Hay'adaha aan dowliga ahayn ee bii'ada.</p>	<p>In ahmiyad la siiyo oo la maalgaliyo mashaariicda biyo kaydinta sida dhismaha biyo-xireenno laga sameeyo daanta wabiyada Shabeelle iyo Jubba iyadoo la dejinayo nidaam agaasima biyaha labadaas webi.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Si dalka looga haqabtiro cuntada, waa in muhiimad sare la siiyo wax soosaarka dalka iyada oo la samaynayo siyaasado joojinaya ama yaraynaya cuntada dibadda laga keeno, ballaarintaya suuqyada dalka, soo jiidanaya maalgashiga, korna u qaadaya isku-tashiga iyo casriyeynta si shaqooyin loo abuur, dhaqaalaha loo xoojiyo cunto yaradina looga hortago.</b></p>	<p>Shaqada beeraha iyo xoolaha gaar ahaan shaqooyinka ardayda hadda soo qalin jebisay iyo beeralayda waxaa curyaamiyey nabadgelyo xumo, maalgalin la'aan, tababar xumo iyo siyaasado aan wax ugu oollin wax soosaarka dalka.</p>	<p>Dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada;</p>	<p>In lugu taageero deeqo iyo deymo yaryar ardayda soo qalinjabisa si ay u bilaabaan inay iskood uga shaqaystaan beeraha iyo xoolaha sida furitaanka xarumaha daryeelka beeraha iyo xoolaha, tallaalka xoolaha, samaynta beeraha green house-ka, waraabinta dallaga ee salka geedka ama abuurka lala cegto, iyo xarumaha xakamaynta cudurradda beeraha iyo dulanka xoolaha.</p>
		<p>Wasaaradda Beeraha;</p>	<p>In la taageero aqoon-kororsiga ama barnaamijyada sii wadidda waxbarshada ee ardayda iyo beeralayda si kor loogu qaado beerashada iyo dhaqashada xoolaha.</p>
		<p>Wasaaradda shaqada iyo arrimaha bulshada;</p>	<p>In la dhiirri-galiyo dhiraynta iyo beeraha magaalooyinka laga dhex-sameeyo iyo waraabka dalagga rusheeya si shaqo loogu abuur ardayda soo qalinjabisa oo aan shaqo ka heli karin beeraha magaalada ka baxsan.</p>
		<p>Iskaashatooyinka beeraha;</p>	<p>In la maalgeliyo horumarinta, qurxinta iyo cabbaynta badeecooyinka la soo saaro iyada oo weliba tayo dhowr rasmi ah la marinayo si suuq-galintoodu ay u sahlanaato.</p>
		<p>Ganacsiyada gaarka ah;</p>	<p>In badeecooyinka beeraha loo sameeyo magac-bixin iyo astayn qurxoon oo soo jiidasho leh si suuqyada caalamiga ah loogu iib geyn karo.</p>
		<p>Bangiyada maalgelinta.</p>	<p>In la hirgeliyo biyo-xireenno biyaha kaydiya, si waraab loo helo xilliyada abaaraha ah.</p>
		<p>Wasaaradda ganacsiga iyo warshadaha</p>	<p>In dhulka daaqsinka ah la agaasimo iyadoo la seereynayo ama la xirayo qaybo, si loogu baxsado xilliyada jiilaalka ah.</p>
			<p>In la xiriiriyo wasaaradaha arrimaha beeraha iyo xooluhu ay khuseeyaan si loo dhiirrigeliyo abuurka ganacsiyo cusub oo qaybaha dalka u leh muhiimad istaraatiiji ah sida goobaha daryeelka caafimaadka xoolaha, dukaamada daryeelka beeraha iyo xoolaha, kaydinta biyaha iyo kacbinta beerashada, beeraha magaalooyinka, fidinta adeegyada beeraha si loo dhiirri-galiyo wax soosaarka loona ogaado oo loo xakameeyo cudurrada iyo cayayaanka beeraha iyo xoolaha ku dul nool.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Kor u qaad wacyiga, rabidda iyo ku qancidda saamileyda si loo uruuriyo xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan beeraha iyo xoolaha.</b></p>	<p>Xog sax ah, xilli ku habboon la isu keenay lana heli karo markii loo baahdo ayaa lagama maarmaan u ah samaynta siyaasado dhaxal gal ah oo ilaha dekhliga ee beeraha iyo xoolaha ku saabsan.</p>	<p>Wasaaradda beeraha;</p> <p>Iskaashatooyinka beeraha;</p> <p>Waaxda istaatiistikada ee wasaaradda qorshaynta, maalgashiga iyo horumarinta dhaqaalaha.</p>	<p>In la sameeyo qaab xog uruurin iyo kormeer iyada oo degmo walba la geynayo xog uruuriyaal haysta qalabkii ama agabkii xogta lagu uruurin lahaa sida raadye, kombuyuutarro iyo teleefano;</p> <p>In xogaha la aruuriyo la lafa-guro oo laga dhigo xog dadku fahmi karo lana gaarsiiyo saamileyda ay khusayso iyada oo laga baahinayo barnaamijta raadiyaha isla markaasna la soo-saarayo warbixinno iyo ogeysiisyo joogto ah .</p> <p>In la sameeyo baaritaan lugu ogaanayo dalagyada beeraha ee heli kara suuq fiican oo caalami ah waxna ka tari kara isku filnaanshaha xagga cuntada ee dalka.</p>



## Caqabadaha Curyaamiyey Kalluumaysiga: Tabaha (istiraatajiyadaha) iyo xalka daawada u ah

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Hagaaji xeerarka iyo siyaasadaha dowladda dhexe iyo kuwa dowlad goboleedyada ee la xiriira kalluumaysiga si loo kobciyo dhaqaalaha shaqooyinna loo abuuro.</b></p>	<p>Il-dakhliyeedka kalluumaysigu waa mid aan weli horumarsanayn, qaddarintii ay mudnayd aan helin, kuna xiran kalluumaysiga qalab-gacmeedka isticmaala. Waxa ay dakhliga dalka kusoo biirisaa dhaqaale dhan 2% oo kaliya. Aad looma isticmaalo tignooloojiyadda kalluumaysiga iyo wax soosaarka rasmiga ah. Maalgashi lagu sameeyo kalluumaysiga ayaa kor u qaadi kara heerka nolosha bulshada shaqooyinna abuuri kara.</p> <p>Weliba, maamullada hadda jira ee kalluumaysatada Soomaaliyeed waa kuwa aan si baahsan u shaqayn, mana ay laha wada shaqayn, sharciyo iyo qorshe, kaa oo si wanaagsan u hawlgaliya saamileyda.</p>	<p>Wasaaradaha kalluumaysiga iyo kheyraadka badda, qorshaynta, maaliyadda, horumarinta reer miyiga ee dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada;</p> <p>Rugaha ganacsiga;</p> <p>Saamileyda horumarinta ee caalmaiga ah;</p> <p>Wasaaradaha dekadaha iyo gaadiidka badda (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada)</p> <p>Ciidamada badda, Jaamacadaha iyo Ururrada cilmi-baarista.</p>	<p>In la xoojiyo awoodda wax-qabad ee Wasaaradaha Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda iyada oo miisaaniyad ku fillan loo qoondaynayo shaqaalaha la tababarayo.</p>
			<p>In dib loo eego, la iswaafajiyo, lana cusbooneysiyo sharciyadda kalluumaysiga ee dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada iyadoo si cad loo qeexayo doorarka sharci iyo awood ee ay kala leeyihiin heerarka kala duwan ee dowladda (dhexe, gobol iyo degmo).</p>
			<p>In la dejiyo sharci kalluumaysiga haga oo qeexaya dakhliwadaagga u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada.</p>
			<p>In lugu daro sharciga kalluumaysiga ee Dowlad goboleedyada mabaadiida maamul-wadaagga, xuquuqda iyo waajibadka kalluumaysatada iyo dadka kale ee khayraadka badda ka shaqaysta.</p>
			<p>In la diyaariyo lana hirgeliyo siyaasad qaran oo kalluumaysi, taa oo hagta horumarinta, maamulka iyo ilaalinta kheyraadka badda.</p>
			<p>In la diyaariyo lana hirgaliyo qorshe guud oo loogu talagalay horumarinta kalluumaysiga dalka kaa oo daboolaya dhammaan gobollada, kheyraadka iyo waxyaabaha la xiriira.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
			In la sameeyo kormeer waxqabad, korjoogteyn, ilaalin iyo xakamayn heer qaran iyo mid gobolba ah.
			In la sameeyo daraasad qiimeyn xilliyeed ah iyo daraasado kale si loo hubiyo xaaladda, firirsanaanta iyo inta ay tahay tirada noocyada gaarka ah ee kheyraadka badda ee sida gaarka ah loo ilaalinayo.
			In la sameeyo oo la hirgeliyo nidaam qaran oo xog uruurin, qorshe iyo maareynta kalluumaysiga ah oo loogu talagalay dhigaalka kheyraadka badda ee u muuqda in si xad dhaaf ah loola soobaxo sida aargoosatada badweynta, libaax badeedka iyo noocyada kalluunka ee badweynta ku nool.
			In la sameeyo oo la hirgeliyo qorshe hawleed heer qaran ah oo lagu ilaalinayo kheyraadka xeebaha iyo badweynta kaas oo ku dhisan ka hortag, baqdin-gelin iyo soo afjaridda kalluumaysiga aan sharciga ahayn oo aan dowladda lugu wargelin si aan sharciga waafaqsanayna loo kalluumaysto.
			In la abuurto oo la hawlgeliyo hay'ad qaran oo karti, awood sharci iyo mid baaritaanba leh taas oo ku salaysan Qawaaniinta (caalamiga ah ee) Kormeerka iyo Dundhawrka Kalluunka (QKDK) mas'uulna ka ah xaqiijinta iyo kormeerka kalluunka iyo kalluumaysiga.
			In la sameeyo qorshe guud oo dowli ah oo lagu abuurayo kaabayaasha kalluumaysiga (sida dekedaha, kaabad-badeedda iyo jidadka yaryar ee ay kalluumaysatadu isticmaasho); hirgeli qaboojiyayaal casri ah oo meelo badan laga helo iyo wixii tas-hiilaad ama adeegyo ah oo kale oo xeebta ku teedsan iyada oo la kaashanayo waaxda gaarka ah iyo saamileyda kale.

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Dhiirrigeli oo hirgeli maalgashiga gaarka ah ee kalluumaysiga</b></p>	<p>Kalluumaysiga Soomaaliyeed waa mid si weyn ugu tiirsan farsamo iyo qalab dhaqameedkii hore, waxaana ku yar maalgalinta ganacsi.</p>	<p>Wasaaradda kalluumaysiga iyo kheyraadka badda (dowladda dhexe &amp; dowlad goboleedyada)</p>	<p>Waa in iskaashi lala sameeyo Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgalinta (XDM) (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorshaynta ee dowladda federaalka si kor loogu qaado maalgashiga gaarka u ah kalluumaysiga loona dhiirrigaliyo maalgashiga iyo ganacsiga kalluumaysiga Soomaaliya.</p>
	<p>Inkasta oo uu wali korayo, haddana kalluumaysigu sidii la rabay u hanaqaadi mayo haddii aanay jirin maalgelin Soomaali ama ajaanib oo baaxad leh.</p>	<p>Wasaaradaha qorshaynta, maaliyadda, horumarinta reer miyiga (dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada)</p>	<p>Si loo dheellitiro kharashka badan ee gala bilowga ganacsiga kalluumaysiga, in qorshaha lugu daro in canshuur dhaaf loo sameeyo maalgashadayaasha dalka iyo kuwa dibadda ee ka kalluumaysanaya Aagga Dhaqaalaha ee Soomaaliya (EEZ).</p>
	<p>Maalgalinta gudaha iyo tan dibadda waxaa caqabad ku ah jawiga guud ee dalka oo aan sahlamayn diyaarna u ahayn maalgashiga.</p>	<p>Rugaha ganacsiga; saamileyda caalamiga ah ee horumarinta;</p> <p>Wasaaradaha dekedaha iyo gaadiidka badda (dowladda dhexe &amp; dowlad goboleedyada);</p> <p>Maalgashadayaasha (Soomaali iyo kuwo ajaanibta ah)</p>	<p>In la dhiirrigaliyo maalgashiga tooska ah ee shisheeyaha ama midka gaarka loo leeyahay maalgashiyadaa oo gaar u ah horumarinta ganacsiga kalluumaysiga la joogtayn karo kuwaa oo bixiya deymo dulsaar dhaaf ah, xilliga lagu soo celinayana aanu xilli dhow ahayn isla markaana saameyn weyn oo dhaqaale aan ku yeelanayn deyn qaataha; lana raadiyo kaalmo farsamo oo lagu hiigsanayo horumarinta xirfadaha iyo khibrada kalluumaysiga.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Wax kaqabo gaabiska ka muuqda kalluumaysiga iyada oo loo marayo tayeynta waxbarashada iyo tababarrada.</b></p>	<p>Dalku ma laha shaqaale xirfad kalluumaysi oo tayeysan leh. Jaamacadaha iyo Machadyada tacliinta kalluumaysigu ma laha tababarkii iyo kartidii loo baahnaa si ay usoo saaraan kalluumaystayaal xirfad sarraysa leh.</p>	<p>Wasaaradaha Kaluumaysiga iyo kheyraadka Badda; dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada);</p>	<p>Diyaari oo hirgeli qorshe horumarinaya kartida (aqooneed iyo xirfadeed) ee bulshada oo gaar u ah isha wax-soo-saarka ee kalluumaysiga.</p>
	<p>Haddii aan wax laga qaban xirfad yarida shaqaalaha kalluumaysigu waxa ay caqabad ku noqonaysaa helidda maalgelinta.</p>	<p>Wasaaradaha waxbarashada; Qorshaynta; Maaliyadda</p>	<p>Sii sharciyad, awood iyo fududayn Hay'adda Qaranka ee Tacliinta Sare (HQTS) si ay mas'uul uga noqoto una kormeerto waxbarashada culuunta badda iyo kalluumaysiga.</p>
	<p>Tababarrada xirfadaha ee haatan jira ma aha kuwa ka jawaab-celinaya baahida suuqa ka jirta.</p>	<p>Rugaha ganacsiga;</p>	<p>In la sameeyo dib u eegis joogta ah iyo is waafajin ku aaddan barnaamijta waxbarasho ee kalluumaysiga la xiriira ee ay bixiyaan machadyada dalka si loola socdo tayada iyo islahanta xirfadaha iyo baahida kalluumaysiga taas oo ku xiran hannaanka qiimaynta Shahaadooyinka Dalka</p>
	<p>Waxbarashada iyo xirfadaha la xiriira kalluumaysiga ee machadyada dalka ee tacliinta sare waxa ay aad ugu baahan yihiin hagaajin, kormeer, caawimaad, isku xir, qorshayn iyo dib-habayn ka go'an oo saamileyda oo dhan ah.</p>	<p>Saamileyda caalamiga ah ee horumarinta;</p>	<p>In lugu dhiirrigaliyo machadyada tacliinta sare in ay u kala qeybiyaan koorsooyinka shahaadada ee ay bixiyaan 4 qaybood oo kala sarreeya (shahaado, diblooma, baajulaar dhiman iyo baajulaar buuxda) si loo kordhiyo fursadda shaqo ee ardayga loona daboolo xirfad la'aanta jirta.</p>
		<p>Machadyada tacliinta sare;</p>	<p>In la sameeyo barnaamij meelo ku habboon laga bixiyo oo tababarka farsamada gacanta ah oo heer kulliyadeed iyo heer jaamacadeed ah oo ay dowladdu maalgaliso, gaarna u ah kalluumaysiga kuwaa oo leh qalabkii, macalimiintii iyo maaliyaddii loo baahnaa si ay usoo saaraan shaqaale xirfad leh oo si hufan u tababaran.</p>
		<p>Hay'adaha aan dowliga ahayn ee dalka iyo dibadda</p>	<p>In la diyaariyo machad cilmi-baariseed oo gaar u ah kalluumaysiga kaa oo ay xaruntiisu tahay Muqdisho, faracyana ku leh dhammaan dowlad goboleedyada.</p>
			<p>In lugu dhiirrigaliyo machadyada tacliinta sare ee hadda jira in ay bixiyaan takhasus cilmiyeed iyo mid saynis kaa oo dabooli kara baahida loo qabo kartida iyo xirfadda shaqo ee il-dakhliyeedka kalluumaysiga.</p>
			<p>In la hubiyo tababarrada kalluumaysiga la xiriira ee ay bixiyaan hay'adaha dalka iyo kuwa dibadda ka yimid in ay yihiin kuwa ka jawaabaya ama daboolaya baahida xirfadaha kalluumaysiga ee hadda jira.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka
<p><b>Waa in la abuuro qorshe lagu shaqaalaysiinayo ardayda ka qalinjabisa kalluumaysiga iyada oo kor loo qaadayo shaqo-galnimadooda iyo fursadaha shaqo-helidda kaddib marka ay qalin jabiyaan.</b></p>	<p>Si habboon isuguma dheelli-tirna barnaamijyada tababarka ee kalluumaysiga iyo tacliinta sare ee dalka laga helo iyo baahida xirfadda ee suuqa ka jirta. Is dabamarkaasi waxa uu ardada kulliyadaha kasoo baxa iyo goobaha shaqadaba ku ridaa niyadjab xagga shaqada ah. Goobaha shaqadu ma helaan shaqaale xirfaddii ay u baahnaayeen leh.</p>	<p>Wasaaradaha kalluumaysiga, shaqada iyo shaqaalaha, waxbarashada iyo qorshaynta ee dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada;</p> <p>Jaamacadaha iyo machadyada culluunta badda,</p> <p>Rugaha ganacsiga Maalgaliyayaasha caalamiga ah,</p> <p>Hay'adaha samafalka ee caalamiga ah iyo kuwa dalka</p>	<p>Samee guddi hoosaad isku dhafan oo ka kala imanaya saamileyda tacliinta, ganacsatada, wasaaradaha kalluumaysiga, deeq-bixiyayaasha iyo ardayda si looga tashado loolana socdo baahiyaha xirfadeed iyo kuwa mustaqbalka ee kalluumaysiga.</p>
			<p>Abuur iskaashi dhex mara ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo saamileyda kale ee kalluumaysiga si loo sameeyo barnaamij waxbarasho oo deeq ah oo tababar farsamo bixiya si kor loogu qaado diyaar ahaanshaha shaqo ee ardayga la isuguna xiro shaqaalaha cusub iyo goobaha shaqada.</p>
			<p>Canshuur dhaaf sii goobaha shaqada si loogu dhiirrigeliyo in ay shaqaalaysiiyaan, siiyaanna tababar xirfadeed iyo mid shaqo ardada kasoo qalinjabisa tacliinta badda iyo kalluumaysiga.</p>
			<p>Waa in dib loo qiimeeyo shahaadooyinka kalluumaysiga iyo xirfadaha la doonayo ee shaqooyinka dowladda, waana in la shaqaaleeyo ardayda kasoo qalinjabisa kulliyadaha dalka.</p>
			<p>In la daabaco lana faafiyo xogta la xiriirta baahida jirta ee xirfadda si laysu waafajiyo baahidaas iyo shaqooyinka mustaqbalka iyo koorsooyinka la bixinayo.</p>
			<p>Ku dar tababarka kalluumaysiga koorsooyin maamulka ganacsiga ah iyada oo la tixgelinayo in qaar ka mid ah ardaydu ay iskood u shaqaysan doonaan iyo muhiimadda xirfadaha maareynta ganacsiga.</p>
			<p>Samee iskaashi saameyn leh kaa oo ganacsiyada cusub u fududaynaya hellida maalgalin, in ay helaan, kaabayaasha qalabka kalluumaysiga iyo dhiirrigalin kale oo loogu talagalay ardada qalin jabinaysa si ay u bilaabi karaan shirkado yar-yar.</p>

Tabaha	Caqabadaha	Saamileyda	Talaabooyinka	
<p><b>Waa in la dhisaa, la mideeyo, korna loo qaado awoodda iskaashatooyinka kalluumaysiga si wadajir ahaan loogu maamulo kaydka kalluun ee ceegaaga xeebaha dalka &amp; kheyraadka badda.</b></p>	<p>Iskaashatooyinka kalluumaysiga ee dalku waa kuwo aan xooganayn, lahayna awooddii ay kaga qayb-qaadan lahaayeen maamulka kheyraadka badda iyo xeebaha dalka.</p>	<p>Wasaaradaha kalluumaysiga iyo kheyraadka badda;</p>	<p>Samee nidaam ruqso bixineed oo laga doonayo dhammaan doomaha kalluumaysiga ee dalka si loo xaddido kalluumaysiga bilaa-xudduudda ah ee xeebaha dalka.</p>	
		<p>Rugaha ganacsiga;</p>	<p>Samee goobo cayiman oo kalluunka la keeni karo markii la soo qabto; kana mamnuuc in kalluunka laga soo dejiyo meel aan ahayn meelaha loo cayimay.</p>	
	<p>Kalluumaysatadu waxa ay aaminsan yihiin aragti khaldan oo ah in kalluunku aanu dhammaan karin.</p>	<p>Maalgaliyayaasha;</p>	<p>Samee xafiis iyo shaqaale maamula xeebaha kuwaa oo isha ku haya dhammaan kalluunka kasoo dega goobaha loo cayimay iyo xeebaha oo dhan.</p>	
	<p>Arrintaa waxaa ka sii daran in cid walba oo dooonta ay xeebaha Soomaaliya ka jilaabato iyada oo aanay jirin wax xaddidaya wakhtiga uu kalluumaysan karo iyo tirada kalluunka ee uu qabsan karo.</p>	<p>Iskaashatooyinka kalluumaysiga.</p>	<p>Samee iskaashatooyin kalluumaysi oo heer degmo ah, kuwa haatan jirana dib u habeeyn ku samee si daahfurnaana iyo wadatashi leh iyada oo guddiyada maamulkana si xor ah oo xalaal ah loo dooranayo.</p>	
		<p>Dawladaha hoose;</p>		<p>Dhammee diiwaangelinta hakatay ee kalluumaysatada dalka ah ee Puntland, Galmudug, iyo Jubbaland, islamarkaana gaarsii ama habkaan ku baahi gobollada Hirshabeelle iyo Koonfur Galbeed iyada oo la hubinayo in dhammaan kalluumaysatada dalku ay is diiwaangeliyaan.</p>
		<p>Machadyada farsamada iyo tababarka gacanta</p>		<p>Amar kalluumaysatada dalku in ay ku biiraan iskaashatada degmadooda ka jirta.</p>
		<p>Saamileyda caalamiga ah ee horumarinta.</p>		<p>Sii iskaashatada kalluumaysiga tababar xirfaddooda lagu dhisayo kuwaas oo ay ka mid yihiin mabaadiida wada-maamulka si loogu sahlo in ay arrimahooda si hagaagsan u maamulaan loona wada-maamulo kheyraadka badda.</p>
				<p>U fidi deeq waxbarasho kalluumaysatada taas oo lugu dhisayo fahankooda kobcinta noolaha badda, ilaalinta khayraadka badda iyo isticmaalka kheyraadka badda iyada oo aan waxyeello loo geysaneyn tirada iyo tayada kheyraadka badda lana adeegsanayo isticmaalka qalab iyo habab aan kheyraadka badda wax u dhimayn.</p>

